



Ku Soo Dhowoow Waddanka Maraykanka Hagaha Muhaajiriinta Cusub



U.S. Citizenship
and Immigration
Services



Ku Soo Dhowoow Waddanka Maraykanka

Hagaha Muhaajiriinta Cusub



U.S. Citizenship
and Immigration
Services



U.S. GOVERNMENT OFFICIAL EDITION NOTICE



Use of ISBN Prefix

This is the Official U.S. Government edition of this publication and is herein identified to certify its authenticity. Use of the 0-16 ISBN prefix is for U.S. Government Printing Office Official Editions only. The Superintendent of Documents of the U.S. Government Printing Office requests that any reprinted edition clearly be labeled as a copy of the authentic work with a new ISBN.

The information presented in *Welcome to the United States: A Guide for New Immigrants* is considered public information and may be distributed or copied without alteration unless otherwise specified.

The citation should be:

U.S. Department of Homeland Security, U.S. Citizenship and Immigration Services, Office of Citizenship, *Welcome to the United States: A Guide for New Immigrants*, Washington, DC, 2009.

USCIS has purchased the right to use many of the images in *Welcome to the United States: A Guide for New Immigrants*. USCIS is licensed to use these images on a non-exclusive and non-transferable basis. All other rights to the images, including without limitation and copyright, are retained by the owner of the images. These images are not in the public domain and may not be used except as they appear as part of this guide.

This guide contains information on a variety of topics that are not within the jurisdiction of DHS/USCIS. If you have a question about a non DHS/USCIS issue, please refer directly to the responsible agency or organization for the most current information. This information is correct at the time of printing; however, it may change in the future.

Ku Soo Dhowoow Waddanka Maraykanka

Hagaha Muhaajiriinta Cusub

Hanbalyo inaad noqotay qof haysta sharciga deganaanshaha Waddanka Maraykanka. Anagoo ka wakiil ah Madaxweynaha Maraykanka iyo dadka Ameerikaanka ah, waan idin soo dhoweynaynaa waxana idiin rejeynaynaa in aad guul ka gaadhaan wax kasta oo aad sameysaan Waddanka Maraykanka.


Waddanka Maraykanku wuxuu leeyahay taariikh aad u dheer xagga soo dhoweynta muhaajiriinta ka yimaada qaybaha caalamka oo dhan. Dhaqanka qiimaha badan ee Waddanka Ameerika waxaa kordhiyey muhaajiriinta, kuwaas oo weli sii wada kobcinta iyo dhawrista hiddaha iyo dhaqanka Waddankani kula magac baxay dhulkii xoriyada iyo fursadaha.

Markaad tahay qof haysta sharciga deganaanshaha Waddanka Maraykanka, waxaad go'aansatay in uu waddankani noqdo dalkaagii. Muddada aad ku hawlan tahay si uu muraadkaagu kuu hirgalo, isku day in aad waqti siisid barashada taariikhda iyo dadka waddankan. Waa Xuquuqdaada iyo mas'uuliyadi ku saraan qaabeynta mustaqbalka danbe ee waddankan iyo hubinta sii wadida guushiisa.

Fursado Farxad leh ayaa ku sugaya markaad noloshada ka bilowdid waddankan qiimahe leh. Ku soo dhowoow Waddanka Maraykanka!

Adeegyada Wadaninimada iyo Socdaalka ee Maraykanka (USCIS)

DEGITAANKA WADDANKA MARAYKANKA



TUSMOOYINKA BOGGAGA

Ku Soo Dhowoow Waddanka Maraykanka:	
Hagaha Muhaajiriinta Cusub	i
Waaxada Dowladda Sare iyo	
Hay'adaha	iv
Macluumaadka Intaa ka Badan	v
 Ku Saabsan Hagahan	 1
Xagee Baa Caawimaad	
ka Heli Kartaa	2
Ka Qayb Qaadashada	
Arrimaha Bulshada	3
 Xuquuqdaada iyo Mas'uuliyadaha kaa	
Saaran Deganaanshaha Rasmiga ah	5
Xuquuqdaada iyo Mas'uuliyadaha	
ku Saaran	6
Dhowr Haysashada Sharciga	
Deganaanshaha	7
Haddii aad Tahay Qof Shuruud	
ku Degan Waddankan	8
Helista Qareen Ku Takuleeyo	9
Waxa ka Iman kara Dhaqanka Fal	
Denbi ee Deganaha Rasmiga ah	11
 Degitaanka Waddanka Maraykanka	 13
Helitaanka Meel la Dego	14
Qaadashada Lambarka Nabadsugida	
Bulshada	18
Dhawrashada Lacagtaada	20
Shaqo Raadinta	22
Cashuur Bixinta	26
U kala Socdaalida Waddanka	
Maraykanka Gudihisa	28
Daryeelida Caafimaadkaaga	30
Manfacyada Barnaamijyada kale	
ee Dowladda	32
 Waxbarashada iyo Daryeelka Carruurta	 33
Waxbarasho	34
	38
	40
	40
	42
	45
	46
	47
	49
	51
	52
	52
	54
	56
	56
	58
	59
	59
	61
	62
	63
	70
	71
	71
	72

WAAXYADA DOWLADDA SARE IYO HAY'ADAHA

Haddii aadan hubin waaxda aad wacaysid su aad su'aalu weydiinta, waxaad wacdaa 1-800-FED-INFO (ama 1-800-333-4636) oo weydii meesha aad rabtid. Dadka dhegaha aan si fiican wax u maqli karin waxay waci karaan lambarkan 1-800-326-2996.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa shebekada internetka oo ciwaankeedu yahay <http://www.USA.gov> oo aad ka heli kartid wixii warbixin guud ah oo ku saabsan waaxda dowladda sare iyo hay'adaha.

Waaxda Waxbarashada (ED)

U.S. Department of Education
400 Maryland Avenue SW
Washington, DC 20202
Taleefoonkoodu waa: 1-800-872-5327
Dadka dhegaha la': 1-800-437-0833
<http://www.ed.gov>

Guddiga Dhowre (Ilaaluya) Sinnaanta Fursadaha Shaqaalayntaa (EEOC)

U.S. Equal Employment Opportunity Commission
1801 L Street NW
Washington, DC 20507
Taleefoonkoodu waa: 1-800-669-4000
Dadka dhegaha la': 1-800-669-6820
<http://www.eeoc.gov>

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka (HHS)

U.S. Department of Health and Human Services
200 Independence Avenue SW
Washington, DC 20201
Taleefoonkoodu waa: 1-877-696-6775
<http://www.hhs.gov>

Waaxda Nabadsugida ee Dalka Maraykanka (DHS)

U.S. Department of Homeland Security
Washington, DC 20528
<http://www.dhs.gov>

Adeegyada Wadaninimada iyo Socdaalka ee Maraykanka

U.S. Citizenship and Immigration Services (USCIS)
Taleefoonkoodu waa: 1-800-375-5283
Dadka dhegaha la': 1-800-767-1833
<http://www.uscis.gov>

Waaxda Kastamka iyo Ilaalinta Xuduudka ee Maraykanka

U.S. Customs and Border Protection (CBP)
Taleefoonkoodu waa: 202-354-1000
<http://www.cbp.gov>

Waaxda Socdaalka iyo Meel-Marinta Kastamka ee Maraykanka

U.S. Immigration and Customs Enforcement (ICE)
<http://www.ice.gov>

Waaxda Guryaha iyo Magaalaynta Horumerinta (HUD)

U.S. Department of Housing and Urban Development
451 7th Street SW
Washington, DC 20410
Taleefoonkoodu waa: 202-708-1112
Dadka dhegaha la': 202-708-1455
<http://www.hud.gov>

Waaxda Caddaalada (DOJ)

U.S. Department of Justice
950 Pennsylvania Avenue NW
Washington, DC 20530-0001
Telefoonkoodu waa: 202-514-2000
<http://www.usdoj.gov>

Laanta Adeega Canshuurta

Internal Revenue Service (IRS)
Taleefoonkoodu waa: 1-800-829-1040
Telefoonka Dadka dhegaha la': 1-800-829-4059
<http://www.irs.gov>

Habka Xulka Qaranka

Selective Service System (SSS)
Registration Information Office
PO Box 94638
Palatine, IL 60094-4638
Taleefoonkoodu waa: 847-688-6888
Telefoonka Dadka dhegaha la': 847-688-2567
<http://www.sss.gov>

Maamulka Nabadsugida Bulshada

Social Security Administration (SSA)

Office of Public Inquiries

6401 Security Boulevard

Baltimore, MD 21235

Taleefoonkoodu waa: 1-800-772-1213

Dadka dhegaha la': 1-800-325-0778

<http://www.socialsecurity.gov> ama

<http://www.segurosocial.gov/espanol/>

Waaxda Arrimaha Dibadda ee Maraykanka (DOS)

U.S. Department of State

2201 C Street NW

Washington, DC 20520

Telefoonkoodu waa: 202-647-4000

<http://www.state.gov>

MACLUUMAADKA INTAA KA BADAN:

Booqo shebekada internetka Adeegyada Wadaninimada iyo

Socdaalka ee Maraykanka (USCIS) oo ciwaankeedu yahay

<http://www.uscis.gov>. Fadlan sidoo kale booqo

<http://www.welcometousa.gov>, goraallo fa'iidooyin u leh

muhaajiriinta cusub.

Wac Adeega Macmiilka (Customer Service) oo lambarkoodu

yahay 1-800-375-5283 ama 1-800-767-1833 (Dadka

dhegaha la').

Si aad u heshid foomamka Adeegyada Wadaninimada iyo

Socdaalka ee Maraykanka (USCIS), waxaad wacdaa

1-800-870-3676 ama eeg shebekada internetka ee USCIS.



Ku Saabsan Hagahan

La qabsashada noloshaada cusub ee Ameerika waxay qaadani doontaa waqti. Hagahani wuxuu ka kooban yahay macluumaad aasaasi ah oo kaa caawimi doona sidaad u degi lahayd Waddanka Maraykanka oo adiga iyo qoskaaguba uga baahan tihiin nolol-maalmeedka. Sidoo kale waxay guud maraysaa macluumaadka muhiimka ah oo ku saabsan arrimaha sharciyada, hay'adaha iyo ururada bixiya waraaqaha ama adeegyada lagama-maarmaanka ah oo laga yaabo in aad u baahan tahay.

Maadaama aad tahay qof sharciga deganaanshaha rasmiga ah leh, waa in aad biloowdid barashada waddankan, dadkiisa iyo hababka ay dowladoodu u shaqayso. Isticmaal hagahan si aad u ogaato xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadaha kaa saaran muhaajir ahaan, si aad u fahanto sida dowladda sare, gobolka iyo dowladda hoose u shaqeeyaan iyo in aad barato siday muhiim u tahay dhacdooyinka taariikhda ee Waddanka Maraykanku soo maray. Wuxuu sidoo kale hagahani kuu sharraxayaa muhiimada la ka qayb qaadashada xidhiidhida beeshaada oo wuxu ku siinayaa talooyin kaa gargaara sidaad taas u samayn lahayd.

Hagahan wuxuu guud marayaa xuquuqaha, mas'uuliyadaha iyo qaynuunada la xidhiidha sharciga deganaanshaha rasmiga ah. Si aad u hesho faahfaahin gaar ah oo intaa ka badan waa in aad barataa sharciyada, foomamka ama qawaaniinta qaadashada shahaadada dhalashada iyo Adeegyada Wadaninimada iyo Socdaalka ee Maraykanka (USCIS). Waa inaad mar kasta kaashataa kheyraadka ama goraalada dheeraadka su'aalahaaga gaarka ee socdaalka ama kiiskaaga. Macluumaadka badankeed oo aad u baahan tahay waxaad ka heleysaa shebekad internetka ee USCIS-da oo ah <http://www.uscis.gov>. Foomamka USCIS waxaad heli haddaad wacdid 1-800-870-3676 oo waxaad heli warbixin dheeraad ah haddii aad wacdid Adeega Macmiilka 1-800-375-5283 ama 1-800-767-1833 (Dadka dhegaha la').

Xagee Baa Caawimaad ka Heli Kartaa

Hagahan ayaa kaa caawimidoona sidaad wax u bilaabai, laakiin kama jawaabi karo dhamaan su'aalaha aad ka qabtid nolosha Waddanka Maraykanka. Si aad u heshid macluumaad intaa ka badan, waxaad la xidhiidhi kartaa gobolka, degmada ama maamulka magaalada si aad u ogaatid adeegyada aad u baahan tahay ama kala tasho ururada caawiya muhaajiriinta cusub ee waddanka soo dega. Waxaad ka heli kartaa xafiisyadan iyo ururadan isticmaalka ilaha bilaashka ah oo hoos ku qoran.

Maktabada Dadweynaha

Maktabadaha dadweynaha ee Waddanka Maraykanaka waa bilaash u furan qof kasta. Maktabaduhu inta badan waxay ku yaalaan xaafadaha bulshada. Shaqaalaha Maktabada waxay kugu caawin karaan helistanka macluumaadka maado kasta iyo qaadashada kaadhka maktabada kaas oo aad alaab ku amaahan kartid, sida buuggag iyo cajaladaha oo bilaash ah. Sidoo kale maktabadaha intoodda badan waxay hayaan wargaysyo aad akhrisan kartid iyo kombiyuutarka aad internetka ka isticmaali kartid. Warsa shaqaalaha maktabada in ay ku tusaan sida loo isticmaalo kombiyuutarka iyo internetka.



Maktabadaha qaarkood waxay bixiyaan casharo lacag la'aan ah oo ah sida loo isticmaalo internetka. Sidoo kale maktabadaha qaarkood waxay bixiyaan barista luqada Af-ingiriisida ama casharo iyo barnaamijyada caruurta iyo dadka-waaweyn.

Buugga liiska Telefoonka

Buugga liiska Telefoonadu wuxuu ka kooban yahay lambarada telefoonada iyo macluumaadka muhiimka ah oo ku saabsan dowladda sare, gobolka iyo adeegyada bulshada. Telefoon buugu wuxuu leeyahay macluumaadka xaalada degdegga ah, khariidada magaalada iyo warbixin ku saabsan sida loo helo adeegyada telefoonka. Buuga bogagga cad waxaa ku taxan lambarada telefoonada dadka, bugga bogagga jaallaha ah waxaa ku taxan lambarada iyo ciwaanka ganacsiyada iyo ururada, kan bogaggiisu yihiin

buluuga wuxuu ku tusayaa telefoonada iyo ciwaanka xaafiisyada magaalada, gobolka iyo kuwa dowladda sare. Sidoo kale waxaad wici kartaa lambarka 411 si aad u heshid telefoonada lambarka khaaska ah oo aad raadinaysid Maraykanka gudahiisa. Sidoo kale waxaa laga yaabaa in magaaladaadu leedahay telefoon buugga bulshada.

Shebekada Internetka

Internetku wuxuu kugu xidhiidhin karaa meelo badan oo aad macluumaada ka heli kartid, kuwaas oo ay ka mid yihiin shebekada internetka ee dowladda sare, gobolka iyo hay'adaha dowladda hoose. internetyada dawlada intooda badan waxa ciwaankoodu ku dhammaadaa “.gov”. Haddii aadan guriga kombiyuutar ku haysan waxaad isticmaali kartaa kan maktabada dadweynaha ama makhaayadaha internetka leh, oo lacag la iska qaado isticmaalka internetka. Waxaad internetka ka raadsan kartaa shaqooyin, guri helis, iskuulaadka caruurta kuu dhigan karaan, ururada beesha iyo meelaha ku caawimi kara. Sidoo kale waxaad internetka ka heli kartaa akhbaaraha muhiimka ah, dhacdooyinka, ogaanshaha waxyaabaha ku saabsan nololsha Ameerika, taariikhda Waddanka Maraykanka iyo dowladda ama bulshada. Booqo <http://www.welcometousa.gov> si aad u heshid dhammaan ilaha dowladu ugu talagashay muhaajiriinta cusub.

➔ **TALO:** Muhaajir ahaan waa in aad ka taxadirtid waxyaabaha dadka khaayimiinta ee samaystay internet kuwa dowlada u eg, si ay kuu khaldaan oo kaaga faa'iideystaan. Xusuusnoow shebekada internetka ee Adeegyada Wadaninimada iyo Socdaalka ee Maraykanka (U.S. Citizenship and Immigration Services) waa <http://www.uscis.gov>.

Beesha-iyo Ururada Diinta oo Kaalmeeya Muhaajiriinta/Soo-galeetiga

Waxaa jira ururo ku yaal beelo badan oo siiya muhaajiriinta kaalmooyin bilaash ah ama qiime jaban. Ururadani waxay kugu caawimi karaan in aad baratid waxyaabaha ku saabsan beeshaada iyo adeegyada kuu diyaarka ah muhaajir ahaan. Waxaad ururadan ka raadin kartaa shebekada internetka, ka eegi kartaa buuga talafoobada degmada, weydiin kartaa maktabada dadweynaha iyo hay'ada adeegyada bulshada ee degmada aad ku nooshahay.

Ka Qayb Qaadashada Arrimaha Bulshada

Ka qayb qaadashada beeshaadu waxay kugu caawimi doontaa dareenka ah in aad joogtid dalkaagii. Sidoo kale beeshaadu waxay kuugu fiican tahay ilaha macluumaadka. Waa kuwan qaarkood siyaabaha looga qayb qaato:

- Is bar ama baro deriskaaga ama jaarkaaga.
- La hadal ama booqo ururdada beesha oo ka caawiya muhaajiriinta degitaanka Waddanka Maraykanka.
- Ku biir kooxaha jooga meelaha lagu cibaadeysto ama masaajidada.
- Ku biir ururada xaafadaada. Kooxahan xaafada oo kulanka isugu yimaada waxay ka wada shaqeeyaan waxyaabo xaafada saameyn kara.
- Ugu tabaruc ururada beeshaada, iskuulka iyo masaajidka ama meelaha lagu cibaadeysto.
- Isku soo qor meelaha laga barto Af-ingiriisida.

Waxaad ka heli karta fikrado intaa ka badan oo ku saabsan ka qayb qaadashada Waaxda Guryaha iyo Magaalaynta Horumerinta shebekada internetka <http://www.hud.gov>. Eeg qaybta bulshooyinka ee “Communities” sii aad u heshid warbixin ku saabsan bulshooyinka iyo talooyin la xiriira sidaad uga qayb qaadan kartid.

MACLUUMAADKA INTAA KA BADAN:



Booqo shebekada internetka ee USCIS oo ah <http://www.uscis.gov>. Fadlan sidoo kale booqo <http://www.welcometousa.gov>, oo ah ilaha soogaleediga cusub.



Ka wac Adeega Macmiilka (Customer Service) lambarka 1-800-375-5283 ama Dadka dhegaha la' 1-800-767-1833.



Helista foomamka USCIS da, waa inaad wacdo 1-800-870-3676 ama eegto shebekada intarnet ee USCIS.



Xuquuqdaada iyo Mas'uuliyadaha kaa Saaran Deganaanshaha Rasmiga ah

Markaad waddanka sharci rasmi ah ku leedahay, waxaa lagaa filanayaa inaad tixgelisid oo daacad u ahaato Maraykanka iyo dhawrista sharciyada waddankeena. Sidoo kale deganaanshaha, rasmiga ah, micneheedu waxaa weeye inaad leedahay xuquuq cusub iyo mas'uuliyado.

Ahaanta deganaha rasmiga ah waa “mudnaan gaar ah” ee ma ahaa “xuquuq”. Dowladda Maraykanku way kaa qaadi kartaa sharcigaaga rasmiga ah iyadoo loo cuskanayo shuruudaha qaarkood. Waa inaad haysatid sharcigaaga rasmiga ah haddii aad rabtid inaad ku sii noolaatid ama ka shaqaysato waddanka oo qaadatid dhalashada Maraykanka maalin maalmaha ka mid ah. Qaybtan, waxaad baran doontaa micnaha deganaanshaha rasmiga ah iyo sida loo ilaaliyo haysashada derejada sharcigaaga rasmiga.

Xuquuqdaada iyo Mas'uuliyadaha ku Saaran

Waxaad hadda samayso adiga oo haysta deganaanshaha rasmiga waxay saamayn kartaa qaadashada danbe ee dhalashada Maraykanka. Habka qaadashada dhalashada Maraykanka waxaa loogu yeedhaa waddaniyeynta (“naturalization”).

Rasmi u deganaade ahaan, waxaad xaq u leedahay:

- Deganaanta iyo ka shaqayn rasmi ah meel kasta oo ka mid ah Waddanka Maraykanka.
- Waxaad dalban kartaa dhalashada Maraykanka markaad u qalantid.
- Waxaad codsan kartaa fiise in ninkaaga ama xaaskaaga iyo caruurtaada aan xaasleeyda ahayn kugula noolaadaan Waddan Maraykanka.
- Inaad qaadata Sooshal Sakuuratiga, Dakhliga Taakuleyta Nabadsugida (SSI), iyo manfacyada daryeelka caafimaadka (Medicare), haddii aad u qalantid.
- Inaad hanti ku yeelato Waddanka Maraykanka.
- Inaad ka dalbato gobolkaaga ruqsada baabuurka lagu wado.
- Inaad kaga baxdo ama ku soo noqoto Waddanka Maraykanka xaalado gaar ah.
- Inaad gasho iskuulka dowladda iyo kuliyaada.
- Inaad ku biirto laamaha ciidamada qalabka sida qaarkood ee Waddanka Maraykanka.
- Inaad iibsato ama yeelato qori, haddii aanay jirin sabab gobol ama degmo ahaan laguugu diidayo inaad iibsan karin wax hub ah.

Rasmi u deganaade ahaan, waxay mas'uuliyadi kaa saraan tahay:

- In aad dhawrtid dhammaan sharciyada dowladda sare, gobolka iyo gudaha.
- In aad bixisid dakhliga cashuurta dowladda sare, gobolka iyo degmadaba.
- In aad iska diiwaangelisid Habka Xulka Qaranka Ciidamada qalabka sida ee Maraykanka (U.S. Armed Forces), haddii aad lab tahay da'da u dhexeysa 18 ilaa 26. Eeg boga 8 ee fariimaha.
- In aad ilaalisid ama haysatid sharcigaaga socdaalka.
- In aad markasta qaadata wax caddaynaya sharciga aad ku joogtid.
- Markasta oo aad guurtid bedel ciwaankaaga internetka ama qoraal u dir Waaxda Nabadasugida ee Dalka Maraykanka (DHS) 10 maalmood gudahood. Ka eeg boga 8 wixii fariimo ah.

Dadka haysta degaanshaha rasmiga ah, waxaa la siiyaa kaadhka deganaanshaha rasmiga ah oo ah (foomka I-551) kaas oo caddaynaya sharciga ay Waddanka Maraykanka ku joogaan. Dadka qaarkood waxay ugu yeedhaan “Giriin Kaadh”. Haddii aad tahay deganaade rasmi ah oo jira ama ka weyn 18 jir, waa inaad qaadatid wax caddaynaya sharciga aad waddanka ku joogtid. Waa inaad tustid sarkaala laanta socdaalka haddii uu ku weydiiyo. Kaadhkaaga waxaad haysan kartaa 10 sano, waana inaad dib u cusboonaysiisaa kahor intaanu dhacin. Waa inaad xeraysid foomka I-90, bedelaada ama dib u cusboonaysiinta Giriin Kaadhka (Application to Replace Permanent Resident Card). Waxaad foomkan ka heli kartaa internetka <http://www.uscis.gov> ama wac khadka foomamka ee USCIS. Waxaa jirta lacag la bixiyo marka la xeraysanayo foomka I-90.



Kaadhkaaga Deganaanta Rasmiga ah wuxuu muujinayaa in lagu oggolyahay inaad ku noolaatid kana shaqaysid Waddanka Maraykanka. Sidoo kale waxaad kaadhkaaga u isticmaali kartaa dib u soo gelida Waddanka Maraykanka. Haddii aad Waddanka Maraykanka ka maqnaatid muddo ka badan 12 bilood, waxaad u baahan tahay inaad wadatid waraaqo dheeraad ah, si aad dib ugu soo noqotid Waddank Maraykanka. Eeg boga 7 wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dib u soo gelida Waddanka Maraykanka haddii aad ka maqnayd waddanka in ka badan 12 bilood.

DUKUMENTIYO KALE OO MUHIIM AH



Meel ammaan ah ku hayso waraaqahaaga muhiimka ah oo aad waddankaagii kala timi. Dukumentigan waxaa ka mid ah baasaboorka, warqada dhalashada, warqada meherka, warqada furniinka iyo shahaadada dugsiga sare ama tan jaamacada iyo shahaadooyinka kale oo muujinaya inaad qaadatay tababar ama xirfooyin gaar ah.

Dhowr Haysashada Sharciga Deganaanshaha


Waxaa jira waxyaabo ah inaad sameysid si aad u haysatid sharciga deganaanshaha. Waxaa kaloo muhiim ah inaad xusuusnaatid kuwan haddii aad qorshaynaysid mustaqbalka inaad dalbatid sharciga dhalashada ee Maraykanka.

- Ha ka maqnaan Waddanka Maraykanka muddo dheer hana ugu guurin waddan kale inaad si rasmi ah ugu noolaatid.
- Xeree cashuur celinta dowladda sare, gobolka iyo tan degmada haddii ay jiraan.
- Iska diiwaangeli Habka Adeega, haddii aad lab tahay oo da'daadu u dhexeyso 18 ilaa 26.
- Sii ciwaankaaga Waaxda Nabadsugida ee Dalka (DHS).

Ilaalsho Sharcigaaga Socdaalka

Dadka sharciga giriin kaadhka haysta oo waqti dheer ka maqnaada Maraykanka, ama aan caddayn karin ujeedadooda in ay si rasmi ah ugu noolaadaan Waddanka Maraykanka waxaa laga yaabaa in laga qaado sharciga deganaanshaha rasmiga ah. Muhaajiriin badan ayaa rumeysan inay waddanka dibadiisa ku noolaan karaan mar haddii ay sannadiiba mar ku soo noqonyaan Waddanka Maraykanka. Taasi waa khalad. Haddii aad ku fekereysid inaad ka maqnaatid Maraykanka in ka 12 bilood, waa inaad dalbatid oggolaanshaha dib u soo gelida intaadan bixin ka hor. Waa inaad xereysid foomka I-131, Dalabka Waraaqaha Socdaalka (Application for a Travel Document). Waxaad ka heli kartaa foomkan shebekada internetka <http://www.uscis.gov> ama waxaad wacdaa khadka foomamka USCIS oo ah 1-800-870-3676. Waa inaad bixiso lacagta foomka I-131 lagu dalbado.

Oggolaanshaha dib u soo gelida waqtigiisu waa ilaa labo sannadood. Waxaa tusti kartaa oggolaanshaha dib u soo gelida, intii aad tusi lahayd fiise ama Giriin Kaadhkaaga meesha laga soo galo. Haysashada oggolaanshaha dib u soo gelida ma aha ballan in lagu soo deynayo gudaha Waddanka Maraykanka markaad soo noqotid, laakiin waxay si sahlan u muujineysaa inaad ka soo noqotay dhoof kumeelgaadh ah. Booqo <http://www.state.gov> ama ka raadso macluumaad intaa sii dheer Waaxda Arrimaha Dibadda ee Maraykanka oo kuugu dhow.



Xereynta Celinta Cashuurta

Markaad tahay qof waddanka sharci ku degan, waa inaad xereysid cashuur celinta oo u sheegtid dakhliga ku soo gala Laanta Adeega Cashuurta (IRS) ama gobolkaaga, magaalada ama waaxda xisaabaatka haddi loo baahdo. Haddi aadan xereyn cashuur celinta intaad waddanka dibadiisa ku noolayd waqti kasta ha ahaadee, ama haddii aad tiraahdid waxan ahaa qof aan “muhaajir ahayn” oo ku buuxisid cashuur celinta, waxa laga yaabaa in dowladda Maraykanku go’aansato inaad ka noqotay ama nacday sharcigaagii rasmiga ahaa.

Iska Diiwaan Geli Xulka Qaranka

Haddii aad tahay nin 18 ilaa 26 jir ah, waa inaad iska diiwaan gelisid Xulka Qaranka. Markaad is diiwaangelisid, u sheeg dowladda inaad diyaar u tahay ku biirida Ciidamda Qalabka Sida ee Maraykanka. Hadda Maraykanku uma baahna in la qoro ciidamo militari ah. Taasi micnaheedu waa in qofka sharciga rasmiga leh iyo kan dhalashada haysta aan qasab ahayn in loo qoro Ciidamada qalabka sida haddi aanay iyagu doonayn.

Waxaad iska diiwaangelin kartaa xafiiska boostada Waddanka Maraykanka ama internetka. Si aad isugu saajisho Xulka Qaranka booqo internetka Xulka Qaranka <http://www.sss.gov>. La xidhiidhida qof ka tirsan Xulka Qaranka, wac 847-688-6888. Wicidda taleefankan bilaash ma aha.



Macluumaadka intaa ka badan waxaad ka oggaan kartaa interneka USCIS <http://www.uscis.gov>.

Ciwaankaaga Cusub sii Waaxda Nabadsugida ee Dalka Maraykanka (DHS)

Markasta oo aad guurtid, waa inaad ciwaankaaga cusub u sheegtid Waaxda Nabadsugida ee Dalka Maraykanka. Waa inaad buuxisid foomka AR-11, oo Kaadhka Bedelista Ciwaanka Qofka Ajnibiga ah (Alien’s Change of Address Card). Haddii aad guurtid waa inaad foomkan ku soo buuxisid 10 maalmood gudahood. Lacag ma aha xereynta foomkani. Waxaa kale oo laga yaabaa inaad ciwaankaaga ka bedeli kartid isticmaalka shebekada intarnet oo buuxisid foomka AR-11, Alien’s Change of Address Card, oo ah <http://www.uscis.gov>. Sidoo kale dadka intooda badan oo dacwado xerarysanyihiin waa loo oggol yahay inay ciwaankooda ka bedeshaan intarnet.

Macluumaadka intaa ka badan, ka wac USCIS 1-800-375-5283 ama booqo <http://www.uscis.gov>.

Haddii aad Tahay Qof Shuruud ku Deggan Waddankan

Waxaa laga yaabaa in deganaansahaaga Waddanka Maraykanku yahay mid Degaanaansho Xaddaysan (Conditional Resident [CR]). Waxaad tahay CR haddii aad xaaskaaga dhalashada ama sharciga giriin kaadhka haysta is guursateen muddo ka yar labo sannadood maalintii lagu siiyey sharciga rasmiga ah. Haddii aad caruur leedahay, iyaguna waxaa laga yaabaa inay yihiin CRs. Sidoo kale muhaajiriinta qaarkood oo maalgeliyayaasha ah waa kuwo sharci xadaysan ku degan.

Qofka sharciga CR-ka haystaa wuxuu leeyahay xuquuqo iyo mas’uuliyado la mid ah kuwa qofka rasmiga u degan haysto. Qofka Degaanaansho Xaddaysan haystaa waa inuu buuxiyo foomka I-751, oo ah Racfaan Masaafurinta ee deganaanta xadaysan (Petition to Remove the Conditions on Residence), ama buuxiyo

foomka I-829, oo ah Rafcaanka Ganacsadaha sharciga xadaysan ku jooga (Petition by Entrepreneur to Remove Conditions), oo muddadiisu tahay labo sanno laga bilaabo maalintii sharciga xadaysan la siiyey. Taariikhdaani waxay u badan tahay waqtiga uu dhacayo Kaadhka Deganaanshaha Rasmiga ah. Waa inaad ku buuxisid foomamkan muddo 90 maalmood gudohood ah oo ku eg labo sanno ka dib markii lagu siiyey sharciga xaddaysan ee rasmiga ah. Haddii aanad taas samayn, waad lumin kartaa sharcigaaga deganaanshaha.


La Buuxsashada Foomka I-751 Ninkaaga ama Xaaskaaga

Haddii aad tahay qofka sharciga xadaysan ku jooga oo xaaskaaga ama ninkaaga dhalashada ama sharciga giriin kaadhka haysta ku keenay, waa in xaaskaaga ama ninkaaga iyo adigu wada buuxsataan foomka I-751 si sharcigaaga looga saaro shuruuda ku xidhan.

Marmarka qaarkood looma baahna in aad adiga iyo ninkaaga ama xaaskaagu wada buuxsataan foomkan I-751. Haddii aad xaaskii ama ninkii is furteen ama xaasgaagu ama ninkaagu ku dhibaateeyo foomkaaga I-751 gooni u buuxso. Haddii aadan xaaskaaga ama ninkaaga wax la dalbanayn, waqti kasta ayaad dalban kartaa foomkan I-751 ka dib markaad noqoto qof haysta sharciga xadaysan.

SIDA LOO BUUXIYO FOOMAMKA USCIS I-751 IYO I-829

I-751, Petition to




Waa ayo: Qofka sharciga xadaysan ku jooga

Maxaa yeelay: In Degaanaansho Xaddaysan ee aad waddanka ku joogtid ku dhaco muddo labo sanno ah ka dib taariikhda aad noqotay CR.

Goorma: Marka deganeyaasha Degaanaansho Xaddaysan wax wada dalbanayaan waa in xaasku ama xaasluhu buuxiyo foomka I-751. Muhaajirka maalgeliyaha ah waa in uu buuxiyaa foomka I-829. Labadan foomba waa in lagu xereeyo 90 maalmood gudahood ka hor intaan sharciga xadaysan dhicin. Waa caadi in lagu qoro Kaadhka Deganaanshaha Rasmiga ah taariikhda uu dhacayo.

I-829, Petition by



Xaagee foomamka laga heli karaa: Waxaad wici kartaa khadka foomamaka USCIS-da ee 1-800-870-3676. Sidoo kale waxad foomamka ka heli kartaa <http://www.uscis.gov>.

Xaagee loo diraa foomamka: Waxaad u dirtaa xarunta Adeegyada Wadanimimada iyo Socdaalka ee Maraykanka (U.S. Citizenship and Immigration Service). Ciwaanka Xarunta Adeegyada wuxuu ku qoran yahay qaybta fariimaha ee foomka.

Waa imisa kharashku: Waa in aad bixisid lacag si aad u xeraysid foomka I-751-ka ama foomka I-829. Lacagta ujrada waa is bedeshaa, markaa ka eeg ujrada USCIS intaadan dirin foomka ka hor.

Haddii aad xeraysay foomka I-751 ama foomka I-829 intaanu sharcigu kaa dhicin, USCIS-tu waxay caadi ahaan kuu soo diri ogeysiis ay kuugu sheegayaan in lagu kordhiyey sharciga CR-ka muddo 12 bilood ah. Inta waqtigaa lagu dhex jiro, USCIS-tu waxay dib u daalacan doonaan codsigaaga.

➔ **TALO:** Nuqul kala hadh dhammaan foomamka aad u dirtid USCIS-ta ama xafiisyada dowladda ee kale. Markaad waraaqo diraysid, kuwa asalka ah ha dirin. Waxaad dirtaa koobiga. Marmarka qaarkood foomamku way lumaan. Koobi kala hadhisto waxay kaa caawimaysaa ka hortaga dhibaatooyinka.

Helista Qareen Ku Takuleeyo

Haddii aad u baahan tahay caawimaada arrimaha imigereyshanka ama socdaalka, waxaad isticmaali kartaa adeegyada qareenada imigereyshanka ama socdaalka oo ruqsada haysta. Waxaad u tegi kartaa ururka qareenada si ay kuugu helaan qareen fiican.

Gobolada qaarkood waxay shahaaddo siiyaan khabiirada yaqaan sharciga imigereyshanka ama socdaalka. Qareenadan waxay ku najaxeen imtixaanaad si ay u muujiyaan inay aqoon gaar ah u leeyihiin sharciga imigereyshanka. Goboladan hoos ku qoran waxay dhowaan shebekada internetkooda ku taxeen qareenada khabiirada shahaadada haysta: California, Florida, North Carolina, ama Texas. Fadlan la soco in ay adiga kugu xidhan tahay haddaad rabtid in aad qabsatid qareen gaar ah. DHS-tu ma taageerto mana ku taliso qareen gaar ah.

Haddii aad u baahan tahay caawimaada sharciga ee arrimaha socdaalka, laakiin aadan haysan lacag kugu filan oo aad qareen ku qabsatid, waxa jira meelo qiime jaban iyo kaalmo bilaash ah. Waxaad caawimo weydiisan kartaa meelahan:

- **Urur la Yaqaan.** Ururadani waa in ay noqdaan kuwo ay yaqaaniin Gudiga Racfaanka Socdaalka (Board of Immigration Appeals [BIA]). Si loo aqoonsado Ururadan waa in ay leeyihiin aqoon ku filan iyo waaya'aragnimo, oo ay bixiyaan adeegyo lacageed ama ka qaataan muhaajiriinta wax yar. Liiska ururada laga aqoonsan yahay BIA, ka eeg <http://www.usdoj.gov/eoir/statspub/recognitionaccreditationroster.pdf>.
- **Wakiilada ku Xidhan.** Dadkani waa kuwo ku xidhan ururada la aqoonsan yahay-BIA “recognized organizations”. Wakiiladan waxay ka qaadan karaan adeegyadooda qiime buuxa ama waxay aqbalaan lacag yar. Liiska wakiilada “laga aqoonsan yahay”-BIA, ka eeg <http://www.usdoj.gov/eoir/statspub/accreditedreproster.pdf>.
- **Wakiil Khibrad Leh.** Dadkani waa kuwo ku bixin doona adeegyo bilaash ah. Wakiilka waa in ay yaqaaniin sharciyada imigereyshanka iyo qaynuunada maxkamada. Tusaale wakiilada khibrada leh waxaa ka mid ah ardayda iskuulka shareecada dhigata, kuwa ka qalin jebiyey iyo dad akhlaaq iyo anshax wanaagsan oo qof ahaan kugu xidhiidha sida qaraabo, jaar/deris, wadaad, qof kula shaqeeya ama saaxiib.
- **Bixiyaha Adeega Qareenimada Bilaashka ah.** Xafiiska Xaakinka Sare ee Imigereyshanka ayaa haya liiska bixiyaha adeega qareenimada bilaashka ah oo u qabta dadka dacwada imigereyshanku u socoto. Ka eeg <http://www.usdoj.gov/eoir/probono/states.htm>). Liiskan waxaa ku jira qareenada iyo ururada laga yaabo in ay wakiil u noqdaan muhaajiriinta maxkamada imigereyshanka horteeda. Qareenada iyo ururada liiskan ku qoran waxay ku ballan qaadeen inay bilaash “pro bono” wax ugu qabayaan muhaajiriinta marka qudha oo ay lee yihiin dacwada imigereyshanka, marka qaarkood waxa laga yaabaa in aanay wax kalaa qaban arrimaha kale oo aan ahayn maxkamada socdaalka (sida fiise, qaadashada dhalashada, iwm).
- **Liiska Barnaamijka pro bono.** Liiska ururada la yaqaan ee pro bono (lacag la'aanta) iyo wakiiladooda waxay inta badan diyaar ku yihiin xafiis kasta ee USCIS-ga.

HADDII AAD TAHAY Dhibane XAGGA QOYSKA AH



Haddii aad tahay dhibane hoyga lagu xumeeyo, waxaad caawiimo ka heli kartaa markaad wacdid Lambarka Dhibanaha Dakhliga ee Qaranka (National Domestic Violence Hotline) oo lambarkoodu yahay 1-800-799-7233 ama 1-800-787-3224 oo (ah dadka dhegaha la'). Caawimaad ayaa diyaar loola yahay dada Isbaanishka iyo luqadaha kale ku hadla.

Sharciga Weerarka ka Dhanka Dumarka ayaa u oggolaanaya in xaaska/xaasluhu iyo caruurta Waddaniyiinta Maraykanka ah ama rasmi u degan in ay dalbadaan racfaan-iskaa u sameysashada “self-petition,” si ay u noqdaan deganaadaha rasmiga ah. Eeg <http://www.uscis.gov> ama wac Lambarka Dhibanaha Dakhliga ee Qaranka haddii aad rabtid warbixinta intaa ka badan.

Ka taxadir la Taliyaha Imigareeyshanka oo Beenta ama Khaayinka ah!

In badan adeeg bixiyayaasha imigareeyshanka waa dad daacad ah oo xirfad u hel siinta adeegyo hufan muhaajiriinta, laakiin waxaa jira dad ka faa'iidaysta muhaajiriinta.

Kahor intaadan ku tashan helista caawimaada arrinmaha imigareeyshanka oo aadan weli lacag bixin, waa inaad sameysid cilmi baadhis si aad go'aan sax ah oo ku saabsan noocyada caawimaada sharciyada aad u baahan tahay. Iska ilaali in aad noqoto dhibane khaayaamada arrimaha imigareeyshanka.

Waa kuwan waxyaabaha xusuusta mudan:

- Ma jiraan ururo ama shakhsi gaar ah oo bixiya caawimada arrimaha imigareeyshan oo xidhiidh gaar ah la leh USCIS-da. Su'aalo weydii dadka ballan qaada wax run la moodo ama sheegta in ay ku xidhan yihiin waaxda socdaalka ee USCIS-da. Ha aamminin dad kuugu ballan qaada natiijo ama jawaab dhaqso ah. Haddi aadan u qalmin manfaca imigareeyshanka, qareen iyo la taliye toona wax kama bedeli karo arrintaas.
- La taliyayaasha, hay'adaha socdaalka, xafiiska ganacsiga guryaha iyo dadka qaarkood oo loogu yeedho "nootaayada dadweynaha" waxay bixiyaan adeegyada socdaalka. Hubi in aad su'aalo ka weydiisid shaqo khibradooda iyo in ay ku tusaan nuqulka warqada Gudiga Racfaanka Imigareeyshanka (BIA) ama shahaadada ururka qareenada. Dadka qaarkood oo yiraahda waxan khibrad u lee nahay bixinta adeegyada qareenimada ma aha. Dadkan oo kale waxay kuu keeni karaan dhibaato aad u weyn.
- Haddii aad qabsatid la taliye ama qareenka arrimaha socdaalka ka qaado heshiis ama qandaraas qoraal ah. Qandaraasku waa in uu ku qornaadaa luqada Af-ingiriisida iyo luqadaada, haddii aaney Af-ingiriisidu afkaaga hooyo ahayn. Heshiiska qandaraaska waa in ay ku taxan yihiin dhammaan adeegyada lagu qabanayo iyo inta kharashkoodu yahay. Weydii cida taqaan intaadan heshiiska saxeexin ka hor.
- Isku day in aad iska ilaalisid bixinta lacagta caadiga ah ee adeegyada. Hubi in aad ka qaadatid shatiga aad lacagta ku bixisay. Hubi inaad haysatid waraaqahaaga asalka ah.
- Weligaa ha saxeexin xaashi madhan codsi. Hubi in aad fahantey waxaad saxeexaysid.

Caawimo raadso haddii la taliyaha arrimaha socdaalku ku khayaaneeyo. Wac xeer-ilaaliyaha gobolkaaga, degmada, waaxda arrimaha macmiilka iyo waaxda booliska ee degmada.

Waxa ka Iman kara Dhaqanka Fal Denbi ee Degamaha Rasmiga ah

Waddanka Maraykanku waa bulsho dhawrta sharciyada. Degamaha rasmiga ah ee Waddanka Maraykanku waa in uu oofiyo sharciyada dhammaantood. Haddii aad tahay degamaha rasmiga u jooga Waddanka Maraykanka oo aad gashid ama lagugu xukumdo denbi waxay kugu noqon kartaa dhibaato aad u weyn. Waxaa laga yaabaa in waddanka laga masaafuriyo, oo aan lagu oggolaan in aad ku soo laabato Waddanka Maraykanka haddii aad dhooftid ama arrimaha qaarkood dartood ku weydid u qalmida qaadashada shahaadadda dhalashada Waddanka Maraykanka. Tusaaledenbiyada wax ka bedeli kara deganaanshaha rasmiga ah waxaa ka mid ah:

- Denbigan macnihiisu waa denbi ba'an ("aggravated felony"), denbigi hore mid ka daran sii gelid, waxaana ka mid ah dagaal ama xadgudub denbigiisu aad u daran yahay oo xabsigiisu dhan yahay sannad.
- Dil.
- Falal Argagixiso.

- Kufsad.
- Fara-xumenta caruurta.
- Sharci-darro ku soo gelinta doroogada, hubka iyo dadka.
- Gelida danbiyada ah “denbi saqajaannimo” sida tuugonimada ama khaayinimada; denbi jidhka wax la gaadhsiiyey ama hanjabaad; denbi dhaawac khatar ah la geystey; ama denbi lagu geystey galmo edeb-darro ah.

Sidoo kale waxaa lagu siinayaa ciqaabo aad u daran markaad tahay degane rasmi ah, haddi aad:

- Adiga iyo qof kale been ku qaadataan manfacyada muhaajiriinta.
- Tiri waxan ahay Waddani Maraykan ah haddii aadan ahayn.
- U codeysid doorashada dowladda sare ama hoose doorashadaas oo u furan Waddaniyiinta Maraykanka oo qudha.
- Tahay sakhraan (“habitual drunkard”) iyo doroogayste mar kasta ama qof isticmaala daroogada mamnuuca ah wakhtiga intiisa badan.
- Leedahay hal xaas ka badan isla markaas wakhti isku mid ah.
- Ku guul daraysatay masruufida qoyskaaga ama ilmahaaga oo lagugu xukumay inaad masruuto ama taageerada xaaskaaga.
- U xidhan tahay ku xad-gudub iyo daandaasi aad ku sameysay xubin ka mid ah qoyskaaga oo meel kaga dhacday amarka dhawritaanka. Kan waxaa loo yaqaanaa weerarka guriga.
- Ka been sheega qaadashada manfacyada dadweynaha.
- Ku guuldarraysiga cashuur bixinta marka loo baahan yahay.
- Ulakac ahaan ugu dhicista is diiwaangelinta xulka qaranka haddi aad tahay lab oo da’daadu u dhexayso 18 ilaa 26.
- Caawimaada qof kale oo aan haysan dhalasha Maraykanka ama aan waddani ahayn waa sharci darro in la soo geliyo Waddanka Maraykanka xataa haddii qofkaasi yahay qaraabadaada ama aadan lacag ka qaadan.



Haddii aad gashay ama lagugu xukumay denbi, kahor intaadan dalban manfacyada kale ee socdaalka waa inaad kala tashatid arrimahaas qareen laanta socdaalka ama ururada bulshada ee bixiya adeegyada sharciga ee muhaajiriinta. Eeg boga 9 sida loo helo macluumaadka ku saabsan kaalmada sharciyada.



Degitaanka Waddanka Maraykanka

Qaybtani waxaad ka helaysaa macluumaad kaa caawimaya la qabsashada Waddanka Maraykanka. Sida loo helo waxyaabah ku saabsan guryaha, shaqada, dalbashada Lambarka Nabadsugida Bulshada, ruqsada baabuurka lagu wado, maareynta lacagtaada iyo dalbashada caymiska caafimaadka adiga iyo qoyskaaga.

Helitaanka Meel la Dego

Adigaa dooran kara meeshaad rabtid in aad kaga noolaatid Waddanka Maraykanka. Dad badan ayaa la jooga qaraabaddood ama saaxiibaddood marka ugu horeysa oo ay waddanka yimaadaan. Ka dib markay shaqo helaan, waxay u guuraan guri ay iyagu leeyihiin. Marmarka qaarkood ururada diinta iyo kuwa bulshada ayaa sidoo kale ku caawiya dadka guryo ku meelgaadh ah.

Waddanka Maraykanka, dadka intooda badan waxay dakhliga soo gala boqolkiiba shan iyo labaatan 25 % ku kharash-gareeyaan guryaha. Waa kuwan guryaha qaarkood oo aad kala dooran kartid:

Guri Kiraysasho/Ijaarasho

Waxaa la kiraysan karaa abaartmantyoyo iyo gurto. Waxaad kuwan ku heli kartaa dhawr siyaabood:

- Waxaad raadisaa daaro calaamada kiradu ku dhegan tahay guri diyaar ah ama la kiraynayo (“Apartment Available” ama “For Rent”).
- Ka raadi jarriirada qaybta la yiraahdo xayeysiiska (“Classified Advertisements” ama “Classifieds”). Hel bogaga liistada guryaha abaarmentka ah oo la kiraynayo guri weyn (“Apartments for Rent” iyo “Homes for Rent”). Liisaska waxaad ka helaysaa macluumaadka guryaha, sida meelaha ay ku yaaliin, inta qol ee ay yihiin iyo lacagta lagu kiranayo.
- Ka raadi buuga talefoonada ee jaalaha ah qaybta ay ku qoran tahay maamulka hantida (“Property Management”). Kuwani waa shirkado guryaha kireeya. Shirkadahani waxaa laga yaabaa in ay kaa qaadaan lacag yar si ay guri kuugu helaan.
- Weydii saaxiibadaa, qaraabadaa ama dadka meel kaala shaqeyya in ay garanayaan meelo la kiraynayo.
- Eeg boodhka wax lagu xayeysiyo oo ku dhegan derbiga maktabada, dukaamada iyo xarumaha dadweynaha ee ay ku qoran tahay ogeysiis kiro/ijaar ah “For Rent”.
- Ka eeg internetka kirooyin. Haddii aadan guriga ku haysan kombiyuutar, waxaad tagi kartaa maktabada dadweynaha ee kuugu dhow ama makhaayadaha internetka leh (Internet café).
- Wac hay’adaha guryaha ee kuugu dhow.



Waxaad Filaneysid Markaad Guri Kiraysato

Dalbashada Kirada. Dadka abartmantyada ama guryaha kireeya waxaa loo yaqaanaa mulkiyad lahaadaha hantida (“landlords”). Waxaa laga yaabaa in mulkiyad lahaadaha gurigu ku weydiiyo in aad buuxisid foomka kirada. Wuxuu mulkiyadlahu arjiga kaaga buuxinayaa si uu u ogaado in aad lacagta kirada iska bixin kartid.

Arijgani waxaa laga yaabaa in uu ku weydiiyo lambarka Nabadsugida Bulshada iyo caddayn in aad shaqaysid. Waxaad isticmaali kartaa kaadhkaaga sharciga deganaanshada rasmiga ah haddii aadan weli qaadan lambarka Nabadsugida Bulshada. Waxaad kaloo tusi kartaa jeegaga shaqada lagaa siiyo dabaddooda si aad u caddaysid inaad shaqaysid. Sidoo kale waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo in aad bixisid lacag yar.

Haddii aadan weli shaqo bilaabin, waxaa laga yaabaa in aad u baahatid qof kuu saxeexa qandaraaska ama heshiiska kirada. Qofkan waxaa loogu yeedhaa u saxiixe “co-signer”. Haddii aadan kirada lacagteeda iska bixin, qofka kuu saxeexay qandaraaska waa in uu bixiyo kiradaada.

Saxeexida Heshiiska Kirada. Waxaad saxeexaysaa heshiisaka kirada “lease” haddii qofka guriga kaa kiraynaya aqbalo in uu kaa kireeyo. Maraad heshiiska saxeexdid, waxaad aqbashay in aad kiradaada waqtiga la rabo bixiso joogtidna inta heshiisku ka dhammaanayo. Heshiisyada intooda badan waxaa la saxeexaa muddo sannad ah. Sidoo kale waxaad heli kartaa guryo waqti gaaban la saxeexo, sida hal bil oo kale. Waxaa laga yaabaa in aad lacag dheeraad ah bixisid kuwa waqtigoodu gaaban yahay.

Markaad heshiiska saxiixdid, waxaad ballan qaaday in aad guriga dhaqaalaysid oo nadiif ahaado. Waxaa laga yaabaa in lacag dheeraad ah lagaa qaado haddii aad guri aad kiraysatay jebebisid. Sidoo kale waxa laga yaabaa in heshiiska lagu qoro inta qof ee guriga ku noolaan kara.

Heshiiska kiradu waa waraaqo sharci ah. Waa in aad ballantii aad qaaday fulisid. Sidoo kale waa in qofka guriga kaa kireeyey isna fuliyo ballanta. Waa in dadka guriga iska leh hagaajiyaan oo amnigana sugaan.

Bixinta Lacagta Deebaajiga ah. Inta badan kireystaayaasho waxay bixiyaan deebaajiga nabadsugida (security deposit) markay guriga u soo guuraan. Deebaajiga nabadsugidu wuxuu la mid yahay hal bil kiradeed. Lacagtan deebaajiga ah waa lagu soo celinayaa markaad guurtid haddii aadan guri halayn oo uu nadiif yahay. Haddi aanu ahayn, waxa laga yaabaa in qofka guriga leh qaato lacagta qaar ama kuligeeba oo ku bixiyo sameynta iyo nadiifinta guriga.

Iska hubi guriga ka hor intaadan u soo guurin. U sheeg qofka guriga kaa kireeyey haddii wax dhib ah ka heshid. Weydii qofka guriga leh waxyaabaha loo baahan yahay in aad guriga ka hagaajiso intaadan guurin si hadhow lacagtii deebaajiga kaaga tiil kuugu soo noqoto.

Bixinta Kharashka Kale ee Kirooyinka. Guryaha qaarkood ama abaarmentyada, kirada waxaa ku jira kharashka korontada, (gaaska, kulaylinta guriga kululeeya, biyaha iyo qaadista qashinka). Meelaha qaarkood kharashyadaas kale gooni baa loo bixiyaa. Weydii qofka aad guriga ka kiraysanaysid in ay korontadu ku jirto kirada markaad guri raadinaysid. Haddi ay ku jirto hubi in ay heshiiska ku qorantahay ka hor intaadan saxeexin. Haddi aanay korontadu ku jirin, waa in aad ogaataa inta qiimaheedu noqon doono. Korontadu qaarkeed waa qaali waqtiga kulaylaha marka la isticmaalo (qaboojiyaha) ama jiaalkii (kulaylisada).

SAMEEYNTA WAXYAABAHA KA XUN GURIGA



Qofka guriga kaa kireeyey waa in uu wixii guriga ka xun hagaajiyo oo amnigiisa sugo. Haddii aad wax dhibaato ah kala kulantid guri:

- Marka ugu horeeysa, la hadal hantiilaha guriga. U sheeg isaga ama iyada waxa ka xun guriga oo hagaajinta u baahan.
- Tan xigta, warqad u qor hantiilaha guriga oo u sheeg waxa u baahan in la sameeyo. Koobina kala hadh warqad.
- Tan ugu danbeysa, wac Xafiiska Guryaha ee kuugu dhow. Badi magaaloyinka iyo dowladda hoose waxay leeyihiin dad baadha guryaha dhibaata leh. Weydii in qofka guryaha baadhidooda ku qaybsan ku soo booqdo si aad u tustid wixii dhibaato ah oo dhan.

Haddii qofka guriga iska leh aanu hagaajin wixii xun, waxa laga yaabaa in aad dacweyn kartid.

Joojinta Heshiiska. Joojinta heshiiska waxaa loogu yeedhaa ka takhalusida heshiiska (“terminating your lease”). Qofka guriga iska leh waxa laga yaabaa in uu heshiikaaga hore uga takhaluso haddii uu markiiba helo qof kale oo guriga ka kiraysta. Haddii aanu helin qof kale, waxa laga yaabaa in aad bilbil u bixisid kirada ilaa heshiisku ka dhaammanayo, xataa haddii aadan ku noolayn guriga. Haddii aad guriga ka baxdid intaan heshiisku dhammaan waxa laga yaabaa in aad weydid lacagtii deebaajiga ahayd. Qofka guriga iska leh u qor warqad ogeysiis ah, in aad ka guuraysid. Dadka guryaha iska leh badi waxay codsadaan in loo qoro warqad ogeysiis ah, ugu yaraan sodon 30 maalmood ka hor intaadan guriga ka bixin.

BARO XUQUUQDAADA: TAKOORKA XAGGA GURYAHA LAMA OGGOLA IN LA ISKU SAMEEYO



Dadka guryaha kireeyaa kuuma diidi karaan guriga kirada ah iyagoo sabab uga dhigaya cidaad tahay. Waa wax sharciga ka soo hor jeedda in laguugu diido sababahan:

- jinsiyadda ama midabkaaga.
- waddankaad ka timi.
- diintaada.
- lab ahaan ama dhedig ahaan.
- naafo ahaan.
- xagga guurka, sida haddii aad xaas tahay iyo haddi kale.

Haddii aad dareemaysid in guri laguugu diidey arrimaas dartood, la xidhiidh Waaxda Guryaha iyo Magaalaynta Horumerinta (Department of Housing and Urban Development [HUD]) oo lambarkoodu yahay 1-800-669-9777. Macluumaadka waxaa la isku siiyaa Af-ingiriisida iyo Isbaanish.

➔ **TALO:** Haddii aad guurtid waa in aad u sheegtid Boostada Waddanka Maraykanka si laguugu soo wareejiyaan waraaqaha ciwaanka cusub. Ciwaankaaga waxaad ka bedeli kartaa internetka <http://www.usps.com> ama booqo xafiiska boostada ee kuugu dhow oo codso “Hagaha Guurista.” Sidoo kale ha ilaawin in aad dalbatid ama buuxisid foomka AR-11 DHS. Wixii sharraxaad ah ka eeg boga 8.

Guri Iibsasho

Dad badan waxay la tahay lahaansha guriga in uu yahay qayb ka mid nolosha Ameerika (“American Dream”). Guri lahaanshuhu wuxuu leeyahay faa’iidooyin badan iyo mas’uuliyado badan.

Wakilada guryaha ayaa kaa caawimi kara helitaanka guri aad iibsatid. Weydii saaxiibadaa, qof kula shaqeeya ama wac hay’adaha guryaha oo weydii wakiilka magaciisa. Weydii wakiil laga yaqaana xaafadaha aad ka rabtid in aad guri ka iibsatid. Waxad kale oo ka eegi kartaa xayeysika wargeyska (“Classifieds”) oo ku qoran qaybta guryo iibinta (“Homes for Sale”). Sidoo kale waxaad ka eegi kartaa xaafada aad rabto calaamadaha wax iibinta (“For Sale”).

Dadka intooda badan waxay u baahan yihiin in ay deyn qaataan ay guri ku iibsadaan, kan waxaa loogu yeedhaa sii amaahinta lacagta guryaha (“mortgage”). Waxaad deyn ka qaadan kartaa bangiga ama shirkadaha wax laga amaahdo. Deyn qaadashada micneheedu waa lacag amaasho ribo gaar ah saran tahay oo waqti go’an loogu talagalay.

Ribada aad deynta guri ka bixisid waxaad ku jari kartaa markaad xereynasid cashuur celinta dowladda.

→ **TALO:** Iska jir ama ka feejignoow kuwa wax deymiya oo saarta deynta guryaha ribo aad u badan. Deyn bixiyuhu waxa laga yaabaa in u saaro ribo dheeraad ah sababtuna tahay waddanka aad ku cusub tahay. Waxaa jira sharciyo kaa difaacaya khayaanada, kharashyada aan daruuriga ahayn iyo midabtakoorka guryo iibsashada. Warbixinta intaa ka badan booqo internet qaybta guryaha “Homes” oo ah <http://www.hud.gov>.

Sidoo kale waxaad u baahan tahay in aad iibsatid caymiska lahaanshaha guriga si uu kaaga caawiyo bixinta kharashka khasaaraha danbe ee guriga. Caymiska wuxuu inta badan bixiyaa khasaaraha ka yimaada cimilada xun, dabka iyo dhaca ama tuugada. Waxaad kaloo u baahan tahay in aad ka bixisid qiimaha gurigaa cashuurta hantida.

Wakiilada ama qareenada guryaha ayaa kuu heli kara deynta iyo caymiska guryaha. Sidoo kale isagu ama iyadu waxay kaa caawimi kartaa buuxinta foomka ee iibsiga guryaha. Wakiilada guryuhu kaama qaadan karaan lacag ku saabsan guri iibsiga. Laakiin waxaad bixin kartaa lacagta qareenka kaa caawimaya buuxinta foomamaka xagga guri iibsiga. Sidoo kale waxaad bixin doontaa ujrada deynta iyo foomamaka sharciga gobolka. Ujrada waxaa loogu yeedhaa kharashkii xidhista (“closing costs”). Wakiilka guryaha ama deyn bixiyuhu waa in uu kuu sheego inta lacagta urjadu tahay intaadan foomka guri iibsashada saxeexin.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH OO KU SAABSAN GURI IIBSASHADA IYO KIRAYSASHADA



Booqo internetka Waaxda Guryaha iyo Magaalaynta Horumerinta (Department of Housing and Urban Development [HUD]) oo ah <http://www.hud.gov> ama wac 1-800-569-4287. Macluumaadku waxay ku qoran tahay Af-ingiriisida iyo Isbaashinka. Macmuulaad dheeraad oo ku saabsan guri iibsiga iyo deyn qaadashada booqo internetka Xarunta Dowladda Sare ee Macluumaadka Muwaadinka oo ah <http://www.pueblo.gsa.gov>. Sidoo kale eeg qaybta guri lahaadayaasha iyo guryo iibsadayaasha “For Homeowners and Home Buyers” oo ah <http://www.fanniemae.com>.

Qaadashada Lambarka Nabadsugida Bulshada

Sharci rasmi ku deganaade ahaan waxaad qaadan kartaa lambarka Nabadsugida Bulshada (SSN). Lambarka Nabadsugida Bulshadu waa lambar Dowladda Waddanka Maraykanku adiga ku siisay. Wuxuu lambarkani ka caawimayaa dowladu in ay ogaato dakhliga dhaqaalaha ku soo gala iyo kaalmooyinka aad qaadan kartid. Sidoo kale waxaa lambarkan isticmaala bangiga iyo hay'adaha, sida iskuulka wixii la mid ah kuu gartaan qofka aad tahay. Waxaa kale oo laga yaabaa in lagu weydiiyo lambarka Nabadsugida Bulshada (SSN) marka aad guir kiraysanaysid ama iibsanaaysid.

Waaxda Dowladda oo qaabilsan Nabadsugida Bulshada waxaa loo yaqaan Maamulka Nabadsugida Bulshada (Social Security Administration). Si aad u heshid xafiiska Nabadsugida Bulshada ee kuugu dhow waxaad:

- Weydiisaa saaxiibadaa ama deriskaaga meesha ugu dhow ee Xafiiska Nabadsugida Bulshadu ku yaal.
- Wac 1-800-772-1213 inta u dhexaysa 7 AM iyo 7 PM. Macluumaadka waxaa lagu sheegaa Af-ingiriisi iyo Isbaanish. Waxaa kuu diyaar ah adeegyada turjumaanada oo bilaash ah.
- Ka eeg cinwaanka bogga buluuga ah ee buugga telefoonada.
- Ka eeg internetka Maamulka Nabadsugida Bulshada oo ah <http://www.socialsecurity.gov> ama, Afkaisbaanishka eeg <http://www.segurosocial.gov/espanol/>.

HADDII AADAN AF-INGIRIISIDA KU HADLIN



Xafiiska Nabadsugida Bulshada ayaa kuu qaban kara turjubaan bilaash ah oo kaa caawiya dalbashada lambarka Nabadsugida Bulshada. U sheeg qofka telefoonkan 1-800-772-1213 ka jawaaba in aadan ku hadlin Af-ingiriisi. Waxay kuu heli doonaan turjumaan ku caawiya markaad booqato xafiiska.

Internetka Maamulka Nabadsugida Bulshada waxa ku jiraa macluumaad aad u caawimaya dadka ku cusub Waddanka Maraykanka. Qaybta Internetku waxay leedahay macluumaad ku saabsan Nabadsugida Bulshada oo ka kooban 14 luqadood. Booqo <http://www.socialsecurity.gov> ama, Afka-isbaanishka eeg <http://www.segurosocial.gov/espanol/>.

Uma baahnid in aad buuxisid arji ama ka doonatid lambarka Nabadsugida Bulshada xafiiska Nabadsugida Bulshada haddii:

- Aad weydiisatey lambarka Nabadsugida Bulshada ama kaadhka markii aad dalbatay fiisaha muhaajiriinta OO
- Aad dalbatay fiisaha muhaajiriinta bishii Oktoobar 2002 ama ka dib OO
- Aad ahayd 18 jir ama ka weyneed markii aad timi Waddanka Maraykanka.

ISKA ILAALINTA WARAAQAHA AQOONSIGA LAGAA XADO



Xadista Aqoonsiga (“identity theft”) micnaheedu waa qof kaa xaday warbixintaada shakhsi ahaaneed, sida lambarka Nabadsugida Bulshada iyo lambarka xisaabta bangiga. Waxay warbixintaa lacag kagala bixi karaan akoontada bangigaaga ama waxay magacaaga kula soo bixi karaan kaadhka deynsiga. Xadista Aqoonsigu waa denbi aad u weyn. Isku ilaali waxyaabahan:

- Hubi in aad taqaanid iyo in aad dadka ama ganacsiyada ku aammini kartid warbixintaada shakhsi ahaaneed, gaar ahaan telefoonka ama internetka.
- Kaga tag guriga oo dhig meel ammaan ah kaadhka Nabadsugida Bulshada. Ha qaadan kaadhka.
- Qaado waraaqaha aqoonsiga iyo kaadhka wax lagu iibsado markaad u baahan tahay oo keliya. Inta kale kaga tag guri meel fiicana dhig.
- Jarjar ama ku shiid mishiinka waraaqaha ka hor intaadan qashin ku tuurin waraaqaha warbixintaadu ku qorantahay.

Haddii ay ku haysato dhibaato ku saabsan xadista aqoonsiga, waxaad wici kartaa Maamulka Ganacsiga Dowladda Federaaliga ah (Federal Trade Commission’s ID Theft Hotline) oo lambarkoodu yahay 1-877-438-4338. Waxa kale oo aad macluumaad ka heli kartaa <http://www.ftc.gov/bcp/edu/microsites/idtheft>.

Xaaladan, macluumaadkii loo baahnaa in lagu siiyo SSN-ka waxaa loo diray Waaxda Arrimaha Dibadda ee Waddanka Maraykanka ee Maamulka Nabadsugida Bulshada. Maamulka Nabadsugida Bulshada ayaa boostada kuugu soo diridoona kaadhka SSN-ka isla ciwaankii Adeegyada Wadaninimada iyo Socdaalka ee Maraykanka (USCIS) kuugu soo direen Giriin Kaadhkaaga. Waa in aad ku heshaa kaadhka Nabadsugida Bulshada ilaa saddex usbuuc ka dib markii aad soo gashay Waddanka Maraykan. La xidhiidh Maamulka Nabadsugida Bulshada haddii aadan kaadhkaga ku helin muddo saddex sitimaan ah, ka dib markaad Waddanka Maraykan timi ama haddii aad bedeshay ciwaankaaga ka dib markaad Waddanka Maraykanka soo gashay, laakiin intaadan kaadhkaaga SSN helin.

Waa in aad tagto xafiiska Nabadsugida Bulshada oo ka soo qaadato SSN haddii:

- Aadan weydiisan lambarka Nabadsugida Bulshada ama kaadhka markaad dalbatay fiisaha muhaajiriinta AMA
- Dalbatay fiisaha muhaajiriinta ka hor Oktoobar 2002 AMA
- Aad ahayd 18 jir markii aad soo gashay Waddanka Maraykanka.

Wakiilka Nabadsugida Bulshada ayaa kaa caawin doona dalbashada SSN-ka. Soo qaado waraaqahan markaad xafiiska wax ka dalbanaysid:

- Warqada Dhalashada ama dukumentiyada kale sida baasaboort muujinaya taariikhda iyo meesha aad ku dhalatay IYO
- Waraaqo muujinaya sharciga aad waddanka ku joogtid, kagana shaqayn kartid oo ay ka mid yihiin Giriin Khaadhka ama baasaboort imigareyshan shaabadeeyey ama fiise ku dhegan yahay.

Lambarka Nabadsugida Bulshada waxaa laguugu soo diri doonaa boostada. Waa in aad kaadhka Nabadsugida Bulshada ku heshid muddo labo usbuuc ah ka dib markay Maamulka Nabadsugida Bulshadu

heleen dhamaan waraaqigii lagaaga baahnaa in aad ku dalbatid arjiga. Haddi ay iyagu u baahdaan xaqiijin qaar ka mid ah waraaqahaaga, waxay qaadan doontaa waqti dheer intaad ka helaysid SSN.

Dhawrashada Lacagtaada

Furasho Xisaab Bankiga

Xisaab bangigu waa meel amnigeedu fiican yahay oo aad lacagtaada dhigan kartid. Bangigu wuxuu leeyahay akoonto kala duwan. Akoontada lacagta lagala baxo oo biilasha laga bixiyo (for paying bills) ama kan lacagta lagu (for earning interest on your money) kaydsado ama la dhigto oo faa'iidadu ama ribadu ku korodho kuwani waa waa labada akoonto oo ugu caansan. Waxaad furan kartaa akoonto aad leedahay ama mid aad la furatid xaaskaaga/ninkaaga ama qof kale. Waxa laga yaabaa in bangiga ku saaro lacag kor socod ah, oo ku saabsan adeegyada uu kuu qabto.

Midowga amaanaynta (credit unions), kaydinta iyo ururada deynta (savings & loans) waa bangiyo kale oo aad kala dooran kartid. Waxaa laga yaabaa in qofka aad u shaqayso akoonto ku leeyahay Midowga Amaanaynta oo aad ku biiri kartid. Midowga amaanayntu, waxay bixiyaan adeegyada bangiga kuwo la mid ah, laakiin qaarkood waxay bixiyaan adeegyo dheeraad ah. Isu eeg adeegyadooda, lacagta kor socodka ah, saacada ay furan yihiin iyo meesha uu ku yaalo intaadan furan akoonto, si aad u heshid mid ku haboon waxyaabaha aad u baahan tahay.

➔ **TALO:** Dukaamo badan waxay leeyihiin adeegyada jeeg sarifida (check-cashing) iyo lacag u dirista dibadda, laakiin waxyaabahani waa lacag. Eeg haddii bangigaagu leeyahay adeegyadan oo qiime jaban.

LACAGTAADA MEEL AMNI AH DHIGO



Khatar weeye haddii aad lacag aad u fara-badan guriga kaga tagtid. Sidoo kale ma fiicna in aad jeebka ku qaadatid lacag fara-badan. Waxaa laga yaabaa in lagaa xado ama kaa lunto. Lacagtaadu waa kuu badbaadaysaa haddii aad dhigato bangi ku jira Caymiska Lacag Dhigista ee Iskaashatada Dowladda Federaliga ah (Federal Deposit Insurance Corporation [FDIC]). FDIC-du waxay siisaa bangiga caymis badbaadinaya lacagtaada. Haddii bangiga la xidho, FDIC ayaa ku celin doonta lacag dhan ilaa \$100,000. Hubi in bangiga aad dooratay ku jiro caymiska FDIC-da.

Markaad furan xisab bangi, waxaa lagu weydiin doona in aad caddaysid qofkaad tahay. Waxaad isticmaali kartaa kaadhka Giriin Kaadhka ama ruqsada Baburka lagu wado. Sidoo kale waxaad u baahan tahay lacag bangigu akoontada kuugu furo—oo la yiraahdo dhigis (“deposit”)—taas oo akoontadaada lagu shubi doono. Dhawr casho ka dib, waxaad lacag kala bixi kartaa akoontadaada. Tan waxa la yiraahdaa lacag kala (“withdrawing”) bixid. Waxaad lacag kula bixi kartaa jeeg aad qortid, Mishiinka lacagta lagala baxo (Automatic Teller Machine [ATM]) ama foom bangiga lacagta lagala baxo.

Isticmaalida Akoontada Bangigaaga

Waxaad bangigaaga lacag kagala bixi kartaa isticmaalka jeega ama kaadhka mishiinka lacagta lagala baxo (Kaadhka ATM). Hubi in aad adiga qudhi haysatid, haddii uu mid keliya yahay, qofkaad akoontada wadaagtaan wax waa kala bixi karaa bangiga.



Jeegaga Shakhsiga. Waxa lagu siindoonaa jeegaga shakhsiga markaad furatid akoontada lacagta lagala baxo. Jeegagan waa foomam aad buuxinaysid markaad wax ku bixinaysid. Jeegagu wuxuu u sheegayaa bangigaagu in uu lacagta siiyo qofka ama ganacsiga aad jeega u qortay. Jeegagan dhig meel fiican oo amni ah.

Kaadhadka ATM. Waxaad bangigaaga weydiisan kartaa mishiinka lacagta lagala baxo. Waa kaadh caag ah bangigaaga akoontadiisa ku xidhan. Kaadhkan waxaad u isticmaashaa markaad lacag la baxaysid ama lacag ku shubaysid akoonkaaga ama mishiinka lacagta ee ATM.

Inta badan ma bixinaysid lacag ujro ah markaa ATM-ka banigigaaga isticmaalaysid. Waxaa laga yaabaa in aad ujro bixisid markaad bangi kale ATM-kooda isticmaashid.

Shaqaalaha bangiga ayaa ku tusi doona sida loo isticmaalo kaadhka ATM-ka oo ku siindoonaa lambar gaar ah oo la yiraahdo oo u taagan lambarka aqoonsiga shakhsiga (personal identification number [PIN]) Iska ilaali markaad isticmaalaysid ATMs-ka. Weligaa qof ha siin PIN lambarka ama kaadhkaaga ATM-ga. Waxay kala bixi karaan lacag akoontadaada.

Kaadhka lacagta lagula baxo. Waxaa laga yaabaa in bangigu ku siiyo kaadhka lacagta lagula baxo oo u isticmaali kartid akoontada lacagta lagala baxo. Marmarka qaarkood kaadh ATM-ga ayaa sida kaadhka lacagta lagula baxo. Kaadhka lacagtu wuxuu kuu oggolaanayaa in aad bixiso wax adiga oo aan jeeg qorin iyada oo bangigaagu toos lacagta ugu dirayo ganacsiga aad wax ka iibsatay.

Jeegaga Bangiga. Jeegaga bangigu waa jeegag aad bangiga ka codsatay. Markaad bangiga lacag siisid ayey jeeg ugu bedelaan lacag qofka ama ganacsiga aad jeega u qortay. Waxaa laga yaabaa in bangigu lacag yar kaa qaado isticmaalka jeegaaga.

KAADHKA AMAAHDA



Kaadhka Amaahda — waxaa sidoo kale loogu yeedhaa kaadhkii wax ku qaadashada (“charge cards”)—wuxuu kuu oggolaanayaa in aad wax ku iibsatid oo lacagta mar danbe iska bixisid. Bangi, dukaan, saldhig gaas ayaa ku siin kara kaadhka wax amaahashada. Biil ayaa boosta lagu soo dhigayaa bil kasta oo kuu sheegaya waxyaabihii aad iibsatay. Haddii aad bixiso lacagta lagugu leeyahay oo dhan markaad biilka heshid, wax ribo ama korsocod ma bixinaysid. Haddii aadan bixin lacagta oo dhan ama lacagta diristeeda la daahdid, waxa laga yaabaa in lagaa rabo in aad bixisid lacagta kor socodka ah iyo ujro dheeraad ah. Kaadhka wax lagu amaahdo qaarkood waxay leeyihiin ribo aad qiimeheedu u sareeyo.

Ka taxadir in aad siisid kaadhkaaga lambarkiisa dad kale, gaar ahaan telefoonka iyo internetka. Hubi in aad taqaanid ama aamini kartid qofka ama ganacsiga aad lambarka kaadhkaaga siinaysid.

➔ **TALO:** Eeg biilka kaadhkaaga amaahda bil kasta oo hubi in ay saxyihiin lacagta wax lagu iibsidey. Haddii aad ku aragtid waxyaabo aadan iibsan, si dhakhso ah u wac shirkada kaadhka. Siday u badan tahay adigu ma bixinaysid waxyaabaha aadan gadan haddii aad isla markaaba shirkada u sheegtid arrintaas.

Meel ku qoro dhammaan lambarada akoontada baqngiga, khaadhka bangiga iyo kaadhka lacagta lagula baxo. Sidoo kale qor lambarada telefoonka shirkadahan. Warbixintan meel fiican dhigo. Haddii ay kaa lunto ama laga xado boorsadaadu, waxaad wici kartaa shiradaha aad kaadhahka ka haysatey oo u sheeg in ay masaxaan. Taasi waxay ka ilaalinaysaa in qof kale isticmaalo kaadhkaaga.

DERAJADA KAADHKAAGA AMAAHDA



Wadanka Maraykanka sida aad ku sameysid kredit kaaga waa arrin muhiim ah. Waxaa jira ururo markastaba ka shaqeeya sida dhibcaha kreditka loo ururiyo iyo sida biilasha loo bixiyo iyo arrimo kale. Derajada deynaadu waxay aad muhiim ugu tahay markaad rabtid inaad guri iibsatid ama baabuur, ama aad deeyn qaadanaysid. Si aad dhibco fiican kreditkaaga aad u heshid arrimahan ayaad qaban kartaa:

- Dhamaan biilashaada ku bixi wakhtiga lagaa rabo.
- Markasta kredit kaadhkaaga waa inaad dheeli tirtaa. Bilkastaba waa inaad bixisaa inta ugu yare e lagaa rabo.
- Ha dalban kredit kaadh badan ama ha dalban deyn badan.

Marka loo eego sharciga dowlado soo saartay waxaa lagu ogolyahay inaad bilaash ku dalban kartid meesha uu marayo credit kaaga sanadkii mar. Haddii aad koobi ka rabto derajada kreditkaaga, waxaad wici kartaa **1-877-322-8228** ama booqo <http://www.annualcreditreport.com>.

Shaqo Raadinta

Waxaa jira siyaabo badan oo Waddanka Maraykanka shaqo looga raadin karo. Si aad fursada shaqo helista u kordhisid, waxaad qaban kartaa:

- Weydii saaxiibadaa, derisk, reerkiina ama kuwa kale ee beeshaada in ay jirto shaqo bannaan ama meel fiican oo laga shaqaysan karo.
- Ka eeg wargeyska “Classifieds” oo ku hoos qoran qaybta shaqaalaynta “Employment”.
- Ka eeg meelaha ay ku qoran tahay waxaa la rabaa caawimo “Help Wanted” ee calaamadaha ku dhegan daaqadaha meelaha ganacsiga.
- Waxaad tagtaa oo shaqo in ay jirto weydiisa xafiisyada ganacsiga ee Shaqaalaynta iyo Ilaha Dadweynaha oo ku yaal meelaha ugu dhow.
- Booqo hay’ada bulshada oo muhaajiriinta ku caawiya shaqo helista ama barnaamijyada tababarka shaqada.
- Eeg boodhka ogeysiiska ee maktabada dadweynaha, dukaamada iyo xarumaha bulshada oo shaqooyin lagu soo dhejiyo.
- Eeg Adeegyada Waaxda Shaqaalaya ee gobolkaaga.
- Ka raadi shaqo internetka. Haddii aad kombiyuutar ka isticmaashid maktabada xafadaada, shaqaalaha maktabada aya kaa caawimi kara sida loo isticmaalo.

Shaqo Dalbasha

Loo-shaqeeyaha intoodda badan waxay ku weydiinayaan in aad buuxisid arjiga shaqada. Foomkan waxaa ku qoran su'aalo ku saabsan ciwaankaaga, waxbarashadaada iyo waayo'aragnimadaadii hore ee shaqooyinka. Sidoo kale waxa laga yaabaa in lagu weydiiyo warbixin ku saabsan dadkii aad hore ula soo shaqaysay. Kuwan waxaa loogu yeedhaa weydiinta dadka ku yaqaan ("references"), oo waxa laga yaabaa in looshaqeeyuhu rabo in uu waco oo weydiiyo su'aalo kugu saabsan.

Waxaa laga yaabaa in aad u baahan tahay sameynta warqada xirfada shaqada, waayo'aragnimada iyo waxbarashada "resumé". Resumé-gu waxay loo-shaqeeyaha u sheegaysaa waxyaabaha ku saabsan shaqadaadii hore, tacliintaada, tababar iyo xirfad-shaqo. Hore u sii qaado warqada xirfada shaqada markaad shaqo dalbanaysid.

Resumé fiican:

- Waxa ku qoran magacaaga, ciwaankaaga iyo telefoonkaaga.
- Waxa ku yaal shaqooyinka aad hore u soo qabatay oo ay ku jiraan wakhtiyadii aad ka soo shaqaysay.
- Muuji waxbarashadaadu heerkay gaadhsiisan tahay.
- Tus xirfadahaaga gaarka kuu ah.
- Si sahlan loo akhriyi karo oo aan khalada lahayn.

Tag meelaha hay'adadha bulshada u adeegaa yihiin si aad u ogaatid in ay kaa caawimi karaan qorista warqada shaqo xirfadeedka (resumé). Ganacsiyo gaar ah ayaa iyana adeegy sameeya, laakiin ujro ayey kaa qaadi.

MAXAY YIHIIN MANFACYADU ?



Marka lagu daro mushaharkaaga, loo-shaqeeyaha qaarkood waxay bixiyaan "manfacyada shaqaaleynta" oo dheeraad ah. Manfacda waxaa laga yaabaa in ay ku jiraan:

- Daryeelka caafimaadka.
- Daryeelka caafimaadka ilkaha.
- Daryeelka caafimaadka indhaha.
- Caymiska qofka.
- Qorshaha hawlgabida shaqada.

Loo-shaqeeyuhu waxa laga yaabaa in ay bixiyaan qaar ama dhammaan kharashka manfacyadan. Weydii loo-shaqeeyaha manfacyada uu bixiyo.

Su'aalaha lagu Weydiinayo Markaad Shaqo Raadis tahay

Waxaa laga yaabaa in loo-shaqeeyuhu rabaan in ay kula kulmaan oo kaala hadlaan wax ku saabsan shaqada. Waxay ku weydiin doonaan shaqooyinkaagii hore iyo xirfadahaaga shaqado. Waxaad ku barbaran kartaa ka jawaabida su'aalaha saaxiibadaa ama xubno ka tirsan reerkiina si aad ugu diyaar garowdid. Sidoo kale waxaad su'aalo weydiin kartaa loo-shaqeeyaha. Tani waa fursad fiican si aad u ogaatid waxyaabaha ku saabsan shaqada.

BARO XUQUUQDAADA: SHARCIGA DOWLADDA FEDERAALIGA AH AYAA DIFAACA SHAQAALAHA



Dhawr sharci ayaa ka mamnuucaya in loo-shaqeeyuhu isticmaalaan eexasho ka dhan ah dadka raadinaya shaqada. Waddanka Maraykanku wuxuu leeyahay sharciyo mamnuucaya eexashada ama takoorka sababtoo ah:

- Jinsiyad, midab, diin, asal waddankii hore, iyo lab-iy-dhedig mid kaa tahay ee sharciga xuquuqda shicibka (Sharciga Xuquuqda Madaniga “Civil Rights Act”).
- Da'da (Sharciga Takoorka Shaqaalaynta Da'da “Age Discrimination in Employment Act”).
- Naafoda (Sharciga Naafoda Maraykanka “Americans with Disabilities Act”).
- Lab-iy-dhidig (Sharciga Sinnaanta Bixinta Mushaharka “Equal Pay Act”).

Macluumaad intaa ka badan oo ku saabsan sharciga ilaalinta, booqo internetka Guddiga Dhowre (Ilaaluya) Sinnaanta Fursadaha Shaqaalaynta ee Waddanka Maraykanka (U.S. Equal Employment Opportunity Commission) <http://www.eeoc.gov> ama 1-800-669-4000 iyo (dadka dhegaha la') 1-800-669-6820.

Sharciyada kale ee caawimaada anmiga meelaaha shaqada, oo ku siinaya fasax haddii reerkaagu kuu baahdo ama xaalad caafimaad oo degdeg ah timaado iyo siinta lacagta kumeelgaadhka ee shaqo la'aanta shaqaalaha. Booqo internetka Waaxda Shaqaalaha ee Waddanka Maraykanka macluumaadka intaa ka badan oo ku saabsan xuquuqaha shaqaalaha. <http://www.dol.gov>.

Laga yaabee in aad weydiisid:

- Maxay yihiin saacadaha shaqadu?
- Imisa weeye lacagta shaqadu bixinaysaa? (Sharciga Waddanka Maraykanka u yaal waxaa looga baahan yahay in loo-shaqeeyaha intooda badan bixiyaan mushaharka ugu yar [“minimum wage”] oo ah mushaharka ugu hooseysa oo la oggol yahay.)
- Imisa maalmood weeye fasaxu?
- Imisa maalmood weeye fasaxa bukaanku?
- Waa maxay manfacyada shaqadu leedahay?

Inta kulanka su'aalo weydiinta lagu dhex jiro, loo-shaqeeyuhu wuxuu ku weydiin karaa su'aalo badan. Laakiin loo-shaqeeyaha looma oggoloa in ay ku weydiinyaan su'aalaha qaarkood. Cidna kuma weydiin karto waxyaabaha ku saabsan jinsiyadaada, midabkaaga, lab ama dhedig hadaa tahay, xaas leedahay, diinta, waddankaad u dhalatay, da'da iyo wixii naafonimo ah oo aad leedahay.

BADBAADA FEDERAALIGA EE SHAQAALAHA MUHAAJIRIINTA AH.



Sharciga federaaligu wuxuu oranayaa in aanay loo-shaqeeyuhu kugu sameyn karin takoorid kaa dhan ah sababtuna tahay muhaajirmimada. Loo-shaqeeyuhu ma:

- Diidi karaan in ay ku shaqaaleysiyaan kumana eryi karaan sababta oo ah sharcigaaga dartiis ama in aadan ahayn waddani Maraykan ah.
- Kaama codsan karaan in aad tustid sharcigaaga Deganaanshaha Rasmiga Ah, ama diidaan waraaqahaaga sharcieysan.
- Jeclaan karaan in ay shaqaalaysiiyaan shaqaale aan sharci waddanka ku lahayn.
- Kugu takoori karaan jinsiyadaada ama waddankaad u dhalatay dartiis.
- Ka aargoosan karaan shaqaalaha mid ka mid ah oo ka cabtay waxyaabaha kor ku qoran.

Macluumaadka intaa ka badan oo ku saabsan xuquuqaha, ama cabashada, wac Xafiiska Lataliyaha Gaarka ah ee 1-800-255-7688 ama (dadka dhegaha la') 1-800-237-2515. Haddii aadan Af-ingiriisi aqoon, waxaa kuu diyaar ah turjumaan ku caawimi doona. Sidoo kale waxaad booqan kartaa internetka <http://www.usdoj.gov/crt/osc> wixii macluumaad dheeraad ah.

Maxaad Filaysaa Markii lagu Shaqaaleeyo

Marka kuugu horeysa oo aad tagtid shaqada cusub, waxaa lagu weydiin doonaa in aad buuxisid foomam. Waxaa kuwaas ka mid ah:

- Foomka I-9, oo ah foomka Caddaynta u Qalmida Shaqaalaynta (Employment Eligibility Verification Form). Sharci ahaan, loo-shaqeeyahaagu waa in uu eego dhammaan shaqaalaha cusub in ay u qalmaan ama ka shaqayn karaan Waddanka Maraykanka. Maanlinta shaqada kuugu horeysa, waxaad u baahan doontaa in aad buuxiso foomka I-9. Saddex casho oo ganacsigu furan yahay gudohood, waa in aad tusid loo-shaqeeyaha waraaqahaaga aqoonsiga oo muujinaya in lagu oggol yahay shaqaynta. Adaa dooran kara nooca waraaqaha lagaa rabo oo caddaynta in aad ka shaqayn kartid Waddanka Maraykanka, mar hadday yihiin kuwa ku liisgaraysan foomka I-9 xagiisa danbe. Tusaale: waraaqaha la aqbali karo waxaa ka mid ah, Giriin Kaadhka ama sharcigaaga rasmiga ama kaadhka lambarka Nabadsugida Bulshada oo aanay ku qornayn ma shaqayn kartid iyo ruqsada baaburka lagu wado.
- Foomka W-4, Lacag ka Jarista Shaqaalaha (Employee's Withholding Allowance Certificate). Loo-shaqeeyahaagu waa in uu ka jaro jeegaaga shaqada lacagta cashuurta guud oo u diro dowladda. Kan waxaa loogu yeedhaa cashuur ka haynta "withholding tax." Foomka W-4, ayaa u sheegaya shaqaaleeyaha in uu kaa jaro cashuur oo kaa caawiyo ogaansha inta lacag kaa go'aysa.
- Foomam kale. Sidoo kale waxaa laga yaabaa in aad buuxisid foomka cashuur ka haynta ee gobolka aad ku nooshahay iyo foomam kale oo ku saabsan manfacyada aad heli kartid.

Waxaa laga yaabaa in jeegaaga shaqada lagu siiyo sitimaankiiba mar, labadii sitimaanba mar ama bishiiba hal mar. Jeega shaqadu wuxuu muujin doonaa inta ay tahay cashuurta dowladda federaaliga iyo gobolka, tan Nabadsugida Bulshada iyo manfacyada shaqaalaha ee lagaa jaray. Loo-shaqeeyayaasha qaarkood waxay mushaaradaada toos ugu diri doonaan bangigaaga, kan waxaa loogu yeedhaa bangi u dirista tooska ah ("direct deposit").

Af-ingiriisi ku Hadalka Shaqada

Haddii aadan ku hadlin Af-ingiriisi, isku day in aad dhakhso u baratid haddii ay suurtoagal tahay. Waxaad heli kartaa casharo Af-ingiriisi lacag la'aan ah ama lacag yar laga baxsho oo laga qaato iskulka daweynaha ama kuliyaada beesha. Barashada Afingiriisidu waxay kaa caawimaysaa xagga shaqada, bulshada iyo nolol maalmeedkaaga. Eeg boga 40 macluumaadka dheeraad ah ee barashada Af-ingiriisida.



Haddii loo-shaqeeyahaagu kugu yiraahdo waa in aad ku hadashid Af-ingiriisi markaad shaqada joogtid, isaga ama iyada waa in ay ku tusaan in Af-ingiriisi ku hadalku uu daruuri yahay si aad shaqadaada u gudatid. Sidoo kale waa in loo-shaqeeyahaagu in kuu sheegaa af-ingiriisi ku hadalka in laysaga baahan yahay ka hor intaan shaqada lagu qorin. Haddii loo-shaqeeyahaagu aanu ku tusi karin meel ay ku qoran tahay in lagaaga baahan yahay in aad shada kaga hadashi Af-ingiriisi. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama macluumaad dheeraad ah, waxaad la xidhiidh kartaa Guddiga Dhowre (Ilaaluya) Sinnaanta Fursadaha Shaqaalaynta ee Waddanka Maraykanka (EEOC). Wac 1-800-669-4000 ama (dadka dhegaha la') 1-800-669-6820 ama booqo <http://www.eeoc.gov>.

Doroogo iyo Denbi Baadhista

Shaqooyinka qaarkood, waxaa laga yaabaa in lagaaga baahan yahay in lagu diro baadhitaan lagu hubinayo in aadan isticmaalin maandooriyayaasha sharci darrada ah. Shaqooyinka qaarkood waxay codsadaan in dib lagu soo baadho si loo ogaado denbiyo hore iyo sida arrimahaagu hada yihiim.

Cashuur Bixinta

Cashuurta waa lacag waddaniyiinta Waddanka Maraykanku siiyaan dowladda sare, gobolka iyo dowladda hoose. Cashuurta waxaa lagu bixiyaa adeegyada dowladu qabato. Cashuurta waxay leedahay noocyo kala duwan, sida cashuurta dakhliga, cashuurta wax iibiska iyo cashuurta hantida laga bixiyo.


Cashuurta dakhliga. Cashuurta dakhliga waxaa la siiyaa dowladda federaaliga, gobolka iyo dowladda hoose. “Waxyaabaha cashuurta” la saari karo waa lacagta kaa soo gasha mushaharka, iskaa u shaqayso, lacagta bakhshiishka lagu siiyo iyo hantida la iibsho. Dadka intooda badan cashuurta dakhliga waxay ka bixiyaan lacagta laga jaro jeega shaqada. Cashuurta dakhliga inta laga rabo in aad bixisid waxay ku xidhan tahay dhaqaalaha ku soo gala. Qiyaasta cashuurta dakhliga ah oo dadka lacagta yar sameeyey way yar tahay. Qof kasta oo dakhli soo galo, oo Waddanka Maraykanka degan waxaa looga baahanyahay in uu xereeyo cashuur celinta oo bixiyo cashuurta lagu yeesho.

Laanta Adeega Cashuurta (Internal Revenue Service [IRS]) waa hay'ad dowladda federaaliga lacagta cashuurta u ururisa. Cashuurbixiyaashu waxay xereeyaan dakhliga cashuur celinta dowladda “income tax return” ee foomka 1040 oo looga soo diro IRS-ta sannad kasta. Cashuur celintaada ayaa dowladda u sheegaysa intaad lacag sameysay iyo inta jeegaaga shaqada laga jaray. Haddi lacag badan jeegaaga shaqda laga jaray, waxaa kuu soo noqon doona lacag. Haddi lacag aan ku filayn jeegaaga shaqda laga jaray, waa in aad IRS-ta lacag u soo dirtid.

Cashuurta Nabadsugida Bulshada iyo Daryeelka Caafimaadka (Social Security and Medicare taxes).

Cashuurahan dowladda federaaliga ah, waxaa laga gooyaa jeegaaga shaqada. Nabadsugida Bulshada wuxuu bixiyaa manfacyo lagu kaalmeeyo hawlgabayaasha shaqada qaarkood iyo qoysaskooda, qaar naafada shaqadaysa ka mid ah iyo qoysaskooda, iyo qoysaska qofkoodu ku dhinto shaqada. Cashuurta Daryeelka Caafimaadka waxaa lagu bixiyaa adeegyada caafimaadka dadka da'doodu dhaaftay 65.

FOOMKAAGA W-2: MUSHAHARKA IYO WARBIKINTA CASHUURTA



W-2 waa foomka federaaliga waxaa ku liisgaraysan dakhliga ku soo galay iyo cashuurta lagaa jaray sannadkii hore. Sannad cashuureedku waa bisha Janaayo 1 ilaa Diisambar 31 ee sannad kasta. Sharci ahaan, waa in loo-shaqeeyuhu kuu soo diro foomka W-2 intaan la gaadhin bisha January 31 sannad kasta. Waxaad shaqo kasta ka heli doonataa foomka W-2. Waa in aad koobiga W-2 foom ku dartid celinta cashuurta dakhliga oo aad u diraysid IRS-ta. Haddii aad ku nooshahay ama ka shaqaysid gobol ururiya cashuurta dakhliga, waa inaad dirtid koobiga W-2 foomkaaga iyo cenlinta cashuurta dakhliga.

Intooda badan, waa in aad shaqaysid muddo dhan 10 (ama 40 rubuc) ilaa intii aad noloshadu jirtey si lagu siiyo manfacyada Hawlgabida ee Nabadsugida Bulshada iyo Daryeelka Caafimaadka. Waxaa laga yaabaa in lagaaga baahan yahay in aad shaqaysid muddo toban sanno ka yar markaad dalbanaysid manfacyada naafada ama qoyskaagu dalbadaan manfacyada badbaada marka loo eego lacagtaad sameysay.

Cashuurta Ganacsiga. Cashuurta ganacsiga waa cashuurta gobolka iyo dowladda hoose. Cashuurtan waxaa lagu daraa qiimaha waxyaabaha qaarkood la iibsado. Cashuurta ganacsiga qiyaasteedu waxay ku xidhan tahay shayga qiimihiisa. Cashuurta ganacsiga waxaa lagu bixiyaa adeegyada gobolka iyo dowladda hoose bixiso sida kharashka waddooyinka, booliska iyo ciidanka dabdamiska.

Cashuurta Hantida. Cashuurtani waa cashuurta gobolka iyo dowladda hoose oo laga bixiyo gurigaaga iyo dhulka aad leedahay. Meelaha intooda badan, cashuurta hantida waxaa lagu kaalmeeya iskuulka dadweynaha iyo adeegyo kale.

Caawimaad Helista Cashuurtaada

Sharci ku deganaade ahaan, waxaa lagaaga baahan yahay in aad xeraysid cashuurta dakhliga sannad kasta. Celintan waxay daboolaysaa dakhligii ku soo galay bishii January ilaa December ee sannadii la soo dhaafay. Waa in aad cashuurtaada xereysid intaan la gaadhin bisha Abriil 15. Waxaad caawimo bilaa lacag ah ka heli kartaa Xarunta Kaalmada ee Cashuurbixiyaasha IRS-ta markaad rabtid inaad xereysid cashuurtaada. Uma baahanid in aad hore u sii wacatid. Xarunta Kaalmada ee Cashuurbixiyaasha waxay ku taalaa magaaloyin badan oo Waddanka Maraykanka gudihisa ku yaal. Si aad u heshid Xarunta Kaalmada ee Cashuurbixiyaasha oo ku taala meeshaad degan tahay, booqo <http://www.irs.gov/localcontacts/index.html>. Caawimaada telefoonka, wac lambarkan IRS-ta 1-800-829-1040.

SIDA DOWLADU INOOGU SHAQAYSO



Cashuurtu waxay bixisaa adeegyada dowladda federaaligu u qabato dadka Waddanka Maraykanka ah. Adeegyada qaarkood waxa ka mid ah:

- Sugidda amniga waddanka.
- Daaweynta iyo ka hortaga cudurada ee lagu ogaado cilmi baadhista.
- Ilaalin lacagteena lagu hayo bangiga oo caymis la geliyo.
- Waxbarida caruuta iyo dadka waaeyn
- Dhisida iyo dayactirka waddooyinka haayweyada.
- Bixinta adeegyadda caafimaadka ee saboolka iyo waayeelka.
- Ku deeqida gargaarka xaalada degdegga ah marka dhibaatooyinka dabeeciga ah dhacaan, sida duufaanada, dada ama dhulgariirka.



U kala Socdaalida Waddanka Maraykanka Gudihisa

Waxaa jira dhawr siyaabood oo aad Waddanka Maraykanka ugu kala safri kartid. Magaalooyin badan waxay leeyihiin basas, tareen oo loo yaqaan (“subways”), iyo gaadhi gaadidka dadweynaha ka mid ah (“trolleys” ama “streetcars”). Baabuurta qof kasta ayaa ku raaci kara lacag yar. Meelaha qaarkood waxaad iibsana kartaa kaadh dhawr jeer aad ku isticmaali kartid baska iyo tareenka. Sidoo kale waxaad bixin kartaa mid aad markaad baska ama tareenka raacaysid iibsanaayid. Taksiyada (“taxis”) waa baabuur ku geynaya meeshii aad rabtid. Taksigu waa ka qaalisan yahay gaadiidka kale ee dadweynaha.

MA IIBSAN KARAA BAABUUR?



Way kuu fiican tahay in aad baabuur leedahay si aad meelaha aad rabtid u tagto. Waddanka Maraykanka, waa in aad sidoo kale bixisid caymiska, diiwaangelinta iyo taarikada baabuurkaaga. Magaalooyinka qaarkood oo baabuurto ku badan yahay waa dhib gaadhi ku wadistu. Ka feker dhammaan kharash iyo faa'iidooyinka ka hor intaadan go'aansan baabuur iibsashada.

Qaadashada Ruqsada Baabuurka lagu Wado

Waa sharci darro in aad ruqsad la'aan ku wadid baabuurka. Waa in aad qaadatid ruqsada baabuurka lagu wado haddii aad rabtid in aad baabuur wado. Waxaad ruqsada baabuurka ka qaadan kartaa gobolka aad degan thay.

Ka hubso xafiiska bixiya ruqsada baabuurka sida loo qaato ruqsada baabuurka. Gobol kasta xafiiskiisu wuxuu leeyahay magac u gooni ah. Magacyada guud oo la yaqaano waxaa ka mid ah Waaxda Qaybta Baabuurta (Department of Motor Vehicles [DMV]), Waaxda Gaadiidka, Maamulka Qaybta Baabuurta, ama Waaxda Amniga Dadweynaha. Xafiisyadan waxaad ka heli kartaa bogagga buluug ah ee buugga telefoonada ama macluumaad dheeraad ah ka eeg http://www.usa.gov/Topics/Motor_Vehicles.shtml.

Deganaadayaasha rasmiga ah qaarkood waxay hore uga qaateen ruqsada baabuurka lagu wado waddamo kale. Waxaa laga yaabaa inaad ruqsadaadii hore ka bedelan kartid gobolka aad ku nooshahay. Ka hubso xafiiska gobolka haddii aad sidan sameyn kartid.

10 TALO OO KU SAABSAN AMNIGA BAABUUR WADDIDA WADDANKA MARAYKANKA



- Ku wad baabuurka dariiqa dhinaca midigta.
- Markasta waa inaad haysataa ruqsada baabuur wadida iyo warqada caymiska.
- Mar kastaba waa in aad suunka xidhataa.
- Markastaba caruurta waa inay suunka xidhnaadaan.
- Isticmaal baabuurka fareejadiisa markaad mig ama bidix u leexaneysid.
- U hogaansanoow sharciyada dariiqa iyo calaamadaha.
- U leexo dhinaca midigta markaad aragtid baabuurta xaalada deg deg ah sida dabdamiska, booliska iyo ambalaaska oo u baahan in ay ku dhaafaan.
- Ha dhaafin marka baska qaada caruurta iskuulka ay nalka cas ee biligbiligtu u baxayaan.
- Ha kaxaysan baabuurka hadii aad khamri cabtey ama daroogo isticmaashay.
- Si aad ah u taxadir markaad baabuurka kuwadid, ceeryaamo, roob iyo baraf.

➔ **TALO:** Warqada baabuurka lagu wado waxaa loo isticmaalaa aqoonsi oo kale markaay way fiicantahay inaad qaadatid haddaad baabuur leedahay iyo haddii kaleba.

Haddii aadan aqoon sida baabuurka loo wado waxaad qaadan kartaa casharo ku saabsan sida baabuurka loo wado (“driver education”). Iskuulo badan iyo degmooyin badan ayaa laga bixiyaa casharada ku saabsan sida loo wado (“Driving Instruction”) baabuurka. Sidoo kale waxaad ka eegi [kartaa sharraxaada ku qoran buuga talefoonada] ee jaalaha ah.

➔ **TALO:** Caadi ma aha dadka waddada dhinaceeda lugaynaya in la qaado Waddanka Maraykanka. Meelo badan waa sharci darro arrintaasi. Nabad gelyo darteed, adigu gacanta ha u taagan cidna hana qaadin qof dariiqa taagan.

MACLUUMAADKA SOCDAALKA



Markaad-baska raaceysid:
Greyhound tefoonkiisu waa
1-800-229-9424
ama <http://www.greyhound.com>.



Markaad-tareen raaceysid:
Amtrak ka wac 1-800-872-7245
ama <http://www.amtrak.com>.



Hadii aad rabtid inaad diyaarad raacdid: Diyaarado badan ayaa jira Wadanka Maraykanka. Waxaad ka hali kartaa buuga telefoonka jaalaha ah qoybta “Airlines”.

Daryeelida Caafimaadkaaga

Dadka maraykanka ah iyagaa bixiya kharashka daryeelka caafimaadkooda. Daryeelka caafimaadku waa qaali, markaa dad badan baa iibsada caymiska caafimaadka. Waa inaad adiga iyo qoyskaagu iibsataan caymiska caafimaadka haddii ay suurtoagal tahay.

Waxaa laga yaabaa in loo-shaqeeyuhu bixiyaan caymiska caafimaadka si ay ugu faa'iideeyaan shaqaalahooda. Loo-shaqeeyayaasha qaarkood waxay bixiyaan karashka caymiska caafimaadka oo dhan bil kasta, qaarkoodna waxay bixiyaan qayb ka mid ah. Karashka bil kasta la bixiyo waxaa loogu yeedhaa lacag bixinta joogtada ah "premium". Waxaa loo baahan yahay in aad bixisid qayb ka mid ah lacag bixinta joogtada ah. Si caadiga ah, loo-shaqeeyahaaga ayaa ka jari doona qayb ka mid ah lacagta caymiska caafimaadka jeega shaqaalaha.

HELISTA CISBITAALKA IYO DARYEELKA CAAFIMAAD KALE EE QIIMAHOODU JABAN YAHAY



Cisbitaalka yar (Clinics) waa xaafiisyo caafimaad oo bixiya adeegyo lacag la'aan ah ama qiimo jaban. Bulsho ama beel kasta waxay leedahay ugu yaraan hal cisbitaal oo yar (Clinics). Ururada beesha oo la shaqeeya muhaajiriinta ayaa laga yaabaa in ay yaqaaniin kilinigyo bilaash ah ama lacag yar qaata oo ku yaal meelaha aad degan tahay.

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka ee Waddanka Maraykanka ayaa sidoo kale siiya muhaajiriinta daryeel caafimaad oo aasaasi ah. Waxay leeyihiin internet ay ku qoran yihiin liiska cisbitaalada ama kala doorashada daryeelka caafimaadka kale. Helis cisbitaal ama dhakhtarka kuugu dhaw booqo <http://findahealthcenter.hrsa.gov/>. Garaac magaca gobolka ama furaha boostada (zip code) si aad warbixin u heshid. Sidoo kale waxaad ka eegi kartaa bogagga jaalaha ah ee telefoonada qaybta adeegyadda bulshada "Social Services."

Dhakhtaradu waxay biilasha u diraan shirkada caymiska caafimaadkaaga. Shirkada caymiska caafimaadka ayaa bixin doonta qaar ama kuli adeegyadda daaweyntaada. Marmarka qaarkood adaa bixinaya qayb ka mid ah biilka daaweyntaada. Kan waxaa marmarka qaarkood loogu yeedhaa inta lagaa rabo inaad bixisid "co-payment."

Haddii aadan lahayn caymiska caafimaadka, waxaa laga yaabaa in aad heli kartid caymiska caafimaadka dowladda federaaliga ama kan gobolka. Guud ahaan, gobolada intooda badan waxay siiyaan caruurta dumarka uurka leh kaalmooyin qaarkood. Ka hubso waaxda caafimaadka dadweynaha, gobolka iyo tuulada arrimahaas.

Haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah, waxaad tegi karta qolka xaalada degdegga ah (emergency room) ee cisbitaalka kuugu dhow. Cisbitaalada intooda badan sharciyan waxaa looga baahan yahay in ay daaweeyaan buktada ugu yimaada xaalad caafimaad oo degdeg ah, xataa haddii aanu qofku kharash iska bixin karin.

Barnaamijyada Caafimaadka ee Dowladda Federaaliga iyo Gobolka

Taakulaynta Caafimaadku (Medicaid) waa barnaamij ay iska kaashadeen federaaliga/gobolka ee dadka dakhligoodu yar yahay. Gobol kasta wuxuu leeyahay qaynuunada Taakulaynta Caafimaadka oo u gaar ah. Taakulaynta Caafimaadku waxay bixisaa adeegyadda caafimaadka, sida tegista dhakhtar ama cisbitaal. Deganaadayaasha rasmiga ha, oo soo galay Waddanka Maraykanka ka hor Ogost 22, 1996 waxaa laga yaabaa in la siin karo Taakulaynta Caafimaadka haddii ay ka soo baxaan shuruudaha qaarkood. Deganaadayaasha rasmiga ha, oo soo galay Waddanka Maraykanka markaas ama ka dib Ogost 22, 1996 waxaa laga yaabaa in la siin karo Taakulaynta Caafimaadka haddii ay ku noolaayeen Waddanka Maraykanka shan 5 sanno ama ka badan oo ka soo baxaan shuruudaha.

Daryeelka Caafimadka (Medicare) waa barnaamijka caymiska caafimaadka ee dadka da'doodu tahay 65 ama ka weyn ama naafooyin gaar ah leh. Daryeelka Caafimadka wuxuu bixiyaa adeegyo haddii aad buktid ama aad dhaawacan tahay, laakiin aadan bixin daryeel caadi ah, sida dhakhtar u tegista, daryeelka ilkaha iyo daryeelka indhaha.

WARBIXINTA INTAA KA BADAN OO KU SAABSAN TAAKULAYTA CAAFIMAADKA IYO DARYEELKA CAAFIMAADKA



La xidhiidh Maamulka Nabadsugida Bulshada oo ah **1-800-772-1213** ama Xarunta Adeegyadda Daryeelka Caafimaadka iyo Taakulaynta Caafimaadka oo internetkoodu yahay <http://www.cms.hhs.gov>.

Daryeelka Caafimaadka wuxuu leeyahay dhawr qaybood, oo ay ka mid yihiin Qaybta A, Qaybta B, iyo caymiska daawooyinka (prescription drug coverage). Qaybta A waa lacag la'aan iyo bixinta kharashka daryeelka cisbitaalka iyo xirfada xannaanada duqayda oo ay xaqiijisay Medicare. Qaybta B waa waxay bixisaa dakhtar tegista, ambalaaska (ambulances) baadhitaanka iyo daryeelka bukaan-socodka ee cisbitaalka. Qaybta B, waxaad bixinaysaa ujro yar ama lacag yar. Caymiska daawooyinku waxay kaa caawimaysaa bixinta daawooyinka dhakhtarku kuu qoro ee daaweynta. Isku qorida qorshaha Medicare Daryeelka Caafimaadka ee daawooyinka iskaa ayaad ugu qayb geli kartaa, ama waxaad bixinaysaa lacag yar bishiiba mar.

Deganaadaha rasmiga ah wuxuu qaadan karaa Qaybta A, Qaybta B, iyo caymiska daawooyinka haddii ay ka soo baxaan shuruudaha qaarkood. Kuwa ah 65 ama ka weyn waxay si toos ah u helayaan Daryeelka Caafimaadka Medicare markay bilaabaan manfacyada hawlgabka ee Nabadsugida Bulshada. Haddii aadan ahayn 65 jir, laakiin siyaabo kale ugu qalmi kartid, wac xafiiska Nabadsugida Bulshada ee kuugu dhow wixii warbixin ah oo ku saabsan sida loo dalbado. Guud ahaan, waa inaad Waddanka Maraykanka ka soo shaqaysay muddo gaadhaysa 10 sanno (ama 40 quarters) intii ay jirtey noloshaadu si aad u qaadatid manfacyada Daryeelka Caafimaadka. Warbixinta intaa ka badan ka minguuri internetka ee daabacaada Medicare & You (Daryeelka Caafimaadka oo ah) oo ah <http://www.medicare.gov/publications/pubs/pdf/10050.pdf>.

Barnaamijka Caafimaadka Caruurta ee (SCHIP)

Waxaa laga yaabaa in caruurtaadu u qalanto qaadashada caafimaadka bilaashka ah haddii aad ka soo baxdid shuruudaha qaarkood. Gobol kasta wuxuu leeyahay barnaamijka caymiska caafimaadka mujucyada, caruurta iyo dhalinyarada yar. Caymisku wuxuu bixiyaa kharashka dhakhtarka, daawooyinka, daryeelka cisbitaalka iyo adeegyadda kale ee ku saabsan daryeelka caafimaadka. Gobolada intooda badan, caruurta da'doodu tahay 18 ama ka yar oo aan caymiska caafimaadka lahayn oo dhaqaalaha reerkoodu yaryahay way u qalmaan barnaamijka. Caruurta waxay heli karaan daryeelka caafimaadka bilaash ah ama mid jaban iyagoo aan sharciga waalidkood haysto waxba ka bedelayn.

MACLUUMAADKA KU SAABSAN BARNAMIJKA CAAFIMAADKA CARUURTA EE (SCHIP)



Gobol kasta wuxuu leeyahay qaynuuno gooni ah ee SCHIP. Waxaad u baahan tahay in aad ogaatid barnaamijyada gobolkaaga. Macluumaad intaa ka badan oo ku saabsan SCHIP ee gobolkaaga wac **1-877-543-7669** ama booqo <http://www.insurekidsnow.gov> oo geli magaca gobolkaaga.

Manfacyada Barnaamijyada kale ee Dowladda

Adiga ama xubin ka tirsan qoyskaaga ayaa laga yaabaa in ay u qalmaan manfacyada kale ee dowladda federaaliga, waxayna ku xidhan tahay sharciga aad ku joogtid, intii aad Waddanka Maraykanka joogtey iyo dakhliga.

Barnaamijka Kaalmada Cuntada

Muhaajiriinta ama muhaajirka dakhligoodu yar yahay waxa laga yaabaa in caruurtoodu u qalanto in la siiyo kaalmada cuntada, waxayna ku xidhan tahay sharciga aad ku joogtid, intii aad Waddanka Maraykanka joogtey iyo dakhliga. Kaalmada cuntada waxay kuu oggolaanaysaa inaad dukaanka ka qaadatid cunto bilaash ah. Gobolada qaarkood waxa laga yaabaa inay leeyihiin barnaamij kaalmada cuntada u gaar ah oo sharciga u qalmida muhaajiriintu ka duwan yahay gobolada kale. Warbixinta intaa ka badan oo ku saabsan Kaalmada Cuntada Federaaliga ee Adeegyadda Cuntada iyo Nafaqada Waddanka Maraykanka oo ku qoran 36 luqadood booqo <http://www.fns.usda.gov/fsp/outreach/translations.htm>.

Adeegyada Badbaadeyaasha Dagaalka Qoysaska

Muhaajiriinta iyo caruurtooda ka soo samatabaxay dagaalka qoyska ah waxaa laga yaabaa in ay u qalmaan adeegyadda manfacyada dowladda federaaliga, sida hoyga dumarka dhibaataysan iyo kaalmada cuntada. Macluumaad intaa ka badan oo ku saabsan adeegyadda Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka booqo <http://www.hhs.gov/ocr/civilrights/resources/specialtopics/origin/domesticviolencefactsheet.html>.

Kaalmada Taakulaynta aan Joogtada ahayn ee Qoysaska Baahan (TANF)

Kaalmada Taakulaynta aan Joogtada ahayn ee Qoysaska Baahan waa barnaamijka dowladda federaaliga oo lacag siiya gobolada si ay ugu deeqaan kaalmo iyo fursado shaqo qoysaska danyarta ah ama dakhligoodu hooseeyo. Muhaajiriinta waa laga yaabaa in ay u qalmaan, waxayna ku xidhan tahay sharciga aad ku joogtid, intii aad Waddanka Maraykanka joogtey iyo dakhliga. Barnaamijyadu way kala duwan yihiin oo gobol kasta wuxuu lee yahay barnaamijka kaalmada oo u gooni ah. Xidhiidhka macluumaadka TANF, booqo <http://www.acf.hhs.gov/programs/ofa/>.

Kaalmada Muhaajiriinta Naafoda ah

Muhaajiriinta naafoda ah waxa laga yaabaa in ay u qalmaan Taakulayn Caafimaad, manfacyada cuntada, Dakhliga Nabadasugidda Dheeraadka ah, oo ay ku xidhan tahay sharciga socdaalka oo ay waddanka ku joogaan, inta ay joogeen Waddanka Maraykanka iyo dakhliga. Macluumaad intaa ka badan oo ku saabsan manfacyada cuntada eeg bogga 32. Macluumaad intaa ka badan oo ku saabsan Dakhliga Nabadasugidda Dheeraadka ah ka eeg internetka <http://www.socialsecurity.gov/ssi/spotlights/spot-non-citizens.htm>.

Mar-istaagida Xarunta Shaqada

Dowladda Federaaliga ah ayaa bixisa lacagta kharashka ee xarumaha shaqada oo bixisa tababar u diris, shaqo kala talin, liiska shaqooyinka iyo adeegyada kale ee la xidhiidha xagga shaqaalaynta. Waxaa kale oo la bixiyaa casharada barashada Luqada Labaad ee Af-Ingiriisida (English as a Second Language [ESL]) iyo tababarka xirfadaha shaqooyinka oo la siiyo muhaajiriinta, oo xarumaha qaarkood ku xidhan sharciga socdaalka oo aad waddanka ku joogtid iyo dakhliga ku soo gala. Macluumaadka ku saabsan Mar-istaagida Xarumaha Shaqada ee ku taala Waddanka Maraykanka oo dhan booqo <http://www.doleta.gov/usworkforce/onestop/onestopmap.cfm>.

➔ **TALO:** Waxaad booqan kartaa <http://www.govbenefits.gov> si aad u ogaatid waxyaabaha ku saabsan adeegyadda kuu diyaarka ah adiga.



Waxbarashada iyo Daryeelka Carruurta

Waxbarashadu waxay kaa caawin kartaa la xidhiidhka bulshadaada adiga iyo qoyskaaga. Qaybtani waxay kuu sharraxaysaa iskuulaadka Maraykanka ee ilhama, dhalinyarada iyo dadka waaweyn oo waxay ka jawaabaysaa su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Sidoo kale waxay soo jeediyaan talooyin ku saabsan helista daryeel ilmaha haddii aad haysatid caruur yar oo guriga kuu jooqta, una baahan tahay in aad shaqo tagtid.

Waxbarasho

Si loo hubiyo in ilmaha oo dhan u diyaar yihiin ku najixida iskuulka, Waddankan Maraykanku wuxuu leeyahay waxbarasho bilaash ah. Qaybtani waxay kuu sheegaysaa sida aad ilmahaaga iskuul ugu dartid. Waxaad baran doontaa habka iskuulada Waddanka Maraykanku u shaqeeyaan iyo sida aad ilmahaaga uga kaalmayn kartid xagga waxbarashada.

Ka Diiwaangelinta Ilmahaaga Iskuulka

Iskuulaaadka Waddanka Maraykanka intooda badan waa wax wada barasho laysku dhex jiro. Wax wada barashada isku dhex jirka ah waxaweeye gabdhaha iyo wiilasha oo fasal wada dhigta. Iskuulaaadka Waddanka Maraykanka wuxuu leeyahay qawaaniinta imaantin qasabka ah ee iskuulka. Tan micnaheedu waxa weeye sharciga gobolku wuxuu dhigayaa caruurta da'doodu u dhexayso 5 ilaa 16 in looga baahan yahay in ay iskuulka yimaadaan. La xidhiidh waaxda waxbarashada gobolkaaga si aad u ogaatid da'da caruurta loo baahan yahay inay iskuulka yimaadaan.



Waxaad ilmahaaga u diri kartaa dugsiga dowladda ama iskuul gaar ah. Gobolada qaarkood waalidiintaa laga yaabaa in ay ilmahooda guriga wax ku baraan. Waxaana loo yaqaan Iskuul Guri (“home schooling”). Dugsiyada dowladu waa bilaash casharo diineedna ma bixiyaan. Maadooyinka ilmahaaga dugsiga ka barto waxaa dejiyey gobolka. Hase-yeeshee macalimiinta iyo waalidiinta ayaa go'aamin kara habka wax loo barayo. Waxaa kharasha iskuulaaadka lagu bixiyaa cashuurta dowladda federaali, tan gobolka, canshuurta dakhliga iyo tan hantida laga bixiyo.

Ardaydu waa in ay iska bixiyaan kharashka ama ujrada loo yaqaan (“tuition”) ee iskuulaaadka gaarka ah. Ururada diintu waxay leeyihiin iskuulo fara badan oo gaar ah. Qaarkood waa isku dhex jir. Qaarna waa wiilal ama gabdho keliya. Qaarkood waxay ugu deeqaan kaalmo maaliyadeed ardayda aan iska bixin karin kharashka ama iskuulka.

Carrurta Ameerikaanka ah, intooda badan waxay iskuulka ku jiraan muddo 12 sannadood ah. Carruurtaada waxaa lagu dari doonaa fasalka (“grade”) ku haboon marka loo eego da'dooda iyo inta waxbarashadoodii hore gaadhsiisan tahay. Marmarka qaarkood waxaa laga yabaa in iskuulku ilmahaaga imtixaan ka qaado si loo habsado fasalka isaga ama iyada lagu qori karo.

Waxa ugu horeeya oo aad sameysid waa inuu noqdaa ilmahaaga oo aad iskuul ku darto. Su'aalaha qaar ka mid ah oo waalidiintu inta badan iskuulaaadka dowladda weydiiyaan waxaa ku jira:

S: Waa intee la eg sannad dugsiyeedka?

J: Inta badan iskuulku wuxuu bilaabmaa bisha Agoosto ama Setember ilaa dhammaadka Maayo ama Juun. Meelaha qaarkood, caruurta waxay dhigtaan iskuulka sannadkoo dhan. Caruurta waxay iskuulka tagaan Isniinta ilaa Jimcaha. Iskuulada qaarkood waxay bixiyaan barnaamijyo ka horeeya

ama ka danbeeya saacadaha caadiga ah oo loogu talagalay caruurta waalidiintoodu shaqeyaan. Waxa laga yaabaa in barnaamijyadan lagaa qaado lacag yar.

S: Xaggee ka diiwaangeliyaa ilmahayga?

J: Wac ama booqo xafiiska weyn ee iskuulka degmadaada si aad u ogaatid iskuulka aad ilmahaaga ku dari kartid. U sheeg shaqaalaha iskuulka ilmahaaga da'aadiisa iyo ciwaanka aad degan tahay.

S: Waa maxy dukumentiyada aan u baahnahay markaan ilmahayga iskuulka ku darayo?

J: Waxaad u baahan tahay xogta caafimaadka ilmahaaga oo caddaynaya in uu qaatay tallaalo ka hortaga cudurada oo la yidhaahdo "shots". Sidoo kale waxa laga yaabaa in aad u baahatid wax caddaynaya meesha aad ku nooshahay in ay ka mid tahay xaafada iskuulku ku yaalo. Haddii waraaqahaasi kaa lumen, weydii shaqaalaha iskuulka meesha laga dalbado dukumentii cusub. Si aad ugu taxadirtid dib dhac, samee waxyaaban ka hor intaadan ilmahaaga iskuulka qorin.

SIDA DUGSIYADA MARAYKANKA INTOODA BADAN LOO MAAMULO



Dugsiga Hoose iyo iskuulka xannaanada waxay ka kooban yihiin fasal 1 iyo ilaa 5 waxaana dhigta caruurta da'doodu tahay 5 ilaa 10 sano



Dugsiga Dhexe wuxuu ka kooban yahay fasalada 6 ilaa 8 waxaana dhigta dhalinyarada da'doodu tahay 11 ilaa 13



Dugsiga Sare wuxuu ka kooban yahay fasalada 9 ilaa 12 waxaana dhigta dhalinyarada waaweyn oo da'doodu tahay 14 ilaa 18



Dugsiga Sare ka dib ama Tacliinta Sare, tacliinta Dadweynaha ama tan Gaarka ah, Kulliyad oo ah labo sanno ama afar sanno, Jaamacada, Iskuulka Ganacsiga, iyo Iskuulka Dadka-waawyn

S: Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu aanu ku hadlin Afka-ingiriisida?

J: Iskuulka ayaa ka mas'uul ah in ay ilmahaaga imtixaan ka qaadaan si loogu daro barnaamijka saxda ah. Iskuulku waxay lacag kaga helaan dowladda iyo gobolka barnaamijyada iyo adeegyada sida barashada luqada Af-ingiriisida (ESL) ama waxbarashada luqada labaad (bilingual education). Waxaad wici kartaa iskuulka ilmahaaga si aad u weydiisid intixaamida, meelaynta iyo adeegyada. Xataa haddi aan ilmahaagu luqada Af-ingiriisida ku hadlin, isaga ama iyadu waxay u baahan tahay in ay barto maadooyinka ku haboon heerkiisa ama heerkeeda waxbarasho. Sidan waxay ku gaadhi karaan in ay qaataan luqada af-ingiriisida ESL ama waxbarashada luqada labaad.

S: Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu naafo yahay?

J: Ardayda naafada ama maskaxda wax uga dhiman yihiin waxay heli karaan waxbarashada dadweynaha ee bilaashka ah, sida kuwa aan naafada ahayn oo kale. Ilmahaaga waxaa la geyn doonaa iskuul caadi ah, haddii uu suurugal yahay. Haddii ilmahaagu aad naafo u yahay, isaga ama iyada waxaa laga yaabaa in la siiyo adeegga waxbarashada gaarka ah oo ka baxsan fasalada caadiga ah. Macluumaadka intaa ka

badan oo ku saabsan sida loo helo adeegyada ay bixiyaan Guddida Gobolka, fadlan booqo <http://www.acf.hhs.gov/programs/add/states/ddcs.html>.

S: Ilmahaygu iskuul ma dhigan jirin ka hor intaanaan iman Waddanka MarAykanka. Intaa bay isagu/iyadu iskuulka dadweynaha oo bilaashka ah dhigan karaan?

J: Ilmahaagu wuxuu iskuulka bilaashka ha tegi karaa ilaa iyo intuu ka gaadhayo da'da 21 sida ay goboladu u badan yihiin. Haddii ilmahaagu aanu ka qalin jebin dugsiga sare intaa ka hor, isagu/iyadu waxay dhigan karaa fasalada waxbarashada dadka waaweyn si ay ku qaataan Shahaadada loo yaqaan (General Educational Development [GED]) oo u dhiganta shahaadada dugsiga sare. Waxad wacdaa xafiiska iskuulka degmadaada ama Waaxda Waxbarashada gobolka si aad u ogaatid meesha laga bixiyo fasalada GED.

S: Ilmahaygu sidee buu iskuulka u tegayaa?

J: Waddanka Maraykanka caruurtoodu way u lugeeyaan iskuulka marmarka qaarkood. Haddii iskuulku fog yahay, waxay raacayaan baska. Iskuulada dadweynuhu waxay leeyihiin basas bilaash ah. Ardayda wuxu basku ka qaadaa ama ku soo dejiyaa meel basku istaago oo gurigaaga u dhow. Si aad u ogaatid in ilmahaagu baska raaci karo, la xidhiidh maamulka iskuulka degmadaada. Haddii aad haysatid baabuur, waxaad sameysan kartaan adiga iyo waalidiinta kale oo caruurtiinu isku iskuulka tagaan in aad wadaagaan wax la yiraahdo baabuur wadaagis (“car pool”).

S: Ilmahaygu muxuu iskuulka ku cunayaa?

J: Caruurta waxay cuntadooda u qaadan karaan iskuulka ama mid bay ka iibsan karaan makhaayada iskuulka ku taal. Sidoo kale dowladda maraykanku waxay bixisaa quraac bilaash ah ama qiime jaban ah oo loogu talagalay caruurta aan iibsan karin cuntada iskuulka. Wac ama booqo iskuulka ilmahaaga si aad u ogaatid in ay ka qayb qaatan barnaamijka cuntada ee iskuulka dowladda. La hadal shaqaalaha iskuulka si aad u ogaatid haddi caruurtaadu u qalmaan ka qayb qaadashada barnaamijka cuntada.

BARNAAMIJKA DOWLADDA EE CUNTADA ISKUULKA



Caruurta waxay si fiican wax u bartaan marka si wanaagsan loo quudiyo. Si waxbarashada kor loogu qaado, dowladda maraykanku waxay bixisaa cuntooyin caafimaadka u fiican oo qiime jaban ah ama mid bilaash ah oo loogu talagalay caruur ka badan 26 malyuun maalin kasta. Ka qayb qaadashada barnaamijka quraacda iskuulka ama barnaamijka qadada wuxuu ku dhisan yahay dakhilga qoyska iyo inta qoysku leeg yahay. Barnaamijka caanaha gaarka ah wuxuu bixiyaa caano loogu talagalay caruurta aan ka qayb qaadan barnaamijyada Cuntada Iskuulka dowladda. Macluumaad intaa ka badan oo ku saabsan barnaamijyadan, booqo shebekada intarnet ee Waaxda Beeraha Maraykanka <http://www.fns.usda.gov/cnd/>.

S: Yaa bixiya kharashka buugta iyo hawlaha iskuulka ?

J: Iskuulka dadweynaha waa iska caadi in ay buug bilaash oo wax laga barto bixiyaan. Ardaydu waa in ay iibsadaan waxyaabaha iskuulkooda, sida xaashiyaha wax lagu qorto iyo qalin rasaas ama qalin qoriga. Haddii aadan bixin karin waxyaabaha iskuulka, la xidhiidh iskuulka ilmahaaga. Waxa laga yaabaa in iskuulada qaarkood lacag yar ka qaadan waxyaabaha iskuulka ama dhacdooyinka gaarka ah, sida safarka iskuulka ee caruuta loo sameeyo.

S: Muxuu ilmahaygu iskuulka ka baranayaa?

J: Gobol kasta wuxuu dejiyaa qaynuunada waxbarashada ee iskuulka. Qaynuunada gobolku waa in ardayda oo dhan ogyihiin ama sameyn karaan waxyaabaha looga baahan yahay. Iskuulka degmada ayaa go'aan ka gaadha sida macluumaadka loo dhigayo ama loo baranayo. Iskuulada intood badan waxaa laga bartaa Ingiriisi, Xisaab, culuunta Bulshada, Saynis iyo Waxbarashada Jidh Dhiska. Farshaxan, muusiga iyo luuqadaha ajnibga waa la bixiyaa marmarka qaarkood.

S: Sidee shaqada ilmahayga loo qiimeynayaa?

J: Macalimiinta ayaa bixiya dhibcaha ilmahaagu keeno marka loo eego shaqada uu qabtay inta sannad dugsiyeedka lagu jiro. Dhibcaha inta badan waxaa lagu bixiyaa shaqo-guriga, imtixaanaadka, imaanshaha iskuulka iyo anshaxa ama edaabta kalaaska. Waxaa lagu soo diri doonaa kaadhka warbixinta (“report card”) ilmahaaga sannadii dhawr jeer. Kaadhka warbixintu wuxuu kuu sheegayaa sida ilmahaagu maado kasta u sameynayo. Iskuulaadku way kala duwan yihiin habka ardayga dhibcihiisa loo qiimeeyo. Iskuulada qaarkood waxay istimaalaan xaraf u taagan dhibcaha uu keenay ilmuhu, tusaale: A ama A+ waxay u dhigantaa shaqo aad u fiican, xarafka D ama F wuxuu u dhigmaa shaqo iskuul ku liidasho ama ku dhicis. Iskuulo kale waxay isticmaalaan lambaro xagga dhicaha. Qaar kale waxay isticmaalaan kelmedo ay koobayaan shaqada ilmahaagu qabtay sida aad u fiican (“excellent”), wanaagsan (“good”) ama u baahan horumar (“needs improvement”). Weydii shaqaalaha iskuulka sida loo qiimeeyo dhibcaha ardayda iskuulka la dhigta ilmahaaga.

S: Sidee ula hadli karaa macalinka ilmahayga?

J: Iskuulada intooda badan waxay leeyihiin kalfadhi aad kula kulmi kartid macalinka ilmahaaga. Sidoo kale waxaad sameysan kartaa kulan aad kula hadashid macalimiinta iyo maamulayaasha iskuulka sida ilmahaagu wax u barto. Haddii aadan luqada Af-ingiriisida ku hadlin, weydii haddii uu jiro qof iskuulka jooga oo luqadaada ku hadla oo kugu caawin kara turjumaad.

S: Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu iskuulka ka baaqdo?

J: Imaanshaha iskuulku waa muhiim. Waalidiintu waa in ay warqad u soo qoraan macalinka ama iskuulka soo wacaan sababta ilmahoodu iskuulka uga baaqday ama u iman waayey. Macalinka hore ugu sii sheeg haddii ilmahaagu aanu iskuulka iman doonin. Ardaydu waa inay dib u sameeyaan hawsha ama shaqada dhaaftay.

WAXAAD SAMEYN KARTO



Iskuulada dadweynaha iyo kuwa gaarka ahiba waxay leeyihiin Gudiga Waalidka iyo Macalinka (PTA) ama ururka Waalidka iyo Macalinka (PTO). Ururadan waxay caawiyaan waalidiinta raba in ay ogaadaan wuxuu ilmahoodu iskuulka ka qabto iyo ka qayb qaadashada hawlaha iskuulka. Qof kasta ayaa ka qayb qaadan kara arrintan, xataa marka lagu daro awoowayaasha iyo ayeeyooyinka. Xidhiidhka Waalidka iyo Macalinka waxay sidoo kale PTA/PTO-gu ku taageeraan iskuulka hawlo gaar ah iyo iskaa wax u qabso looga baahan yahay fasalada. Waad ka qaybgeli kartaa hawlaha iskuulka xataa haddi aadan ku hadlin luqada Afingiriisida. Iskuulada intooda badan waxay leeyihiin macluumaad gaar ah oo loogu talagalay waalidiinta ay luqada Af-ingiriisida ku adag tahay. Wac ama booqo xafiiska si aad u ogaatid marka ay kulmaan Gudiga ama ururka waalidiinta iyo macalimiinta iskuulka ilmahaaga iyo in aad ku biiri kartid ururkaas.

S: Maxaa dhacaya haddi ilmahaygu dhibaato geysto?

J: Iskuulada intooda badan waxay leeyihiin liiska sharciyada oo arday kasta looga baahan yahay inuu oofiyo. Waxaa loogu yeedhaa (“codes of conduct”) oo micneedu yahay xeerka edaabta. Ardayda jebisa qaynuunada iskuulka waxaa laga yaabaa in lagu ciqaabo in ay joogaan iskuulka ka dib marka waqtiigii loo baahnaa dhamaado ama waxa laga yaabaa in loo diido in ay ka qayb galaan barnaamijka ciyaaraha iyo hawlaha kale ee iskuulka. Ciqaabta jidhka LAMA oggola in lagu sameeyo iskuulaadka Waddanka Maraykanka.



Waxa laga yaabaa in caruurta laga baajiyo ama laga eryo iskuulka haddii ay wax anshax xumo sameeyaan ama inta badan sharciga iskuulka ku xadgudbaan. Ilmahaagu iskuulka mar danbe ma tegi doono haddii isaga ama iyada la eryo. Waxaad u baahan tahay in aad la kulanto shaqaalaha iskuulka si aad ilmahaaga iskuulka ugu soo celisid.

S: Ilmahaygu iskuulka amaan ma ku yahay?

J: Iskuulada dadweynaha ee Ameerika intooda badan waa meel amaan ah oo wax lagu baran karo. laakiin iskuulaadka qaarkood oo u badan dugsiga sare waxay leeyihiin dhibaatooyin ku saabsan dagaal, gaangistaris, daroorgo khamri. La hadal macalimiinta, gudiga iskuulka iyo maamulaha iskuulka haddi aad ka welwelsan tahay amaanka ama badbaadada ilmahaaga.

Tacliinta Sare: Kuliyaadaha iyo Jaamacadaha

Markay Dhalinyarada waaweyni dugsiga sare ka baxaan waxay sii wadan karaan tacliintooda ilaa labo-sanno ama afar-sanno oo kuliyaad beesha ama machadka farsamada ama jaamacada. Kuwan waxaa loo yaqaan “postsecondary institutions” ama “institutions of higher education.” Oo micneheedu yahay

machadka dugsiga sare ka dib ama machadka tacliinta sare. Iskuulada tacliinta sare waxay u kala baxaan kuwo dadweyne iyo kuwo gaar ah. Kuliyaadah iyo Jaamacadaha daweynuhu way ka qiime jaban yihiin kuwa gaarka ah, gaar ahaan way u qiimo jaban tahay dadka degan gobolka kuliyaadu ama jaamacadu ku taalo. Dhalinyarada waaweyni sidoo kale waxay dooran karaan inay galaan iskuulaadka laga barto shaqo gaar ah, sida farsamada kombiyuutarka ama kaaliye caafimaad.

Ardayda dhigta iskuulka tacliinta sare waxay doortaan in ay bartaan maado takhasus ah, oo loo yaqaan (“major”). Doorashada maadada takhasuska ah, waxay ka caawimaysaa isu diyaarinta shaqooyinka iyo korodhsiga waxbarashada mustaqbalka danbe.

Noocyada Digriiga	Noocyada Iskuulka	Sannadaha Iskuulka lagu jiro
Shahaado	Kuliyada Beesha/Iskuulka Ganacsiga	Lix bilood ilaa labo sanno
Shahaadada Isku xidhka “Associate’s”	Kuliyada Beesha	Labo sannadood
Baajular “Bachelor’s”	Kuliyada ama Jaamacada Afar-sanno ah	Afar sannadood
Daraasada Sare “Master’s”	Jaamacad	Labo sannadood
Shahaadada Digtoornimada “Doctorate”	Jaamacad	Labo ilaa sideed sannadood
Takhasus “Professional”	Iskuul Gaar ah	Labo ilaa shan sannadood

Waxbarashada kuliyada ama jaamacada waxay noqon kartaa qaali. Iskuulada qaarkood waxay bixiyaan deeq waxbarasho oo loo yaqaan (“scholarships”). Sidoo kale dowladda maraykanku waxay bixisaa kaalmo maaliyadeed oo loogu talagalay ardayda. Ardayda intoodda badan waxay qaataan deyn ama waxay dalbadaan kaalmo maaliyadeed ama deeq waxbarasho si ay isaga bixiyaan kharashka iskuulka. Deeqda waxbarashada iyo lacagta dowladu bixiso qaarkood waa laga dhimay dadka Maraykanka ah.

Kaalmo Maaliyadeedka Dowladda Sare ee Ardayda Kuliyada

Dowladda Maraykanku waxay siisaa kaalmo maaliyadeed ardayda dhigata iskuulada tacliinta sare qaarkood. Kaalmadani waxay dabooshaa kharashyada badan ee iskuulka, oo ay ka mid yihiin lacagta iskuulka, ujro, buugaga, qolka ama hooyga, saadka iyo gaadiidka. Ardayda u qalma kaalmadan waxaa lagu siiyaa baahidooda dhaqaale, ee ma aha dhibcahooda. Waxa jira saddex nooc oo ah kaalmada dowladda:

- Deeq—waa lacag aan lagaa rabin in aad dib u bixiso.
- Shaqo iyo Waxbarasho—waa lacag aad shaqaysatay intii aad iskuulka ku jirtey.
- Deyn—waa lacag aad amaahatay oo ribo saaran tahay lagaana rabo in aad dib u bixisid mar danbe.

Macluumaadka intaa ka badan oo ku saabsan barnaamijka kaalmada waxbarasho, wac 1-800-433-3243 ama booqo Waaxda Waxbarashada ee Waddanka Maraykanka oo shebekadoodu tahay http://studentaid.ed.gov/students/publications/student_guide/index.html. Sidoo kale waxaa diyaar ah macluumaad Afisbaanish ah.

KA TAXADIR KAALMADA MAALIYADEED OO BEENTA AMA FOORJARIGA AH



Ka taxadir ama ka fiirso markaad raadinaysid macluumaadka ku saabsan kaalmo maaliyadeedka. Iska ilaali waxyaabaha runta la moodo ama wax laguugu ballan qaado in lacag laguugu bedelayo. Sannad kasta, qoysas badan ayaa lacag badan oo gaadhaysa malaayiin kaga luntaa deeq waxbarasho oo been ah. Haddii aad tahay qof wax laga dhacay ama laga qaatay ama aad rabtid waxbixin bilaash ah wac 1-877-382-4357 ama 1-866-653-4261 (“Dadka dhegaha la”) dhiman yahay, ama booqo shebekada Qaybta Ganacsiga ee Dowladda oo ciwaankeedu yahay <http://www.ftc.gov/bcp/online/edcams/scholarship/index.shtml>.

Waxbarashada Dadka Waaweyn

Waxbarashadu ma aha in ay dhammaato markaad weynaatid. Waddanka Maraykanka, dadka waxaa lagu dhiiri geliyaa in ay noqdaan “dad weligood wax barta”. Haddii da’daadu tahay 16 ama ka weyn tahay oo aadan dhammeysan dugsiga sare, waxaad isku qori kartaa fasalada Waxbarashada Dadka Waaweyn (American Secondary Education [ASE]). Fasaladan waxaad ugu diyaar garoobeysaa in aad qaadatid shahaadada loo yaqaano (General Educational Development [GED] certificate).

Shahaadada GED waa shahaado u dhiganta tan dugsiga sare laga qaato. Shahaadadani waxay muujinaysaa in aad leedahay aqoon waxbarasho iyo xirfaddo u dhigma heerka waxbarasho ee dugsiga sare. Si aad u qaadato shahaadada waxaad u baahan tahay in aad qaadato oo najaxdid shan imtixaan oo kala duwan, imtixaanada waxaa ka mid ah: akhris, qoraal, barashada bulshada, saynis iyo xisaab. Looshaqeeyayaasha Waddanka Maraykanka intoodda badan waxay u maleeyaan haysashada GED-du in ay u dhiganto shahaadada dugsiga sare laga qaato. Meelo badan oo laga qaato fasalada u diyaar garoowga GED-ga waa bilaash ama waxaa lagu helaa qiime aad u jaban. Ka eeg buugga telefoonada qaybtiisa ay ku qoran tahay Waxbarashada Dadka Waaweyn (“Adult Education”) ama waxaad wacdaa xafiiska iskuulka degmadaada wixii ku saabsan macluumaadka intaa ka badan.

Dad badan oo waaweyn waxay qaataan fasalo ay ku bartaan maadooyin ay jecel yihiin ama kuwo ay ka bartaan xirfado cusub oo ka caawiya shaqooyinkooda. Iskuulada dadweynaha ama kuliyada beesha intoodda badan waxay bixiyyan fasalada lagu dhigto maadooyin fara-badan oo loogu talagalay dadka waaweyn. Qof kasta ayaa qaadan kara casharadan, kuwaas oo aan lacagtoodu qaali ahayn. Eeg liistada nidaamka iskuulada kugu dhow iyo kan kuliyada beesha iyo casharada ay bixiyaan, intay lacagtoodu tahay iyo sida laysu diiwaan geliyo.

Barashada afka Ingiriisida

Waxaa jira meelo badan oo aad ka baran kartid sida Af-Ingiriisida loogu hadlo, loo akhriyo, loo qoro. Caruur iyo Dad waaweyn oo badan ayaa Af-Ingiriisida (English as a Second Language [ESL]), u qaata luqad labaad ahaan. Cashardaasi waxay caawiyaan dad badan oo aan aqoon sida luqada Af-Ingiriisida loogu hadlo. Casharadan waxaa loo yaqaan dadka luqadaha kale ku hadla (English for Speakers of Other Languages [ESOL]) ama ka jaahil bixinta Af-ingiriisida (English Literary classes).

Caruurta aan luqada Af-Ingiriisida aqoon waxay ku baran doonaan iskuulka. Iskuulaadka dadweynaha ee Maraykanku waxaa laga bixiyaan sharraxaado lagu caawimo ardayda u baahan in ay Af-Ingiriisida bartaan. Ardayda u baahan caawimo dheeraad ah oo ku saabsan xagga luqada waxa loo yaqaan (Limited English Proficient [LEP] students).



Ardayda Af-Ingiriisida hadda bilaabay waxaa laga yaabaa in ay ku qaatan fasalka ESL-ka meelaha Af-Ingiriisida caadiga ah lagu dhigo. Ardayda Af-Ingiriisidoodu roon tahay waxaa laga yaabaa in la geeyo fasalada caadiga ah oo caawimo dheeraad ah la siiyo. Iskuulada qaarkood waxay bixiyaan barnaamijyo iyo barid dheeraad ah, saacada iskuulka ka dib oo loogu talagalay ardayda Af-Ingiriisida baranaysa. Iskuulka ilmahaaga ayaa kuu sheegi doona waxyaabaha ay ku caawimaan ardayda u baahan in bartaan Af-Ingiriisida.

Dadka waaweyn oo aan Af-Ingiriisida aqoon waxay qaadan karaan kalaasyada ESL-ka oo laga bixiyo iskuulada dadka waaweyn, barnaamijyada waxbarashada beesha ama kuwa gaarka ah oo lacagta laga bixiyo.

Barnaamijyada waxbarada dadka waaweyn waxaa inta badan laga bixiyaa rugta beelaha, iskuulka degmada iyo kuliyada beesha. Barnaamijyadan waxaa laga yaabaa in ay bixiyaan casharo ESL-ka barid dheeraad ah oo dad iskaa wax u qabso ama tabaruc ku shaqeeya sameeyaan. Barnaamijyadan intooda badan waa bilaash ama waxa laga yaabaa in aad bixisid lacag yar. Fasaldan waxaa la dhigtaa maalinta dhexdeeda ama saacadaha galabtii. Waxaad wacdaa kuliyada beesha ee kuugu dhow ama xafiiska iskuulka degmadaada si aad u ogaatid meelaha kuu dhow oo barnaamijyada ESL-ka laga bixiyo. Eeg boggaga buluuga ah ee buugga talefoonada oo ay ku qoran tahay “Iskuul-Dadweyne” (“Schools-Public”).

Magaalooyinka waaweyn intoodda badan waxay iskuulo u gaar ah Af-Ingiriisida oo laga bixiyo casharo la dhigto maalinta dhexdeeda ama saacadaha galabtii. Lacagta la bixiyo qiimaheedu wuxuu ku xidhan yahay inta xiisadood ama saacadood oo wax lagu sharraxayo. Fasalada luqada laga barto ee iskuulada gaarka ah way ka qaalisan yihiin kuwa dadweynaha. Si aad u heshid iskuulada gaarka ah oo Af-Ingiriisida laga barto waxad ka eegtaa boggaga buluuga buugga jaalaha ah ee telefoonada oo ay ku qoran tahay “Iskuullada Luqada” (“Language Schools”).

Ururada beesha, maktabadaha iyo xarumaha diinta waxay sidoo kale bixiyaan casharada ESL-ka oo bilaash ah ama qiime jaban ah. Waxaad ka eegtaa meelaha ay ka mid yihiin maktabadaha dadweynaha, ha’adaha adeegyada bulshada iyo meelaha lagu cibaadaysto. Warbixin ururiyaha maktabada ee kugu dhow ayaa kuu sheegi kara meelaha aad ka heli kartid buuggaga, cajaladah ama saxamada Cds-ga Af-Ingiriisida (ESL) iyo barnaamijka kombiyuutarka.

WAC 211 MARKAAD U BAAHAN TAHAY MACLUUMAADKA ADEEGYADA BULSHADA



Waad waci kartaa 211 gobolada intooda badan si lagaaga caawiyo adeegyada bulshada ee aad u baahan tahay. Wac 211 si aad u heshid meelaha xaafadaada ku yaal oo aad iska diiwaan gelin kartid luqada Af-Ingiriisida ESL. Sidoo kale waxaad waci kartaa 211 haddi aad u baahan tahay meelaha laga helo cuntada, guryaha iyo barnaamijyada iska daaweynta maandooriyaasha (drug treatment program) ama adeegyada kale ee bulshada.

Gobolada iyo waddamada qaarkood ma laha adeegyada 211. Haddii aad wacdid lambarkan oo laga jawaabi waayo, taasi waxay kuu sheegaysaa in aan adeega 211 weli laga bilaabin xafadaha aad ku nooshay.

Daryeelka Caruurta

Haddii aad shaqaysid oo caruurtaadu da'aada iskuulka ka yar yihiin, waxaa laga yaabaa in aad u baahan tahay in aad heshid qof ilmaha kuu haya intaad shaqada ku maqan tahay. Marmarka qaarkood caruurta iskuulka taga waxay u baahan yihiin qof ilaaliya markay iskuulka ka soo noqdaan haddi waalidkood aanu guriga joogin. Haddii adiga ama qof kale oo qoyskaaga ka tirsan caruurta ilaalin karin, waxaad u baahan tahay in aad heshid qof iyaga daryeela ama haya. Ha kaga tegin caruurta guriga keligood.

Helitaanka Daryeelka Ilmaha

Waa muhiim go'aan ka gaadhida doorashada qofka ilmahaaga haynaya. Intaad tashanaysid ka feker waxyaabaha ku saabsan tayada daryeelka iyo qiimaha xannaanada. Isku day in aad heshid qofka ilmaha kuu haynayaa in uu degan yahay meel gurigaaga ama shaqadaada u dhow.

Waxaa jira meelo badan ah oo aad weydiin kartid meelaha fiican oo laga helo karo adeegaha daryeelka ilmaha. Weydii waalidiinta kale, saaxiibadaa ama dadka kula shaqeeya oo caruurtaada danaynaya. Gobolada qaarkood waxay leeyihiin isu dirka hay'adaha ("referral agency") daryeelka ilmaha oo ku siin kara liiska barnaamijyada rugta daryeelka ilmaha oo gobolka ruqsad ka haysta. Ruqsad qaadashada daryeelka ilmaha waxaa lagu xidhaa in ay oofiyaan shuruudaha looga baahan yahay oo lagu ilaalinayo ilmaahaga. Waxaad sidoo kale waci kartaa xafiiska iskuulka degmadaada si aad u ogaatid meelaha kale ee caruurta xaafadaada lagu hayo.



- **TALO:** Haddii aad u baahan tahay in aad heshid daryeelka ilmaha ee fiican oo ku yaal nawaaxiga aad degan tahay, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka ee Waddanka Maraykanka ayaa waxay leedahay Xarunta Qaranka ee Daryeelka Ilmaha. Wac lambarkan 1-800-616-2242 haddaad u baahan yahay warbixin. Sidoo kale waxaad ka heli kartaa wixii macluumaad ah iyo ka jawaabista su'aalaha ku saabsan doorashada barnaamijka daryeelka ilmahaaga shebekada internetka <http://www.childcareaware.org>.

NOOCYADA DARYEELKA ILMAHA



Waxaad haysataa dhawr fursadood oo aad ku kala dooratid markaad rabtid qof kuu haya ilmaha.

Guri-ku Haynta. Qof baa guriga kuugu imanaya oo ilmaha kuu haynaya ama kuu ilaalinaya. Adeega noocan ahi wuxuu noqon karaa qaali, maxaa yeelay ilmahaagu wuxuu helayaa daryeel dheeraad oo shakhsiyan ah. Tayada xannaanadu waxay ku xidhan tahay qofka aad shaqaalaysid.



Daryeelka Ilmaha ee Qoyska. Ilmahaagu iyo caruur kale waxaa lagu xannaanaynayaa ama lagu haynayaa qof kale gurigiisa. Daryeelka noocan ahi wuu ka jaban yahay kuwa kale. Tayada xannaanadu waxay ku xidhan tahay dadka kuu ilaalinaya ilmahaaga iyo inta caruur kale oo ay gurigooda ku xannaanaynayaa.

Xarumaha Daryeelka. Xarunta Daryeelku waa barnaamijyo ku yaal iskuulaadka, kaniisadaha ama xarumaha ururada diinta iyo meelo kale. Xarunta badanaa waxaa ka shaqeeya dhawr qof oo ilaaliya koox caruur ah. Xaruntu waa inay oofiso qawaaniinta gobolka, waana caadi in shaqaalahoodu leeyahay tababar gaar ah iyo waayo'araganimu.

Barnaamijka Xannaanda Biloowga. Dowladda Sare waxay bixisaa maaliyad ay ugu talagashay qoysaska saboolka ah (Xannaanda Biloowga hore ama Xannaanda Biloowga “Early Head Start” iyo “Head Start”) Barnaamijyadan waxay bixiyaan adeegyada xannaanada iyo waxbarashada ee caruurta si ay ugu diyaar garoobaan iskuulka. Si aad u ogaatid waxyaabaha ku saabsan barnaamijyadan, wac Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka ee Waddanka Maraykanka oo lambarkoodu yahay 1-866-763-6481 ama booqo shebekada internetka <http://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/hslc>.

Daryeelka ilmaha bixiyaan qaarkood waxay hayn doonaan caruurta maalin dhan ama qayb ka mid ah maalinta, waxay ku xidhan tahay baahida waalidka. Sidoo kale waxay ku xidhan tahya qiimaha lacagta ee ilmaha lagu haynayo. Eeg haddii aad u qalantid kaalmada dowladda sare ama gobolka ee daryeelka ilmaha. Gobolo badan ayaa bixiya kaalmo maaliyadeed oo loogu talagalay waalidiinta dhaqaalahoodu yar yahay oo shaqeeya ama tababar shaqo ku jira ama barnaamij waxbarasho.

→ **TALO:** Hubi bixiyaha daryeelka ilmaha iyo barnaamijka aad isticmaalaysid in uu ruqsad ama sharci leeyahay. Ruqsad-haysashada (“Licensed”) micneheedu waa in barnaamijku ku najaxo badbaadada ugu yar ama qawaaniinta xannaanada ee gobolku dejiyey. “Accredited” micneedu waa in barnaamijku la yimaado qawaaniin heerkoodu ka sarreeyo kuwa laaysanka ama sharciga haysta.

Sidee ku Ogaan Karta in Bixiyaha Daryeelka Ilmaha uu fiican yahay?

Ka feker sa’alahan aasaasiga ah oo ku saabsan markaad booqatid barnaamijyada daryeel ilmaha.

- Caruurta ma faraxsanaayeen markay shaqaalaha la joogeen?
- Ma la hayaa alaabta caruurta ku ciyaarto oo ku haboon da’dooda?
- Caruurta ma sameynayeen dhaqdhaqayo haboon?
- Xannaaneeyuhu ma la hadlay ilmahaaga intii aad meesha joogtey?
- Meesha nadiif ma tahay mase habeysan tahay?
- Ma jira manhaj ama jadwal carruurta leedahay?

Hubi inaad weydiisid waxay yihiin si aad ugala hadashid waalidiinta kale waxyaabaha ku saabsan barnaamijka.



Xaalada Degdegga ah iyo Amaanka

Xaalada degdegga ahi waa dhacdoonyin si lama-filaan ah isaga dhaca taas oo khatar ku keeni karta dadka iyo hantidaba. Waana wax qof kasta ku dhici kara waqti kasta. Hore ugu sii talagal sidii adiga iyo qoyskaagu u badbaadi lahaydeen. Qaybtani waxay kuu sheegi sida aad ugu diyaar ahaan lahayd xaalada degdegga ah isla markaana aad u heli lahayd gargaar goorta ay dhacaan.

Gargaarka Degdegga ah: Wac 911

Waddanka Maraykanka, lambarka 911 waxaad wacan kartaa taleefan walba si aad u heshid gargaar degdeg ah. Wac lambarka 911 si aad:

- U sheegto marka dab dhaco.
- U sheegto falal denbi oo markaa socda.
- U yeedho ama wacdo baabuurka badbaadada (“ambulance”) haddii aad u baahan tahay gargaar caafimaad.
- U soo sheeg haddii aad ka shakidid dhaqdhaqaaqyo falal dambi ah, sida qaylo, qaylo caawimaad rabta iyo rasaas dhacaysa.

Maxaa dhacaya markaad wacdo lambarka 911?

- Marka lambarka 911 la waco waxaa badanaaba lagaga jawaabaa labo-iyo-toban (12) ilbidhiqsi. Waxaa laga yaabaa in hagad lagu geliyo. Ha dhigin talafoonkaaga! Marka qof obereytarka ah jawaabo, talefoonku wuu aamusi doonaa ilaa dhawr ilbidhiqsi. Ha dhigin talefoonkaaga. Sug inta obereytarku kula hadlayo.
- Haddii aadan Af-ingiriisida ku hadlin u sheeg qofka kula hadlaya luqadaad ku hadashid. Isla markaba waa in lagugu yeedho turjumaan.
- Qofka 911 ka jawaabay ayaa ku weydiin doona su’aalo ku saabsan sidii wax u dhaceen iyo meesha xaalada degdegga ah ka dhacday. Si degan uga jawaab su’aalaha lagu weydiyo. Isku day inaad talefoonka ku jirtid ilaa qofka 911 kaala hadlaya uga jawaabtid su’aalihiisa oo dhan ku weydiyo.



Marka aan la wici Karin 911

Waxaad 911 wici kartaa oo qudha marka wax khatar ah dhacaan ama naftaadu halis ku jirto. Haddii 911 aad u wacdid arrimo khaldan waxaa laga yaabaa inaad ka xanibtid qof kale oo gargaar degdeg ah u baahan. Ha wicin 911 si aad u:

- Weydiiso meesha aad u soctid.
- Weydiiso macluudaadka ku saabsan adeegyada dadweynaha.
- Ogaatid haddii qof xabsi ku jiro.
- U soo sheegtid xaaladaha aan degdegga ahayn.
- Weydiiso macluudaadka la xidhiidha ururinta xayawaanka.
- Kala hadashid sarkaal booliska ah arrimaha ku saabsan xaalada aan degdegga ahayn.

Haddii aad rabtid inaad booliska su’aalo weydiisid, wac lambarka waaxda booliska ee aan ahayn xaalada degdegga ah oo ku liisgaraysan buugga talefoonada oo buluugga ah.

MEEL MARINTA SHARCIYADA EE WADDANKA MARAYKANKA



Waddanka Maraykanka waxaa jira dowladda sare, gobolka iyo hay'adaha hawlgelin sharciga ee ilaaliya amniga dadweynaha. Xaafadahiina ama beeshiina, waxaa jira saraakiisha hawlgelinta sharciga oo ah booliska iyo sheriff-ka. Raadso talefoon lambarka saldhiga booliska ee kuugu dhow, waxaadna dhigataa meel talefoonkaaga agtiisa ah. Xusuusnoow in saraakiisha boolisku u joogaan in adiga iyo qooyaskaaga ka badbaadiyaan wixii halis ah. Ha ka biqin in aad soo sheegto fal denbi, gaar ahaan haddii aad tahay dhibane. Denbiilayaasha qaarkood way ka faa'iideystaan dadka soogaleetiga waayo waxay u malaynayaan in aadan denbigaas booliska u sheegayn. Haddii boolisku ku joojiyo:

- Ha ka biqin. Anshax fiican lahaw oo la kaalmeey.
- U sheeg sarkaalka booliska ah haddii aadan Af-Ingiriisi ku hadlin.
- Haddii aad baabuur gudahiisa ku jirtid, ha ka degin baabuurka ilaa sarkaalka booliska ah kuu sheego.
- Saar gacmahaaga meel boolisku ka arki karo. Ha tiigsan jeebabka ama meelaha kale ee baabuurka.

Ku Ilaalinta Gurigaagga iyo Qoyskaagga Amaan

Ka sii diyaar garoow intaan xaalad degdeg ahi dhicin. Waa kuwan waxyaabaha aad sameyn kartid si aad u badbaadid:

- Hubi in albaabadaadu si fiican u xidhmayaan waana inay waqti kasta xidhnaadaan. Ha siin fureyaashaada qof aadan aqoon. Ka taxadir albaab ka furista dad aadan aqoon. Weydii waxay yihiin iyo waxay rabaan ka hor intaadan albaabka furin.
- Qalabka qiiqa ka diga wuxuu sameeya dhawaaq dheer marka gurigu qiiq ama qaac leeyahay. Waa inaad hubiso in qalabka qiiqa ka diga ku xidhan yahay qolalka agtooda iyo meelaha kale oo gurigaaga ka mid ah. Bedel batteriga qalabka qiiqa ka diga sannadkiiba laba mar. Waa inaad qalabka qiiqa ka diga tijaabisaa bil walba si aad u habsato in uu shaqaynayo iyo in kale.
- Waxaad isku daydaa inaad ogaatid meesha kuugu dhow ee cisbitaal, booliska iyo dab damisku ku yaalaan. Meel talefoonkaaga u dhow dhigo lambarada muhiimka ah (rugta booliska, waaxda dab-damiska iyo dhakhtarka), si aadan meel dheer uga raadin.
- Hel meesha ay gurigaaga kaga yaaliin dhuumaha gaaska, korontada iyo biyaha. Hubi in aad taqaanid sida gacanta caadiga ah loogu damiyo waxyaabahaas.
- U diyaargarayso waxyaabaha lagaga gaashaanto masiibada dabeeciga ah, oo ay ka mid yihiin toosh, raadiyo gacanta lagu qaadan karo, baatariyo dheeraad ah, buste, alaabta gargaarka caafimaadka, cunada qasacadaha, qardaaso cunto ah iyo caagado biyo ah oo kugu filaada ilaa saddex casho. Sidoo kale waxaad qaadataa bacaha qashinka, xaashiya musqusha ama suuliga loo isticmaalo iyo cuntada xayawaanka la rabaysto haddii aad u baahan tahay. Waxyaabahan oo dhan dhig hal meel oo aad si sahlan u heli kartid.



- Is tababara adiga iyo reerkaaga sida guriga looga baxo marka dab dhaco ama arrin kale oo degdeg ah timaado. Hubi in ay caruurtaadu yaqaaniin sida qalabka qiiqa ka diga u qayliyo iyo waxay sameyn lahaayeen haddii ay maqlaan. Ku tashada meel aad ku kulantaan adiga iyo reerkaagu haddii aad guriga ka baxdaan idinkoon is ogeyn. Meel ka calaamadsada guriga bannaankiisa ama xaafada, haddii ay dhacdo in aydaan guriga ku soo noqon karin. Weydii saaxiib ama qaraabe meel kale ku nool in uu yahay qofka ugu muhiimsan oo qoyskaagu soo wacayo haddii xaalad degdeg ah ku kala qaybsantaan. Hubi in qof kasta ogyahay in uu waco qofkan iyo in uu talefoon lambarkiisa ama lambarkeeda haysto.
- Weydii iskuulka caruurtaada qorshaaha ku saabsan xaalada degdegga ah. Hubi in ay caruurtaadu ogyihiin wixii ay sameyn lahaayeen. Weydii ilmahaaga meesha aad kula kulmaysid marka xaalada degdegga ah dhacdo.

WAXAAD SAMEYN KARTID



Si aad xaafadaada amnigeeda u caawisid, baro derisgaaga. Kala hadal waxyaabaha ku saabsan sida loo xalilo xaalada degdegga ah ee xaafadaada. Haddii aad leedahay deris naafo ah, eeg haddii ay u baahan yihiin caawimo.

Xaafado badan waxay leeyihiin iska llaalinta Xaafada. Gaadh haynta ama llaalinta Xaafada waa koox dad ah oo xaafada degan. Way is kala bedelaan habeenkii oo ku soo wareegaan xaafada si ay dhaqdhaqaaqa denbiyadu u yaraadaan. Haddii ay leedahay Gaadh haynta Xaafada meeshaad degan tahay, waad ku tabaruci kartaa ka qayb qaadashada. Haddii aad rabtid in aad bilowdid Gaadh haynta ama llaalinta Xaafada, wac waaxda booliska kuugu dhow wixii caawimo ah. Si aad u heshid war dheeraad ah, booqo <http://www.usaonwatch.org>.

Markaad dad kale ku gargaartid badbaadadooda, waxaad caawimaysaa beeshaadaa iyo dalkaaga. Si aad uga qayb qaadatid arrimaha bulshada la xidhiidh Guddiga Kooxaha Shicibka. Si aad u heshid war dheeraad ah, booqo <http://www.citizenorgs.gov>.

Gargaarka Kowaad ee Caafimaadka

Baro siyaabaha loo caawimo xaaladaha degdegga ah qaarkood, sida marka qof dhiig baxayo ama mergado. Kan waxa la yiraahdaa “gargaarka kowaad ee caafimaadka” (“first aid”). Waxaad qaadan kartaa casharada tababarka gargaarka kowaad ee caafimaadka oo ay bixiyaan hay’ada Laanqayrta Cas ee kuugu dhow. Wac xafiiska Laanqayrta Cas ama Guddiga Amniga Qaran si aad u weydiisid meelaha laga helo cashardaas. Macluumaadka intaa ka badan booqo <http://www.redcross.org> ama <http://www.nsc.org/train/ec>.

Dhigo gargaarka kowaad ee caafimaadka guriga, shaqada iyo baabuurka gudiihiisa. Gargaarka kowaad ee caafimaadka waxaa ku jira waxyaabo aad u isticmaali kartid dhaawaca ama xanuun, sida sharooto, istaraashooyin waxyaabaha jeermiska ah laysakaga nadiifiyo, daawooyin xanuun baabiska, bac baraf ah iyo goloofis ama gacmo gashi. Waxaad ka iibsanaa kartaa gargaarka kowaad oo fiican farmashiyaha xaafada.

Kontroolka Sunta

Alaabooyin badan oo gurigaaga yaala ayaa lagu sumoobi karaa haddii la cabo ama la liqo. Waxyaabaha waxaa ka mid ah alaabta wax lagu nadiifiyo, daawooyin, renjiga, aalkoloda, waxyaabaha laysku qurxiyo iyo xataa dhirta qaarkeed. Ka foguee ama meel dheer ka saar waxyaabaha ilmahaagu ku sumoobi karo.

Haddii qof liqo waxyaabaha lagu sumoobo, si degdeg ah ka wac Xarunta Kontroolka Sunta 1-800-222-1222. Waxaad heli kartaa gargaar 24 saacadoodba, todobada cashoba ah. Waa in aad haysid waxa sunta ah, markaad wacdid meesha sunta qaabilsan. U sheeg qofka talefoonka ka jawaaba waxa dhacay. Haddii aadan

Af-ingiriisi ku hadlin u sheeg qofka si aad u heshid turjumaan ku caawin kara. Taleefonada soo gaadha Xarunta Kontroolka Sunta waa qarsoodi waana bilaash.


Habka la Talinta Nabadsugidda Dalka ee la Xiriira Weerarka Argagixiso

Waaxda Nabadsugida ee Dalka Maraykanka (Department of Homeland Security [DHS]) waxay leedahay habka caawimaya in dadku fahmaan khatarta ka iman karta falalka argagixiso. Habkaas waxaa loo isticmaalaa midabo kala duwan oo ku tusaya khatarta heerarkeeda kala duwan. Waxayna yihiin:

- **Guduud.** Xaalad khatar ah. Waxaa jira weerar argagixiso oo aad u halis ah. Fal argagixiso oo dhacay ama dhici doona.
- **Huruud.** Xaalad kacsan. Waxaa jira hujuun argagixiso oo aad khatarteedu u sarreyso. Ma jirto meel gaar ah oo la garanayo in wax ka dhici doonaan.
- **Jaale.** Xaalad kor loo qaaday. Waxaa jira fal argagixiso oo aad khatarteedu u sarreyso. Ma jirto meel gaar ah oo la garanayo in wax ka dhici doonaan.
- **Buluug.** Xaalad degan. Waxaa jira hujuun ama weerar argagixiso caadi ah. Ma jirto hadaf ama meel gaar ah oo la garanayo in wax ka dhici doonaan.
- **Cagaar.** Xaalad aad u hooseysa. Waxaa jira weerar argagixiso hooseeya.

Haddii Weerar Argagixiso Dhaco

Dowladda Maraykanka ayaa isticmaali karta Habka Digniinta Xaalada Degdegga ah (Emergency Alert System [EAS]) si ay ugu sheegaan waddanka macluumaad ku saabsan xaalada degdegga ah. Madaxweynaha Maraykanka ayaa isticmaali kara habkan si uu ugu sheego macluumaad degdegga ah dadweynaha marka xaalada degdegga ah dhacdo. Sidoo kale gobolka iyo dowladda hoose ayaa iyaguna isticmaali kara Habka Digniinta Xaalada Degdegga ah si ay ugu sheegaan dadweynaha macluumaad xaalada degdegga ah ee ka jirta nawaaxigooda. Haddii xaalad degdegga ah dhacdo, ka dhegeyso idaacada ama telefshinka wixii warbixin ah oo ku saabsan sida adiga iyo qoyskaagu isu badbaadin lahaydeen.




- ➔ **TALO:** Haddii hujuun argagixiso dhacdo, dhegeyso waxa xukuumadda dowladdu kuu sheegto in aad sameysid. Ka dhegeyso idaacada ama telefshinka wixii sharraxaad ah. Guriga dhigo raadiyo ama telefshinka ku shaqaynaya baytari lalacaa haddii korontadu si ku milady ah u tagto.

Ha Cabsan, Diyaargarooow


Waaxda Nabadsugida ee Dalka Maraykanka waxay caawimaysaa Ameerikanku in ay bartaan khatarta laga yaabo inay ku timaado, si ay ugu diyaar garoobaan haddii ay dhacdo weerar argagixiso ama masiibo dabeeci ah. DHS-tu waxay bixisaa warbixno kaa caawimaya sidii aad uga badbaadin lahayd qoyskaaga, gurigaaga iyo xaafada beeshaada waxyaabaha khatarta ah, falal denbi, argagixiso iyo masiibooyin kale oo iska dhaca. Wac 1-800-BE-READY si aad u heshid macluumaad daabacsan ama booqo shebekada internetka <http://www.ready.gov>.

Waxaad heli kartaa hagaha shicibka oo ah, *Are You Ready? An In-Depth Guide to Citizen Preparedness* (Diyaar ma tahay? Waa Hage aad uqoto Dheer oo ka Hadlaya Diyaargaraynta Shicibka), waxaana ka helaysaa sharraxaada ku saabsan sidii aad reerkaaga, gurigaaga iyo bulshadaada u badbaadin lahayd. Hagahan waxaad ka heli kartaa Hay'ada Maamulka Xaalada Degdegga ah ee Dowladda Sare (FEMA) ama <http://www.fema.gov/areyouready>, ama wac 1-800-480-2520. Sidoo kale waxaa waxyaabo kuwaas oo kale ah ka helaysaa internetka Midowga Shicibka (Citizen Corps) http://www.citizencorps.gov/ready/cc_pubs.shtm.

MAXAAD SAMEYN KARTAA



Madaxda dowladda sare iyo tan gobolkuba waxay weydiisayaan dhammaan dadka ku nool Waddanka Maraykanka in ay ka caawiyaan la dagaalanka argaggixisada. Iska eeg hareeraha, gaar ahaan markaad raacaysid basaska dadweynaha, tareenada iyo diyaaradaha. Haddii aad aragtid shay shaki leh oo laga tegey, sida shendada gacanta, ama kolay xashi ka sameysan, si degdeg ah ugu soo sheeg booliska ama xukuumada kale. Ha isku deyin in aad furto ama shayga meesha ka qaado!



Barashada Wadanka Maraykanka ku Saabsan

Waddanka Maraykanku waa dimuqraadi, oo waddaniyiinta halkani door weyn bay ka ciyaaraan xilka maamulka dowladda. Qaybtan waxaad ku baran doontaa waxyaabaha ku saabsan sida waddaniyiintu uga soo qaybqaataan qaabka dhismaha dowladda, siduu ku bilaabmay Waddanka Maraykanku ama horumarinta iyo sida dowladeenu u shaqayso.

Annakoo Dadweynaha Ah: Doorka Shicib kasta oo Maraykan ah

Waddanka Maraykanka, awooda dowladu wax ku maamusho waxay ka heshaa shicibka ama dadka. Waxanu leenahay dowlad dadka ah, dadka ka timi oo dada u shaqaysa. Shicibka Maraykanku iyagaa siyaasada dowladooda wax ka bedela, sidaa daraadeed waa in ay bartaan waxayaabaha ku saabsan arrimaha dadweynaha oo muhiimka ah iyo ka qayb qaadashada beelahooda. Shicibku iyagaa u codeeya doorasho xor ah oo ay ku doortaan madaxda dowladda, sida madaxweynhaha, madaxweyne-kuxigeenka, xildhibaanada iyo wakiilada. Shicibka oo dhan waxay wici karaan madaxda la doortay si ay u dhiibtan ra'yigooda ama u weydiiyaan macluudaadka, ama laga caawiyo arrimo gaar ah.

Dowladeenu waxay ku dhisan tahay dhawr dhaqan oo muhiim ah: xoriyad, fursad, sinaan iyo cadaalad. Ameerikaanku waxay wadaagaan dhaqamo, oo dhaqamadan ayaa ina wada siiya taariikh bulshadeed iyo aqoonta wadanka aanu wadaagno.

Dowladda Maraykanku way difaacdaa qof kasta xuquudiisa. Waddanka Maraykanku wuxuu ka abuurmay dad meelo kala duwan ka soo jeeda, dhaqamo iyo diin kala jaad ah. Dowladayada iyo sharcigayagu waa agaasiman yahay si shicibkayaga kala duwan oo aaminsanaan kala duwan haysta dhammaan xuquuq isku mid ah u helaan. Qofna laguma ciqaabi karo ama waxyeelayn karo ra'yi ama aaminsanaan ka duwan kan dadka kale badidiisa.

KA MID AH, KA KOOBAN, LOOGU TALA-GALAY SHICIBKA: WAA MAXAY DIMUQRAADIYADDU?



Kelmeda “democracy” micneheedu waa “dawladda ka kooban dadka”. Waddamada kala duwan dimuqraadiyadoodu waxay yeelan kartaa qaab kala duwan. Waddanka Maraykanka, waxaanu haysanaa wax loogu yeedho “representative democracy” oo micneheedu yahay dadka yaa soo doorta madaxdooda wakiilada ugu ah dowladda.

Siduu Waddanka Maraykanku ku Bilaabmay

Muhaajiriintii ugu horeeyey oo Waddanka Maraykanka degey waxay waddamadey u dhasheen uga soo carareen cadaalad darro, gaar ahaan xagga diinta. Waxay raadinayeen xoriyad iyo fursado nolol cusub ah. Maanta, dad badan ayaa Waddanka Maraykanka u yimaada sababahaas oo kale.

Ka hor intaanu ka go'in ama noqon qaran madaxbanaan, Waddanka Maraykanku wuxuu u kala qaybsanaa 13 deegaan oo Ingiriisku dusha ka xukumo. Dadku waxay u kala deganaayeen deegaano aan ka hadli karin sharciyada iyo sida dowladu ayaga u maamushu. Gaar ahaan way ka soo horjeedeen “canshuur bixinta aaney lahayn xildhibaanada iyo wakiilada”. Tan waxa weeye in dadweynuhu cashuur bixiyaan, laakiin aaney ka hadli karin xagga maamulka dowladooda.


Sannadkii 1776, dad badani waxay dareemeen in cadaalad darro jirto oo iyagu iskood isu maamulaan. Wakiilada degaanada ka soo jeedda ayaa soo saaray waraaqihii Baaqa Madaxbanaadida (Declaration of Independence). Waraaqahan muhiimka ah ayaa caddaynaya in degaanadu xornimo iyo madaxbanaani ku dhawaaqeen oo aanay xidhiidh danbe la lahayn Waddanka Ingiriiska. Thomas Jefferson ayaa qoray waraaqihii Baaqi Madaxbanaadida. Isagu markii danbe wuxuu noqoday Madaxweynhii saddexaad ee Waddanka Maraykanka.

MAXAAD SAMEYN KARTAA



Deganaade rasmiya ahaan, waxaad leedahay xuquuqo iyo xoriyado badan. Si aad u gudid, waxaa ku saaran masuuliyad. Mas'uuliyada muhiimka ah oo ugu horeysa waxa weeye in aad beeshaada dhexgasho ama wax la qabatid. Sidoo kale waa in aad baratid waxyaabaha ku saabsan nolasha Ameerikaanka, taariikhda iyo maamulka dowladda. Waxaad sidan ku baran kartaa markaad qaadatid casharada waxbarashada dadka-waaweyn iyo akhrinta wargeyska.

WADDANKA MARYKANKA IYO AASAASKII SADDEX-IYO-TOBANKII DEGAAN EE UGU HOREEYAY



Saddex-iyto-bankii degaan oo la helay waxay ahaayeen sidan soo socota ama meelihii markii ugu horeysey la degey:

Virginia, Massachusetts, Maryland, Connecticut, Rhode Island, Delaware, New Hampshire, North Carolina, South Carolina, New Jersey, New York, Pennsylvania, iyo Georgia.

Baaqii Madaxbanaanida waxaa la ansixiyey taariikhdu markay ahayd Juulaay 4, 1776. Sidaa darted ayey Ameerikaanku ugu dabaaldegaan 4-ta bisha Juulaayo sannad kasta oo ah Maalintii Madaxbanaadida. Waa dhalashadii qarankeena.

Waddanka Maraykanku wuxuu soo maray dagaal ay kaga xoroobeen Waddanka Ingiriiska kaas oo ahaa Dagaalkii Kacdoonka. Janankii George Washington ayaa abbaanduule u ahaa ciidamadii Kacdoonka Ameerikaanka. Isaga waxaa loo yaqaanaa “Aabihii Waddankeena”. Markii danbena wuxuu noqday Madaxweynihii ugu horeeyey Waddanka Maraykanka.

Ka dib markii deegaanada dagaalkii ku guuleysteen waxay noqdeen gobolo. Gobol kasta wuxuu leeyahay maamul dowladeed oo u gooni ah. Dadka goboladan ayaa rabey in la abuurro qaab cusub ee dowladeed si ay u midoobaan goboladu oo u noqdaan hal wadan. Maanta, dowladan dhexe iyo dowladda qarankeena waxaa la isku yiraahdaa dowladda fedaraaliga ah. Hadda Waddanka Maraykanku wuxuu ka koobban yahay 50 gobol, Degmada Colombia oo ah meel gaar ah oo dowladda fedaraaliga ah degan tahay iyo waddamada hoos yimaada ama Maraykanku xukumo oo ay ka mid yihiin waddanka Guam, American Samoa, U.S. Virgin Islands, barwaqosooryada Northern Mariana Islands iyo Puerto Rico.

“NIMANKA OO DHAN WAA SIMAN YIHIIN”



Ameerikanka intooda badan dushay ayey ka xafidsan yihiin ereyadan ku qoran Baaqi Madaxbaannida.

“Waxanu u haysanaa tan in ay tahay runta xaqiiqdeeda, taas oo ah in ay nimanka oo dhan siman yihiin, taas oo Khalqahoodu siiyey xuquuq u gaar ah, oo ay ka mid yihiin Jirtaan, Xoriyad iyo farxad raadin.”

Tan micneheedu waxa weeye in dadka oo dhan ku dhasheen xuquuqo isku mid ah. Dowladu ma abuurto xuquuqdan, mana kaa qaadi karto xuquuqan.

Sameynta “Midnimo fiican”

Dhawr sanno ka dib Kacdoonkii Ameerikaanka, goboladu waxay isku dayeen siyaabo kala duwan si ay u midoobaan oo dowlad dhexe u sameystaan, laakiin dowladan waxay ahayd mid awoodeedu jilicsan tahay. Sidaa awgeed waxaa bilaabmay kulankii wakiilada gobol kasta oo isugu yimi magaalada Philadelphia ee ku taal gobolka Pennsylvania taariikhdu markay ahayd 1787 si ay u sameeyaan dowlad dhexe oo awood leh. Kulankani wuxuu ahaa Shirkii Dastuurka. Markii doodo badan la is dhaafsaday ka dib, ayaa hogaamiyeyaashii goboladu isku raaceen in ay sameeyaan qoraal ama dukumentii sharraxaya qaabka dowladan cusub. Qoraalkan ama Dukumentigan waa Dastuurka Waddanka Maraykanka, waana mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan taariikhda Ameerika. Dastuurku wuxuu sharraxaya sida dowladan cusub loo agaassimayo, sida madaxda dowladda loo dooranayo iyo xuquuqaha dowladan dhexe ee cusub ugu ballan qaadayso shicibkeeda.

“BILICDII HORE”— EE CALANKA WADDANKA MARAYKANKA



Calanka Waddanka Maraykanku wuu badalmay inta taariikhdeena Jirtay. Hadda wuxuu leeyahay 13 daliigood oo metelaya ama u taagan 13 degaan ee Ameerika ugu horeeyey. Wuxuu leeyahay 50 xiddigood oo midiiba gobol u taagan tahay. Heesta qaranka ee Ameerikanka waxaa loo tiriyey calanka, waxaana la yiraahdaa “The Star-Spangled Banner” (“Calanka Xiddigaha Dhalaaya leh”). Sidoo kale waxaa calanka loogu yeedhaa “Stars and Stripes” (“Xiddigo iyo Daliigo”) ama Heesta Ameerikanku ugu jecelyihiin waxaa la yiraahdaa “Stars and Stripes Forever” (“Xiddigo iyo Daliigo Weligood Jira”).

Shirkii xubnaha Dastuurku waxay ansixiyeen Dastuurku markay taariikhdu ahayd bishii Sibtambar 17, 1787. Tan ku xigta, waa in 13 gobol ansixiyaan Dastuurka. Dadka qaarkood waxay dareemeen in aan Dastuurku sameyn difaac ku filan ilaalinta xuquuqaha shakhsiyada. Goboladu way ku raaceen in ay ansixinayaan Dastuurka haddii lagu daro liiska xuquuqaha shakhsiyada. Goboladu way ansixiyeen Dastuurka markay taariikhdu ahayd 1789. Liiskan xuquuqaha shakhsiyada, waxaa loogu yeedhaa Sharciyada Xuquuqaha waxaana Dastuurka lagu daray markay taariikhdu ahayd 1791. Qaynuunka bedelista Dastuurka waxaa la yiraahdaa “qaynuunka bedelaada”. 10 ka ugu horeeya Dastuurka waxaa loogu yeedhaa Sharciyada Xuquuqaha.

Waddanka Maraykanku waa umad sharci lagu maamulo. Madaxda dowladda ayaa ka taliya iyagoo raacaya sharciga waddanka u yaal. Dastuurka waxaa loo yaqaanaa “sharciga ugu sarreeya dhulkan” maxaa yeelay

qof kasta, marka lagu daro dhamman madaxda dowladda iyo sharci kasta oo la sameeyo waa in ay raacaan mabaadii'da Dastuurka. Sharciga waa loo wada siman yahay qof kastana waa lagu qaadi karaa. Dowladda sare awoodeedu waa wax xaddeysan. Dowladda sare awood buuxda u ma laha Dastuurka ay goboladu haystaan.

“ANNAKOO DADWEYNAHA AH”



“Annakoo Dadweynaha ah” waa saddexda erey ee ugu horeeya Dastuurka Waddanka Maraykanka. Dastuurka bilawgiisu wuxuu sharraxayaa sababta loo qoray iyo ujeeddada laga leeyahay. Qaybtan waxaa loogu yeedhaa “hordhaca.” Waa kan hordhaca Dastuurku:

“Annakoo Dadweynaha ah Waddanka Maraykanka, si loo dhiso Midnimo fiican, Caddaaladna jirto, la hubiyo amniga gudaha waddanka, la sameeyo difaac guud, la taageero arrimaha guud ee bulshada, in la sugo ilaalinta xoriyadeena iyo tan caruurteena, waa in la sameeyo ansixinta iyo hergelinta Dastuurka Waddanka Maraykanka”.


Sharciyada Xuquuqaha: 10ka Bedel ee ugu Horeeya

Bedelada ugu horeysey oo Dastuurka lagu sameeyey waxay ahaayeen xaqdhawrida shicibka iyo xaddeynta awooda dowladda. Liiska codka xuquuqahu waa xoriyada muhiimka ah oo loogu ballan qaaday dadka Ameerikaanka ah. Tusaale ahaan, xuquuqahani waxay xad u yeeleen waxyaabaha dowladu ku sameyn karto shakhsi kasta. Xuquuqahan waxaa ka mid ah:

- Xoriyada hadalka. Dowladu uma sheegi karto dadku waxay oranayaan ama waxaaney oranaynba. Dadku waxay oran karaan wixii ay rabaan oo ku saabsan arrimaha dadweynaha iyagoo aan cabsi ka qabin in la ciqaabo.
- Xoriyada diinta. Dowladu dadka uma sheegi karto dadku meeshay ku cibaadeysanayaan. Dadku iyagaa siday rabaan u dooran kara cibaadeysiga ama cibaadeysi la'aanta.
- Xoriyada saxaafada. Dowladu ma go'aamin karto waxa wargeyska lagu daabaco ama wax idaacada ama talefisyoonka laga dhegaysto.
- Xoriyada kulanka ama “isu imaatinka” (“assemble”) meelaha dadweynaha. Dowladu kama joojin karto dadku in ay qabsadaan shirweyne ay isugu yimaadaan oo danahooda kaga hadlaan.
- Xoriyada haysashada hubka. Inta badan, dowladu kama horjoogsan karto dadku in ay lahaadaan buntukh ama hub.
- Xoriyada ku baannaanbixida waxyaabaha dowladu sameyso iyo codsashada in wax laga bedelo. Dowladu ma aamusin karto ama ciqaabi karto dadka ka soo horjeedda waxyaabaha dowladu sameynaso oo aanay ku raacsanayn.

Sidoo kale Sharciyada Xuquuqaha wuxuu ballan qaadayaa wax la yiraahdo “due process.” Due process waa qaybo sharciga saxda ah oo la raacayo marka qof denbi lagu soo eedeeyo. Saraakiisha booliska iyo askartu sabab la'aan qofka uma joojin karaan mana baadhi karaan, dadka guryahoodana ma baadhi karaan haddi aanay haysan amar maxakamadeed. Qofka denbi lagu soo eedeeyo waxaa hubaal ah in loo qabanayo maxkamad degdeg ah, oo leh xeerbeeg laga soo xulay dad isaga la mid ah. Waxaa ballan ah in qofkaas loo qabto qareen iyo in uu u yeedhto markhaantiyo isaga u hadla. Sidoo kale arxandarro iyo ciqaab aan caadi ahayn waa mamnuuc.

BEDELIDDA DASTUURKA



Dastuurka Waddanka Maraykanka waxaa loogu yeedhaa dukumentii nool (“living document”) maxaa yeelay dadka Maraykanku iyaga oo la kaashanaya wakiilada gobolka iyo kuwa qaranka ayey bedeli karaan dastuurka markay lagama-maarmaan noqoto. Bedelaadan waxaa loogu yeedhaa (“amendments”). Wuu dheeryahay ama wuu adag yahay habka bedelista Dastuurku, waxa la bedeley todoba-iyo-labaatan 27 jeer oo qudha intii taariikhda waddankeenu jiray. Qaynuunka bedelaad kuwa ugu muhiimsan oo soo raaca Codka xuquuqaha waxaa ka mid ah Saddex-iyo-toban (Thirteenth amendment), kaas oo mamnuucay is adoonsiga, iyo Afar-iyo-toban (Fourteenth amendment), kaas oo ballan qaadaya in dhammaan dadku siman yahay marka loo eego sharciga. Kan sagaal-iyo-tobnaad (Nineteenth Amendment) wuxuu siiyey dumarka xuquuqda codbixinta.

Habka Dowladda Sare u Shaqayso

13 ka deegaan ee asalka ahaa waxay ku hoos noolaayeen xukumka boqorkii Ingiriiska. Dowladooda cusub ee dhexe, waxay Ameerikaanku rabeen in ay ka hor tagaan in awood buuxda la siiyo hal qof oo dowladda ka mid ah ama xafiis. Dastuurku wuxuu sameeyey saddex laamood dowladda sare ah, si xukunku u miisaanaado. Saddexda laamood waxay hayaan mas’uuliyado kala qaybsan. Waxanu habkan ugu yeedhnaa hubinta iyo isu dheelitirka “checks and balances”. Laan qudha oo dowladda ka tirsan ma noqon karto wax awood buuxda leh, maxaa yeelay labada kale ayaa isu dheelitiraya awooda dowladda.

DOWLADDA SARE AMA FEDARAALIGA AH

Saddexda laamood ee dowladda sare waa:



Laanta sharcidejinta:
Koongareeska (Congress)
Maraykanka iyo xafiisyada
la xidhiidha



Laanta madaxtooyada:
Madaxweyne, madaxweyne-kuxieen,
iyo waaxaha dowladda
federaliga ah



Laanta garsoorka:
Maxkamada Sare ee Waddanka
Maraykanka iyo Maxkamadaha
federaliga ah ee waddanka oo dhan

Laanta Xeer-dejinta: Koongarayaska

Shicibka Waddanka Maraykanku waxay ku codeeyaan doorasho madaxbannaan oo ay ku soo doortaan wakiiladooda uga qayb gelaya U.S. Koongaraska. Koongarasku waxay ka mas’uul yihiin in ay dejiyaan sharciga qarankeena. Koongarasku waxay u kala baxaa Aqalka Wakiilada iyo Senatka.

Aqalka Wakiilada ee Waddanka Maraykanka

Gobolka kasta dadkiisa ayaa soo doorta xubnaha ka tirsan Aqalka Wakiilada. Waxaa weeye Aqalka Wakiiladu 435 xubnood, oo inta badan loogu yeedho Aqalka “the House.” Lambarada wakiiladu waxay ku xidhan tahay gobol kasta dadka degan inta tiradood dhan tahay. Goboladu waxay u kala baxaa degmooyin. Dadka

degmo kasta ku nool ayaa u codeeya doorasha qofka degmadooda wakiil uga noqondoona Aqalka. Wakiil kasta wuxuu shaqada hayaa labo-sanno, markaa ka dib dadku waxay haystaan fursad kale oo ay ku soo doortaan qof kale oo wakiil u noqda. Wakiiladu waxay Koongaraska ku jiri karaan waqti aan xadd lahayn.

Waxaa jira shan xubnood oo dheeraad ah oo Aqalka ka tirsan. Wakiiladan waxa weeye kuwa Degmada Columbia, barwaaqosooranka Puerto Rico, Guam, American Samoa iyo Jasiirrada U.S. Virgin Islands. Waxaa laga yaabaa in ay ka qayb galaan dooda, laakiin kama qayb geli karaan codbixinta caadiga ah ee Aqalka.

MADAXDA DOWLADU WAXAY U ADEEGAAN DADKA



Waddanka Maraykanka, qof kasta ayaa wici kara wakiilka ay doorteen iyo gololaha senetariska (senators). Waxaad wici kartaa lambarka 202-224-3121 oo weydiin kartaa xafiiska wakiilkaaga iyo senetariska. Waxaad u qori kartaa wakiilkaaga iyo senetariska si aad u weydiisid su'aalo ama ra'yigaaga ka dhiibatid waxa ku saabsan sharciyada, dowladda federaaliga ama haddi dhib kaa haysato oo aad u baahan tahay in lagugu caawiyo kaalmooyinka federaaliga.

Si aad ugu qortid wakiilkaaga:
The Honorable (Wakiilka magacisa oo dhan)
U.S. House of Representatives
Washington, DC 20505

Si aad ugu qortid Senetarkaaga:
The Honorable (Senetarka magacisa oo buuxa)
United States Senate
Washington, DC 20510

Waxaad booqan kartaa shebekada internetka ee Koongaraska si aad u ogaatid arrimaha ka socda Aqalka iyo senetka, wakiilkaaga iyo senetariska, oo ay ku jiraan ciwaanka shebekadooda.

- Aqalka Wakiilada waxaad booqataa <http://www.house.gov/>.
- Senetka waxaad booqataa <http://www.senate.gov/>.

Wakiilda Aqalka iyagaa sharciga soo saara, laakiin waxaa saaran mas'uuliyad gaar ah. Wakiilda Aqalka oo qudha ayaa sameyn kara:

- Ujeedda sharciga ee ku saabsan cashuuraha.
- Go'aan ka gaadhi kara haddii madaxda dowladda lagu soo eedeeyo in ay ka galeen denbi waddanka oo la hor keeno Golaha Senetka. Waxaa kan luugu yeedhaa casilaad "impeachment".

WAXAAD SAMEYN KARTO



Baro waxa ku saabsan wakiilkaaga, senetariska iyo waxyaabaha ay ka qabanayaa si ay wakiil kaaga noqdaan Koongaraska. Si aad sidan u sameysid waxaad ka raadin kartaa sheekooyin ku saabsan iyaga oo ku qoran jariirda iyo internetka Koongaraska. Dhammaan Wakiilda iyo Senetariska waxay xafiisku ku leeyihiin meelha beelahoodu degan yihiin; waxaad liiskan ka heli kartaa bogga buluuga ah ee buugga telefoonka. Haddii aad booqatid Washington, DC, waxaad dalxiis bilaash ah u mari kartaa Aqalka (U.S. Capitol) oo ah meesha Koongaraskeeku ka shaqeenyaan.

Waxaad baran kartaa waxyaabaha ku saabsan Madaxweynaha markaad booqatid shebekada internet ee Aqalka Cad (White House) oo ah Aqalka Madaxweynaha. Booqo <http://www.whitehouse.gov/>.

Golaha Senetka ee Waddanka Maraykanka

Golaha Senetka Waddanka Maraykanku wuxuu ka kooban yahay boqol 100 Senatar. Gobol walba dadkiisa ayaa soo doorta labo Senatar oo uga qayb gala Koongaraska. Senatarisku waxay xilka sii hayaan lix sanno, markaa dadku waxay leeyihiin fursad kale oo dib ugu soo doortaan Senataradaas ama kuwo kale iyaga metela. Senatarisku waxay xilka hayn karaan waqti aan xad lahayn. Senatarisku waxay sameeyaan sharciyada, laakiin sidoo kale waxaa saaran mas'uuliyad gaar ah.

Senetka keliya ayaa oran kara:

- Dheh “haa” ama “maya” heshiis kasta oo madaxweynnuhu la galo waddamo ama ururo. Kan waxaa loo yaqaan “heshiisyo.”
- Dheh “yes” ama “no” qof kasta oo madaxweynnuhu u doorto shaqo heer sare ah, sida Maxkamada Sare ama Madaxada loo magcaabo wasaarada dowladda, sida Waaxda Waxbarashada ama Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka.
- In la dhegeysto dacwada Madaxda dowladda oo Wakiilada Aqalku “casilayaan”.



Laanta Madaxtooyada: Madaxweynaha

Madaxweynuhu waa hogaamiyaha laanta madaxtooyada, wuxuuna ka ka mas'uul yahay haynta iyo hirgelinta sharciga Waddanka. Madaxweynuhu wuxu hayaa xilal kale oo badan, sida dejinta siyaasada qaranka, sharci u soo jeeddinta Kongaraska, doorashada golaha madaxda sare iyo xubinta Maxkamada Sare. Sidoo kale Madaxweynuhu waa hogaamiyaha ciidamada militariga ee Waddanka Maraykan waxana laga yaabaa in loogu yeedho Hogaamiye Sare (“Commander in Chief”).

Dadka ayaa u codeeya doorashada madaxweynaha iyo madaxweyne-kuxigeenka in ay xilka hayaan muddo afar-sanno ah. Madaxwayna waxaa uu xukhinka uyam karaa labo mar oo isky xiga oo midkiiba yahay afan sanno. Madaxweyne-kuxigeenku wuxu noqdaa madaxweyne haddii madaxweynuhu naafoobo ama dhinto.

Laanta Garsoorka: Maxakamada Sare

Dastuurka ayaa dhisay Maxakamada Sare, waa maxakamada ugu sarreysa Waddanka Maraykanka. Waxaa Maxakamada Sare fadhiya sagaal xaakin. Waxaa loo yaqaan “caddaaladaha.” Madaxweynaha ayaa soo doorta xubnaha Maxakamada Sare, waxayna xilka sii hayaan ilaa iyo intay kari karaan. Maxakamada Sare waxay diidi kartaa sharciyada gobolka iyo kuwa dowladaba, haddii ay ka hor yimaadaan Dastuurka. Waxaa jira maxakamado kale ee dowladda, sida Maxakamada Degmada iyo Maxakamada Marista Racfaanka ee Waddanka Maraykanka.

Si aad u baratid waxyaabaha ku saabsan Maxakamada Sare ee Waddanka Maraykanka, booqo. <http://www.supremecourtus.gov>.

Gobolka iyo Dowladda Hoose

Marka lagu daro dowladda federaaliga ah, gobol kasta wuxuu iskii u leeyahay dastuur iyo dowladda u gooni ah. Sidoo kale gobol kasta dowladiisu waxay u kala baxdaa saddex laamood: sharcidejinta, madaxtooyada iyo garsoorka.

Hogaamiyaha laanta madaxtooyada gobolka waxa la yiraahdaa “guddoomiye” (“governor”). Dadka gobolka degan ayaa u codeeya in ay soo doortaan guddoomiyaha iyo wakiiladooda uga qayb gelaya maamulka gobolka. Maamulka gobolka ayaa sameeya sharciyada qabanaya gobol kasta. Sharciyadani kama hor iman karaan Dastuurka Waddanka Maraykanka, oo gobol kasta laantiisa garsoorka ayaa haysa sharciyada gobolka.

Sidoo kale gobol kasta wuxuu leeyahay dowlad hoose. Waxaa jira dowladda magaalada ama degmada ama labadaba. Waxay bixiyaan oo dul ahaan ka warhayaan adeegyo badan oo ay u qabtaan beesha, sida iskuulada dadweynaha, maktabadaha, booliska, dab-damiska, biyaha, gaaska iyo adeegyada korontada. Dadka beesha ayaa soo doorta madaxda dowladda hoose, laakiin madaxda dakhliga qaarkood waa la soo magcaabaa. Dowladda hoose waxay leedahay qaab kala duwan. Qaarkood duqa magaalada ayaa u madax ah, magaalooyinka qaarkood waxay leeyihiin golaha ama guddiga degmada. Dadweynaha degmooyinka waxa kale oo ay leeyihiin guddiyada dugsiyada, muwadiniin la doorto ama la magacaabo si ay uga warhayaan dugsiyada daweynaha.

WAXAAD SAMEYN KARTO



Inta badan dowladda hoose shirkeedu waa u furan yahay dadweynaha. Qaarkood waxaa shirkooda la qabtaa habeenkii si qof kasta uga soo qayb galo. Tusaale: waxaad tegi kartaa shirka guddiga magaalada ama kan guddiga iskuulka si aad u ogaatid waxyaabaha ka socda beeshaada dhexdeeda. Shirarka, waqtiga la qabanayo iyo meesha waxaa badi lagu qoraa jariirada. Waxa kale oo lagu liisgarayn karaa boggaga internet ee dowladda. Kulamada dowladda hoose waxaa badi lagu xayeysiiyaan telefisyoonka ama saldhigyada keybulka.



Qaadashada Dhalashada Maraykanka

Qaadashada Dhalashada Waddanka Maraykanku waxay siinaysaa deganaha rasmiga ah xuquuqo iyo mudnaan cusub. Qaadashada Dhalashadu waxay kale oo keentaa mas'uuliyado cusub. Qaybtani waxay kuu soo bandhigaysaa sababo qaarkood oo ku saabsan ka fekertida qaadashada dhalashada Waddanka Maraykanka iyo waxyaabo kuu sharraxaya waxaad u baahan tahay in aad ku noqotid waddani.

Si aad u noqotid waddani, waa in aad doonaysid in aad ku dhaarto daacad u ahaanta Waddanka Maraykanka. Waa in aad ka tanaasushid u adeecsanaanta waddamo kale. Waa in aad raacsan tahay taageerida difaaca Dastuurka Waddanka Maraykanka. Marka aad noqotid waddani, waxaad oggolaan dhammaan mas' uuliyadaha saaran shicibka Maraykanka. Sido kalena, waxaad heli doonta xuquuq u gaar ah muwaadiniinta.

Maxaad u noqonaysaa Waddani Maraykan ah?

Qofka warqada deganaashaha heysta wuxuu leeyahay xuquuqo badan oo la mid ah kuwa uu heysto qofka dhalashada heysta laakiin waxaa jira sababa badan oo aad uga fakirted inaad dhalashada wadanka qaadatid. Waxaa ka mid ah sababahan:

- **Tusida wadanimadaada dhabta ah.** Inaad wadankaaga cusub dhalashadiisa qaadatid waxay caddeyn u adeecsanaantaada waddankaaga cusub.
- **Codayn.** Doorasha federaaliga waxaa keliya oo codayn kara dadka ah wadaniyiinta. Sidoo kale gobolada intoodda badan way adkeeyaan xaqa ah codaynta siday u badan tahay doorashadu waxa loogu tala galay dadka Maraykanka ah.
- **Gudashada xilka xeer beegtida.** Xeer beegga maxakamadaha sare waxaa ka qeybqaadan kara dadka wadaniyiinta ah oo keliya. Dawlada gobolada intooda badan waa sidoo kale. Waana arrin muhiim ah oo xil badani saran yahay muwaadinka Maraykanka ah.
- **Ku sodcaalka lagu sodcaalayo baasaborka Maraykanka.** Baasaborka Maraykanku wuxuu kaa caawin karaa markaad wax uga baahan tahey dawladda wadanka dibadiisa, haddii loo baahdo.
- **Keenidda Ehelada.** Markaad rabted inaad wadanka keentid ehelkaaga waxaa mudnaanta la siiyaa dadka heysta dhalashada wadanka.
- **Qaadashada shahaadada dhalashada caruurta aan waddanka gudahiisa ku dhalan.** Kiisaska intoodda badan, waddani Maraykanka ah oo waddanka banaankiisa ilme ugu dhasho wuxuu ilmahaasi noqonayaa waddani Maraykan ah.
- **U qalmidda shaqooyinka dowladda federaaliga.** Shaqooyinka qaarkood ee dowladda waxaa laysaga baahan yahay shahaadadda dhalashada Waddanka Maraykanka.
- **Noqoshada madaxa la doortay.** Waddaniga keliya aay u carari xafiiska dowladda federaaliga (Senetka ama wakiilka Kongresska) iyo kuwo badan oo gobol ama xafisyada hoose.
- **Haysashada deganaanshaha.** Waddanigu wuxuu xaq u lee yahay in uu joogo Waddanka Maraykanka oo aan laga kaxayn karin.
- **U qalmida deeqda lacageed ee federaaliga iyo deeqda waxbarasho.** Gargaar maaliyadeed oo badan oo lagu deeqo, waxaa ka mid ah, deeqda waxbarasho ee kuliyada iyo deeq lacageed dowladu bixiso oo ujeedooyin kala duwan loogu talagalay ayaa u diyaar ah wadaniyiinta Maraykanka oo keliya.
- **Qaadashada manfacyada dowladda.** Manfacyada dowladda qaarkood ayaa u diyaar ah wadaniyiinta Maraykanka oo qudha.



Waddaniyad: Dhalasho Qaadasho

Habka loo maro noqoshada waddaninimada Waddanka Maraykanka waxaa loogu yeedhaa waddaniyayn (“naturalization”). Waxaad dalban kartaa waddaninimada mar keli haddii aad buuxiso rabitaanada soo socda:

Ugu yaraan waa inaad mudo shan sano ah ku deganaataa warqada deganaashaha (ama saddex sano haddii aad guursatid ama aad la noolayd qof maraykan ah inta aadan dhalashada codsan).

Ugu yaraan jooga Waddan Maraykanka bilood 30 marka laga jaro shantii sanno ee in soo dhaafay (ama 18 bilood marka laga jaro saddexdii sano ee ina soo dhaafay haddii aad guursatey ama la noolayd qof Maraykan ah).

Ugu yaraan ku noolayd gudaha gobol ama degmado ka tirsan USCIS-da saddex bilood ka hor intii aadan wax dalban.

Waxaa laga yaabaa inaad raacdid shari gooni ah haddii:

- Adiga, ama waalidkaaga dhintay, xaaskaaga ama caruurtaada kasoo shaqeeyay Ciidamada Maraykanka.
- Waxaad tahay Maraykan asal ah.
- Haddii aad ku qaadatey warqada deganaashaha cafiskii sanadkii 1986.
- Waxaad tahay qaxooti mise magangelyo doon.
- Waxaad qabtaa xaas Maraykan ah oo banaankiisa ku nool.
- Sharci hore dartii ayaa lagaaga qaaday dhalashadii Waddaninimada Maraykanku sababtuna tahay guursi qof aan waddani ahayn.
- Aad shaqaale u tahay nooc shirkadaha ka mid ah ama urur samafal ah.

Ka eeg *A Guide to Naturalization (Hagaha Waddaniyaynta)* wixii warbixin dheeraad ah. Sidoo kale waxaad la tashan kartaa qareen socdaalka ah ama kuwo kale oo xirfad u leh arrimahaas.

HELISTA MACLUUMAADKA WADDANIYAYNTA



Dadka da'doodu tahay sideed-iyto-ban 18 ama ka weyn oo raba in ay noqodaan waddani waa in ay buuxiyaan foomka M-476, ee *A Guide to Naturalization (Hagaha Waddaniyaynta)*. Hagahan waxa ku jira macluumaad muhiim ah oo ku saabsan waxyaabaha loo baahan yahay. Waxa kale oo ay sharraxaysaa foomamka aad u baahan doontid markaad bilaabaysid habka waddani noqoshada.

Si aad u aragtid haddii aad u qalantid dalbashada waddaninimada, eeg foomka M-480, ee Xaashida u-Qalmida Waddaninimada (Naturalization Eligibility Worksheet) oo ku dhammanaysa *A Guide to Naturalization (Hagaha Waddaniyaynta)*. Isticmaal foomka N-400 si aad u codsatid waddaniyaynta. Xeraynta foomka N-400 waa lacag.

Si aad u heshid foomka M-476, M-480, iyo N-400, wac khadka foomamka USCIS-ta oo ah 1-800-870-3676 ama ka qaado <http://www.uscis.gov>.

Waxa Waddaniyanta looga Baahanyahay

Waxyaabaha guud ahaan ee looga baahan yahay waddaniyanta waa:

1. In aad ku noolaatid waqti gaar ah Waddanka Maraykanka degaanaade rasmiya ahaan (si wadid Degaanshaha Rasmiga ah).
2. In aad sii joogtid Waddanka Maraykanka waqti go'an (Qof ahaan aad joogtid).
3. In aad waqti gaar ah joogtid gobolkaaga ama degmada USCIS-da (Waqtiga Gobolka gudihisa ama Degmada USCIS-ta).
4. In aad asluub iyo anshax fiican leedahay (Dadnimo wanaagsantahay).
5. In aad taqaanaa Af-ingiriisida iyo macluumaadka ku saabsan taariikhda Waddanka Maraykanka iyo dowladda (Ingiriisida iyo Aqoonta Waddanka).
6. In aad sii wadid garwaaqsashada iyo aqbalida mabaadiida Waddanka Maraykanka (Ku xirnaanta Dastuurka).

IN AAD SII WADATID KU NOOLAANSHAHA DEGANAADA RASMIYA AHAAN



Haddii aad Waddanka Maraynka ka maqan tahay:

In ka badan lix bilood

In ka badan hal sanno

Degaanshahaaga rasmiga waxa weeye:

Laga yaabee in uu khasaarobey

Khasaarobey

Si aad u haystid sharcigaaga waa in aad:

Caddaysid in aad halkan sii deganaanayd, ka shaqaynsid iyo/ama sii wadid xidhiidhka Waddanka Maraykanka (sida, bixinta cashuuraha) intaad ka sii maqan tahay.

Kiisaska intoodda badan, waa in aad dib u biloowdid sii wadida degaanshahaaga. Dalbo oggolaanshaha dib u soo gelida ka hor intaadan dhoofin haddii qorshahaagu yahay in aad ku soo noqotid Waddanka Maraykanka si degaanaade rasmiya ahaan.

1. Sii wadid Degaanshaha Rasmiga ah

Sii waditaanka degaanshaha rasmiga ah (“Continuous residence”) Micnaheedin waa in aad waqti gaar ah aad ku Nooshahay Waddanka Maraykanka degaanaade rasmiya ahaan. Dadka intoodda badani waa in ay sii wataan degaanshaha rasmiga ah ilaa shan sanno (ama saddex sanno haddii ay guursadaan waddani Maraykanka ah) ka hor intaanay bilaabin habka lagu helo waddanimada. Qaxooti ahaan, tan micneedu waxa weeye shan sanno in aad joogtey laga bilaabo taariikhdii aad Waddanka Maraykanka soo gashay oo ah badiyaa maaliintii lagu sii degaanshaha rasmiga ah. Kuwa la siiyey sharciga maganghelyada ee Waddanka Maraykanka, waqtigiisu wuxuu bilaabmaa sannad ka hor intaan degaanshaha rasmiga ah la siin. Taariikhda kaadhka degaanshaha rasmiga ah ku qoran waa taariikhda shanta sanno kuu bilaabatay. Haddii aad ka maqnayd muddo waddanka Maraykanka, badiyaa lix bilood ama in ka badan, waxaa laga yaabaa inaad “jebisay” sii wadashadii degaanshaha.

DHAWRISTA DEGANAANSHAHAGA EE UJEEDEDA WADDANIYAYNTA: MARKA LAGA REEBO HAL SANNO OO MAQAANSO AH



Haddii aad u shaqaysid dowladda Maraykanka machad cilmi baadhis ah oo laga yaqaano Waddanka Maraykanka, sharikado Maraykan ah, ama haddi aad ka tirsan tahay urur diineed oo adeegyo ka bixiya waddanka dibadiisa waxaa laga yaabaa in aad dhawri kartid sii wadashada deganaanshaha haddii aad:

1. Qof ahaan joogtey oo ku noolayd waddanka Maraykanka adigoon dhoofin ugu yaraan hal sanna ka dib markaad noqotay deganaade rasmi ah.
2. Xereysid foomka N-470, Arjiga dhawrista deganaanshaha rasmiga oo ujeeddadiisu tahay waddaniyaynta (Application to Preserve Residence for Naturalization Purposes), intii aadan waddanka Maraykanka soo gelin hal sanno ka hor. Waxaa jirta lacag yar oo lagu xereeyo foomka N-470.

Warbixinta intaa ka badan, la xidhiidh khadka foomamka USCIS-at oo lambarkoodu yahay 1-800-870-3676 ama weydii foomka N-470, Arjiga Dhawrista Deganaanshaha rasmiga ah (Application to Preserve Residence for Naturalization Purposes) oo ujeeddadiisu tahay waddaniyaynta. Sidoo kale waxaad ka heli kartaa foomamka USCIS-at shebekada internetka oo ah <http://www.uscis.gov>.

Haddii aad ka maqantahay Waddanka Maraykanka hal sanno ama ka badan, waxaa laga yaabaa in aad soo noqon kartid haddii aad haysatid oggolaanshaha dib oo soo gelida. Waa in aad dalbatid oggolaanshaha dib oo soo gelida inta aadan Waddanka Maraykanka ka dhoofin ka hor. Eeg bogga 7 macluumaadka kuu sheegaysa sida loo dalbado oggolaanshaha dib oo soo gelida. Kiisaska intooda badan, waxba lagama soo qaadayo waqtigii aad joogtay Waddanka Maraykanka ka hor intii aadan waddanka ka tegin oo loo xisaabin lahaa waqtigii sii wadida deganaanshaha waddaniyaynta. Tan micneheedu waxa weeye in aad u baahan doontid bilaabida sii deganaanshaha mar kale ka dib markaad ku soo noqotay Waddanka Maraykanka, ama laga yaabo in aad sugtid afar sanno iyo hal maalin ka hor intaadan dalban waddaniyaynta.

→ **TALO:** Foomka oggolaanshaha dib oo soo gelida (foomka I-131, Application for a Travel Document) iyo Arija Dhawrista Deganaanshaha rasmiga ah oo ujeeddadiisu tahay Waddaniyaynta (foomka N-470, Application to Preserve Residence for Naturalization Purposes) isku mid ma aha. Waxaa laga yaabaa in aad tustid oggolaanshaha dib oo soo gelida intaad tusi lahayd Kaadhka Deganaanshaha Rasmiga ah (haddii aad maqnayd muddo ka yar 12 bilood) ama tus fiise (haddii aad maqnayd muddo ka badan 12 bilood) ka dib markaad maqnaansha kumeelgaadhka ah ka soo noqotid oo soo gashid Waddanka Maraykanka.

MARKA LAGA REEBO SHAQAALAHA MILATARIGA



Haddii aad Ciidamada ku jirtid ama dhowaan lagaa saaray Ciidamada xooga dalka Maraykanka, sii haysashada deganaanshaha rasmiga ah iyo joogista gudaha waddanka waxaa laga yaabaa in aanay adiga ku khusayn. Waxaad warbixin dheeraad ah ka heli kartaa booga M-599 Macluumaadka Waddaniyaynta Shaqaalaha Milatariga (Naturalization Information for Military Personnel). Saldhig kastoo milatari ah, waa in uu leeyahay hab loola xidhiidhi karo oo ku saabsan arjigaaga waddaniyaynta iyo foormka caddaynta (foormka N-426, Request for Certification of Military or Naval Service), ee codsiga soo kala xaqijinta adeega milatariga ama Ciidamada badda. Waa in aad isku dirtid foormka N-426 iyo arjigaaga. Si aad u heshid foormka aad u baahan tahay, wac lambarka lacag la'aanta USCIS-ta ee khadka caawimaada Milatariga 1-877-CIS-4MIL (1-877-247-4645). Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa internetka <http://www.uscis.gov/military> ama wac lambarka Adeega Macmiilka oo ah 1-800-375-5283.

La socio in ka maqnaanshaha Waddanka Maraykanka inta arjiga waddaniyaynta kuu xeraysan yahay oo keeni karo dhibaato xagga qaadashada ama u qalmida, gaar ahaan haddii aad aqbashay in aad ka shaqaysid waddanka dibadiisa.

2. Qof ahaan aad joogtid Waddanka Maraykanka Gudahiisa

Qof ahaan aad joogtid micneheedu waa inaad xaqiiq ahaantii joogtid Waddanka Maraykanka gudahiisa. Haddii aad tahay deganaade rasmi ah oo da'diisu tahay ugu yaraan 18 jir, waa in aad joogtid Waddanka Maraykanka gudahiisa ugu yaraan 30 bilood shantii sanno ee ina soo dhaaftay (ama 18 bilood ee ina soo dhaaftay, haddii uu xaas Maraykan ah lahaa) ka hor intaadan dalban arjiga waddaniyaynta.

QOF AHAAN AAD JOOJTID



S: Maxay ku kala duwan yihiim "joogidda qof ahaan" iyo si wadid "Degaanshaha Rasmiga ah"?

J: Qof ahaan aad joogtid waa intii maalmood oo aad Waddanka Maraykanka gudahiisa ku noolayd oo dhan marka laga reebo waqtiiga aad Maraykanka ka maqnayd. Maalin kasta oo aad Waddanka Maraykanka bannaankiisa ku maqnayd waxay kaa jaramaysaa joogitaangaagii qof ahaaneed oo dhan. Haddii aad Waddanka Maraykanka muddo dheer ka maqnaatid ama haddii safaro gaaban u baxday waxaa laga yaabaa in aadan ka soo bixin joogitaangaagii qof ahaan qof ahaan aad joogtid ee lagaaga baahnaa. Si aad u tirsatid waqtigii joogitaangaaga gudaha qof ahaan aad joogtid waa in aad isu dartid kuli waqtigii aad waddanka gudahiisa joogtey oo dhan. Ka dib ka jar dhammaan safaradii aad Waddanka Maraykanka dibadda uga dhooftay. Kan waxaa ku jira safarada gaaban oo aad ku tagtay waddanka Canada iyo Mexico. Tusaale, haddii aad Mexico u dhooftay Sabti iyo Axad, waa in aad ku dartid safada aad xisaabinaysey, inta maalmood, waddanka dibadda kaga maqnayd.

Sii wadid Degaanshaha Rasmiga ah waa intii casho ee deganaade rasmiya ahaan Waddanka Maraykanka gudahiisa aad ku noolayd oo dhan ka hor intaadan dalban waddaninimada. Haddii aad waqti badan Waddanka Maraykanka dibadda kaga maqnayd muddo hal safar oo keli ah, waxaa laga yaabaa in aad jebesay si wadid Degaanshaha Rasmiga ah.

3. Waqtiga Deganaanshaha Gobolka ama Degmada USCIS-ta

Dadka intoodda badan waa in ay ku noolaadaan gobol ama degmada USCIS ee ay ka dalban karaan waddaniyaynta ugu yaraan saddex bilood. Ardaydu waxay dalban karaan waddaniyaynta meeshay iskuul ka dhigtaan ama reerkoodu degan yahay (haddii ay ku tiirsan yihiin waalidkoodu).

4. Dadnimo wanaagsantahay

Si aad ugu qalantid waddanimada, waa in aad tahay qof asluub ama anshax fiican leh. Qofku ma yeelan karo “Dadnimo wanaagsantahay” haddii uu denbiyada qaarkood galo intii lagu dhex jirey shantii sanno ee la soo dhaafay ka hor intaanu dalban waddanimada ama haddii uu been ka sheegay su’aalaha waddaniyaynta la weydiinayey.

DABEECADAHA LAGA YAABO IN AY MUUJIYAAN ASLUUB LA’AAN



- Gaadhi wadista adoo khamri cabsan.
- Khamaarka sharci darrada ah.
- Dhileysiga.
- Been ka sheegida si aad u heshid manfacyada emigerayshanka.
- Inaad bixinweydid lacagta maxkamadu kugu amartay ee masruufka caruurta.
- Ku kacida falal argagixiso.
- Qof meelkaga dhicid sababtoo ah jinsiyadiisa, diintiisa, asalka qolodiisa, ra’yi siyaasadeed ama beel gaar ah.

Haddii aad gashay denbiyo gaar ah qaarkood, weligaa ma noqonaysid waddani Maraykan ah, waxana suurtoobi kara in waddanka lagaa masaafuriyo. Denbiyadan waxaa loogu yeedhaa laga xayuubiyey (“bars”) waddanimadii. Denbiyada la yiraahdo xaddgud daran “aggravated felonies” (haddii aad gashay denbiyadan ama ka dib bishii Noofambar 29. 1990), sida dil, kufsad, faraxumaynta caruurta, farasaar xaddgudub ah, khaayinnimo, sharci-darro ku qaadista dorogada, hub, iyo dadka sharci darro lagu qaado waxay ka mid tahay waxyaabaha waddanimada laysugu diido. Kiisaska intoodda badan, muhaajiriinta laga reebay ama laga eryey Ciidamada Maraykanka sababtuna tahay in ay yihiin muhaajiriinta ama ka baxsaday ciidanka Waddanka Maraykanka sidoo kale waa laga mamnuucay in ay qaataan dhalashada Waddanka Maraykanka.

Sidoo kale waxaa laga yaabaa in lagu diido dhalashada haddaad ku dhaqantid waxyaabo muujinaya asluub ama akhlaaq la’aan.

Denbiyada kale waa kumeelgaadh ka mamnuucida qaadashada dhalashada. Mamnuucida kumeelgaadhka ah waxay kaa hor joogsanyaa qaadashada dhalashada ilaa shan sanno ka dib makaad gashay denbiga. Kuwan waxaa ka mid ah:

- Denbi kasta oo ah in qof si ulakac ah wax lagu yeelo.
- Denbi kasta oo ah in wax lagu gaadhsiiyo hanti ama khaayinnimo xagga dowladda oo maxkamad kugu xukuntay.
- Labo ama denbiyo ka badan oo isugu jira shan sanno ama ka badan oo maxkamad kugu xukuntay.
- Meel kaga dhac sharciga haysashada mukhaadaraadka (sida isticmaalida ama iibinta maandooriyeyasha sharci darro ah).
- Xabsi ku jirid ilaa 180 maalmood ama ka badan shantii sanno ee la soo dhaafay.

Waa inaad soo sheegtid denbiyadii aad gashay markii aad dalbatay waddanimada. Waxaa denbiyadaa ka mid ah kuwii laga tirtiray xogtaada ama aad gashay ka hor inta aadan 18 jir gaadhin. Haddii aadan u sheegin USCIS-at denbiyadan, waxaa laga yaabaa in lagu diido qaadashada dhalashada oo dacwad lagu soo oogo.

5. Ingiriisida iyo Aqoonta Waddanka

Guud ahaan, waa in aad muujin kartid wax akhriska, qorida iyo ku hadalka Af-ingiriisida asaasiga ah. Sidoo kale waa in aad aqoon guud u leedahay taariikhda iyo dowladda Waddanka Maraykanka oo (loo yaqaan “Aqoonta Waddanka”). Waxaa lagaaga baahan doonaa in aad ku gudubtaa imtixaanka Af-ingiriisida iyo imtixaanka cilmiga bulshada si aad u caddaysid aqoontaada.

Iskuulo iyo ururo badan ayaa caawiya dadka u diyaar garoobaya imtixaanka dhalashada waddanimada. Waxaad ka heli kartaa su’aalaha imtixaanka tusaalaha ah *A Guide to Naturalization (Hagaha Waddaniyaynata)*. Adeegyada Waddanimada iyo Socdaalka ee USCIS-tu wuxuu bixiyaa waxyaabo, sida kaadh ay ku duuban yihiin barashada (Civics Flash Cards) *Learn About the United States: Quick Civics Lessons (Cilmiga Bulshada oo ku saabsan waddanka Maraykanka iyo Casharo Degdeg)* ah wax looga barto oo kaa caawimaya waxbarshada. Waxyaabahan bilaashka ah waxaad ka helayaa internetka <http://www.uscis.gov>.

6. Ku xidhnaanta Dastuurka

Waa in aad doonaysid taageerada iyo difaaca Waddanka Maraykanka iyo Dastuurkiisa. Waxaad muuijsay “ku xidhnaan” iyo daacadnimo aad u haysid Waddanka Maraykanka iyo dastuurkiisa markaad ku Dhaaratay Daacadnimada. Waxaad noqonaysaa waddani Maraykan ah markaad ku Dhaaratid Daacad u Ahaanta.

LAGA REEBAY AF-INGIRISIDA IYO CILMIGA BULSHADA EE LOOGA BAAHAN YAHAY



Dadka qaarkood oo dalbada dhalashada waddanimada waxay qaataan imtixaan waxyaabaha looga baahan yahay ka duwan yihiin sababtuna tahay xagga da’dooda iyo intay tahay muddadii ay Waddanka Maraykanka ku noolaayeen.

Haddaad tahay	Oo aad Waddanka Maraykanka ku noolayd ilaa	Ma aad qaadan	Waa in aad ku qaadataa
50 jir ama ka weyntahay	20 sanno	Imtixaanka Af-ingiriisida	Imtixaanka cilmiga bulshada oo ah luqadaada
55 jir ama ka weyntahay	15 sanno	Imtixaanka Af-ingiriisida	Imtixaanka cilmiga bulshada oo ah luqadaada
65 jir ama ka weyntahay	20 sanno	Imtixaanka Af-ingiriisida	Imtixaanka cilmiga bulshada oo La Sahlay ee luqadaada

Haddii aadan rabin in aad qaadatid Imtixaanka Af-ingiriisida, waa in aad keensatid tujumaan kuu sheega imtixaanka cilmiga bulshada. Xaaladaha qaarkood, haddii aad naafo tahay oo aadan iman karin waraysiga imtixaanka, waxaa laga yaabaa in qorsheeyo gaar ah lagu sameeyo. Warbixinta intaa ka badan la xidhiidh laynka foomamka ee USCIS-ta 1-800-870-3676 ama weydii foomaka N-648 ama kala soo bax koobi internetka USCIS-da <http://www.uscis.gov>.

Dadka ay ka muuqato naafada jidhka ama maskaxda oo aan fahmi karin micnaha Dhaarta loogama baahna in ay dhaartaan.

Haddii arjiga dhalashdu kuu xeraysan yahay oo aad guurtid, waa in aad ogeysiisaa Adeega shahaadada dhalashada iyo Imigareyshan/socdaalka (USCIS) ciwaankaaga cusub. Waxaad wici kartaa 1-800-375-5283 si aad ugu sheegtid ciwaanka cusub. Sidoo kale waa inaad buuxisaa foomka AR-11 iyo kan Waaxda Nabadsugida ee Dalka Maraykanka (DHS). Waxaad kale ciwaankaaga ka bedeli kartaa internetka oo isitcmaalaysid foomka elektaroonikada lagu diro AR-11 oo ah <http://www.uscis.gov>. Eeg boga 8 ee sharraxaadaha.

Damaashaadka Waddanimada

Haddi Adeegyada Wadaninimada iyo Socdaalka ee Maraykanka (USCIS) ay arjigaaga waddanimada oggolaato waa in aad ka qayb gashid xaflada u dabaaldega warqada dalashada iyo dhaarinta. USCIS-tu waxay kuu soo diraysaa foomka N-445 (Notice of Naturalization Oath Ceremony), iyo ogeysiiska xaflada waddanimada iyo dhaarinta si ay kuugu sheegaan waqtiga iyo taariikhda la qabanayo. Waa inaad foomka dhammaystirtaa oo hore u soo qaadataa markaa imanysid xaflada.


Haddii aadan tegi karin xafladaada, dib baad u dhigan kartaa xafladaada. Ballan dib u dhigashada, waa in aad ku soo celisid foomka N-445 xafiiska USCIS-ta oo ay la scoto warqad sharraxaysa sababta aad u iman kari weydey xaflada.

Waxaad u soo celin doontaa kaadhkaaga degaanshaha rasmiga ah USCIS-ta markaad lagu dhaarinayo. Mardanbe u baahnid kaadhka Giriin Kaadhka sababtoo ah waxaad meesha xaflada ka qaadan doontaa shahaadadda dhalashada.

Weli waddani ma noqonaysid ilaa lagu dhaariyo. Sarkaalka ayaa si tartiib ah u akhriyi doona qayb kasta oo ka mid ah dhaarta idina weydiin in aad ka daba dhahdiin Marka lagu dhaariyo kadib, waxaa helaysaa ama lagu siin Shahaadaddadii dhalashada waddanimada. Shahaadaddani waxay caddaynaysaa in aad tahay qof haysta dhalashada Maraykanka. Weli waddani ma noqonaysid ilaa lagu dhaariyo meesha xaflada lagu qabtay.

Xaflada dhaarintu waa mid dadweyne u dhexaysa. Beelo badan ayaa u dabaaldega Maalinta Xornimada ee 4 bisha Juuliyo, sannad kasta. Eeg in beeshaadu u dabaaldego 4 bisha Juuliyo iyo xaflada dhalashada si aad ugu gayb geli kartid. Dad badan ayaa keena qoysaskooda oo damaashaada xaflada ka dib.

WADDANKA MARAYKANKA EE MAANTA (QARIIDADA)*



*Sidoo kale Waddanka Maraykanka waxaa ku jira waddama ama gobolada ay ka mid yihiin Guam, American Samoa, U.S. Virgin Islands, iyo isbaheysiga Jasiiradaha Woqooyiga Mariana iyo Puerto Rico kuwaas oo aan ku jirin khariidada Maraykanka.

FASAXYADA DOWLADDA

Fasaxyada ama feestooyinka dowladda federaaliga ee caanka ah waa kuwan soo socda. Xafiisyada dowladda intoodda badan waa la xidhaa maalintaa. Haddii fasaxu ku beegmo Sabti, waxaa fasaxa laga dhigaa Jimce. Haddii fasaxu ku beegmo Axad, waxaa fasaxa laga dhigaa Isniin. Shaqaaleeyayaashu intooda badan waxay shaqaalahooda siiyaan fasax maalmahaas.

Sannadka Cusub	Kowda Janaayo
Dhalashada Martin Luther King, Jr.	Isniinta saddexaad ee Janaayo
Maalinta Madaxweyneyaasha	Isniinta Saddexaad Feebaraayo
Maalinta Xuska	Isniinta ugu Danbaysa Bisha Maayo
Maalinta Xornimada	4ta Luuliyo
Maalinta Shaqaalaha	Isniinta ugu Horeysa Setembar
Maalinta Kolombos (“Columbus”)	Isniinta Labaad ee Oktoobar
Maalinta Ciidamada Hawlgabay	11ka Noofembar
Maalinta Mahadnaqa (Thanksgiving)	Khamiista 4aad ee Noofembar
Maalinta Dhalashadii Nebi Ciise (Christmas)	25ka Desembar

ISKU DUWIDA SAWIRADA

Bogga 8, xuquuqda musawirka waxa mudan <http://www.goarmy.com>.

Bogga 28, sanduuqa tixda, musawirka sare waxaa qaaday Gerald L. Nino.

Bogaaga 1, 20, 46, iyo 47, musawirka waxaa qaaday John Vavricka.

Dariiqaad ku Sii Jirtaa

Waxaan ku rajo weynahay in aad hagahani ka heshid caawiyo faa'iido leh. Waxaa loo qoray in uu ku caawiyo markaad noloshaada ka bilodid Waddanka Maraykanka, iyo si aad u fahantid waxyaabaha aad xaq u leedahay iyo mas'uuliyada ku saran deganaade rasmiya ahaan. Hagahan wuxuu kuu sharraxayaa siyaabaha aad beeshaada u la shaqayn kartid. Sidoo kale wuxuu kuu sharraxayaa waxyaabaha aad u baahan tahay inaad baratid haddii aad rabtid in aad noqoto waddani maraykan ah. Haddii aad gashid internetka USCIS-ta waxaad ka helaysaa waxyaabo kale oo kaa caawiya barashada intaa ka badan. Waa kan intarnetkoodu (<http://www.uscis.gov>).

Hadda oo aad halkan timi, waxaad fursad u heshay in aad aragto nolosha Waddanka Maraykanka oo dhan. Waxaan kugu soo dhoweynaynaa deganaade rasmiya ahaan, waxaanuna ku rejeynaynaa guul iyo nolol wanaagsan in aad kala kulantid waddankan.



